Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA

TEL 32068
S. B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة التربية والتعليم
مركز تطوير المناهج

تليفون ٣٢٠٦٨
ص. ب ٧١٦٣



# TAARIIKH

## 4

## FASALKA AFRAAD
## DUGSIYADA SARE

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

**XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA**

TEL 32068

S. B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية

وزارة التربية والتعليم

**مركز تطوير المناهج**

تليفون ٣٢٠٦٨

ص . ب ٧١٦٣

# TAARIIKH

# 4

# FASALKA AFRAAD
# DUGSIYADA SARE

# HORDHAC

Buuggan waxa loogu talagalay taariikhda fasalka Afraad ee Dugsiyada Sare. Sida muqararku yahayna wuxuu ka kooban yahay taariikhda casriga ah ee ku siman ilaa bilowgii dagaalkii koowaad ee dunida. Waxa barayaasha looga digayaa in ay ku ekaadaan buuggan oo kaliya.

Waxa mahadnaq loo celinayaa Jaallayaasha Buuggan qoray oo ah Cabdiraxmaan Carte, Maxamed Cali Caraale, Amina X. Adan iyo Caasha X. Xaashi.

Waxa kale oo mahadnaq loo celinayaa Jaallayaasha buuggan isku dubbariday oo ah Yuusuf Cali Cabdi iyo Maxamuud Cali Hanfi. Waxa kale oo loo mahad celinayaa Maxamed Diiriye Cabdi oo buuggan dib u saxay mar labaadna daabacaadda u diyaariyay.

Waxa kale oo mahadnaq loo celinaya Jaallayaasha buuggan garaacay iyo Madbacadda Qaranka oo daabacday.

Waad Mahadsantihiin

Maamulaha Xafiiska Manaahijta

Xasan Daahir Obsiiye

# TUSMADA BUUGGA


B. Heshiisyadii Nabadgelyada ee Dagaalkii Dunida ee Koowaad .............. 6

1. Ururrada Qarammada .............. 6
2. Aayatashiga iyo Soohdimada Cusub ee Yurub .............. 7
3. Liicitaankii Yurub .............. 8
4. Kaabashadii Yurub .............. 10

T. Sababihii Dhaliyey Dagaalweynihii 2aad ee Adduunka .............. 10

1. Tallaabooyinkii dagaalweynihii 2aad ee Adduunka waddada u sii xaaray .. 11
2. Dagaalkii 2aad ee Adduunka Hillaaciisii .............. 18

J. Qaska Nabadda Adduunka .............. 38

1. Ururka Ummadaha Midoobay .............. 38
2. Yurub oo kala qaybsantay .............. 40
3. Jarmalka oo kala qaybsamay .............. 41
4. Cunaqabatankii Baarliinta Galbeed .............. 42

X. Bariga Dhexe .............. 44

1. Kacaankii Dh. Turkiga .............. 44
2. Dhibaatada Falastiin iyo Abuuritaankii Israa'iil .............. 48

KH. Yurub tan iyo 1919kii .............. 51

D. Taariikhda Midowga Soofiyeeti .............. 68

R. Taariikhda Shiinaha .............. 73

S. Qulquladii Kuuriya .............. 79

SH. Fiyetnaam .............. 83

DH. Gobannimadoonka Afrika .............. 87

## HESHIISYADII NABADGELYADA EE DAGAALKII DUNIDA EE KOOWAAD

Dagaalkii Dunida ee Koowaad wuxuu dhinaca galbeed ka joogsaday Nofember «1918», markii dawladda Jarmalku ay sidaa codsatay. Waxaana laysku raacay in shirweyne laysugu yimaaddo magaalada Baariis.

Shirkii ka furmay magaalada Baariis Jannaayo 1919kii, waxa ka qayb galay dawladihii dagaalka ku guulaystay iyo wixii ayaga raacsanaa. Inkastoo ulajeeddadiisii hore ay ahayd in uu noqdo shirweyne dawladaha oo idil isugu yimaadaan oo lagu faaqido dhibaatooyinka adduunka si loo helo nabadgelyo waarta, misana sidaa ma ayan noqon. Shirkii Baariis dawladihii ka qayb galay waxa dhab ahaantii go'aannadii ka soo baxay goyntooda lahaa saddex dawladood oo qura kuwaasoo ahaa: Ingiriiska, Faransiiska iyo Mareykanka. Heshiisyadaa lagu gaaray waxa gundhig u ahaa 14kii qodob ee uu soo jeediyay Madaxweynaha Mareykanka Wilson 8dii Jannaayo, 1918kii. Qodobbadaasi waxay ka kala hadlayeen waxyaabo fara badan, siiba Yurub, waxaanse ka soo qaadanaynaa kuwii khusaynaayay adduunweynaha.

Qodobka koowaad wuxuu cambaareynaayay heshiisyada qarsoodiga ah ee dawladuhu kala saxiixdaan, ujeeddadooduna aalaaba tahay dhac iyo boob. Waxa kaloo qodobbadaas, lagu soo sheegay lana codsaday in ummad walba xaq u leedahay in ay aayaheeda ka taliso.

Qodobka 14aad wuxuu Wilson ku codsanaayay in la dhiso urur qarammada ka dhexeeya si ay qola kasta ha yaraato ama ha weynaatee ay u hesho madaxbannaani siyaasadeed iyo soohdinteeda oo la nabadgeliyo.

Qodobbadii uu Wilson soo jeediyey waxa ku jiray waxyaaba badan oo aad u raalli geliyay dadweynaha adduunka oo idil.

Dadweynaha adduunka ku nooli kuma ay kalsoonayn madaxda reer Yurub oo siyaasaddoodu ku caanbaxday dal dhac iyo gumeysi, sidaa darteed aya aad loogu farxay hadalladii uu soo jeediyay Wilson, uuna uga horreeyay Lenin oo adduunka ugu baaqay nabadgalyo. Nasiibdarro habkii uu u dhacay shirkii Baariis iyo go'aannadii ka soo baxay ma ay noqon kuwii la malaysanayay.

Shirka waxa lagu maamulayey dibloomaasiyadii hiddaysiga ahayd ee reer Yurub waligoodba ku dhaqmi jireen, taasoo ku dhisnayd dhac iyo boob. Dawladda Jarmalka waxa lagu xukumay magdhow aad u culus. Sida caadadu ahaan jirtay heshiisyada nabadgelyadu waxay ahaan jireen kuwa laga wada hadlay oo laysla oggolaado go'aannadii ka soo baxay shirkii Baariis markii ay soo dhammaadeen ayaa la ogeysiiyay dawladihii dagaalka looga guulaystay.

Go'aannadii ka soo baxay shirkii Baariis waxa ugu qiima weynaa dhismaha ururka qarammada iyo hirgelinta mabda'a aayatashiga.

### URURKA QARAMMADA

Dhismaha Ururka Qarammadu waa qodob ka mid ah heshiisyadii Feersaylis dhammaantood. Ujeeddada laga lahaa Ururka Qarammadu waxay ahayd in la helo urur ay ku wada dhan yihiin dawladaha adduunka jira si ay uga wada shaqeeyaan badbaadada nabadgelyada. Waxa ra'yigaa lahaa madaxweynaha Maraykanka Wudrow Wilson, waxayna ka mid ahayd sababihii uu waddankiisa uga qayb galiyay

dagaalkii. Waxay la ahayd in haddii la jebiyo Jarmalka halkaa uu ku baaba'ayo dagaal jacaylku adduunkuna diyaar u noqonayo in uu dhiso urur ilaaliya xiriirka adduunweynaha. Si uu dawladaha oo idil u oggolaysiiyo ka soo qaybgalka ururka, wuxuu oggolaaday waxyaabo badan oo waxyeelleeyey mabaadi'idii lagu dhisay Ururka. Waxa intaa soo raacay barlamaanka Maraykanka oo diiday ka qayb galka ururka.

Ururka Qarammada, oo fadhigiisu ahaa Janiifa wuxuu lahaa, Xoghayn joogta ah, gole guud oo dawladaha oo idili ka qayb galaan codkoodana ka dhiiban karaan, gole gaar ah oo ay si joogta ah ugu leeyihiin kuraas shantii dawladood ee ugu xoogga weynaa (Ingiriiska, Faransiiska, Talyaani, Jabaan iyo Mareykanka), afar kursina ay u tartamaan dowladaha yaryar. Ugu horrayntii ururka Qarammadu uma dhismin si hagaagsan oo taabbagal ah. Waxa ururka ka maqnaa Jarmalka oo Faransiisku diidanaa, Midowga Soofiyeetiga oo waddammada hantigoosadka ahi dagaal kula jireen kana cabi qabeen in mabaadii'da ay hirgelinaysa waddammadooda ku soo fidaan. Waxa raacday dawladda Maraykanka markii barlamaankeeda oo u badnaa Xisbiga Jamhuuriga ah, uu ku diiday madadxweynihii Wilson, oo ka tirsanaa Xisbiga Dimoqraadiga in lagu socdo siyaasaddiisa.

Waxa uu ururka Qarammadu si rasmi ah u furmay 10kii Jannaayo 1920. Afartii sano ee u horreysay waxa keliya ee ururku qabtay hawl waxtar leh oo ay ka mid ahaayeen isku dubbbaridka, wax isla qabadka adduunweynaha xagga caafimaadka, gaadiidka iyo dhaqaalaha, waxa la dhisay hay'ado ka shaqeeya hawlahaas.

Wixii waqtigaa ka dambeeyey waxa bilowday Liicitaankii waxtarka ururka. Muddadii u dhexeysay 1929 iyo 1938 waxa adduunka ka dhacay dagaallo badan oo muujiyay karti la'aanta ururka. Dagaalladaas waxa ka mid ahaa dagaalkii Shiine iyo Jabaan (1931-33) kii Talyaaniga iyo Itoobiya, dagaalkii Isbeyn, boobkii Ustariya iyo arrinta Albaaniya. Waxa intaa weheliyay shirkii looga wada hadlayay dhimista hubka oo fashilay.

Ururku ma uusan ahayn mid dawladaha ku jiraa ay u siman yihiin ee waxa isaga tashaday Ingiriiska iyo Faransiiska.

Dawlado badan oo waaweyn ayaa waayihii dambe ururka ka maqnaa, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Jarmal, Jabaan, Talyaani, Midowga Soofiyeeti, iyo Mareykanka. Sidaa darteedna wax qabadkii ururku waxay noqotay mid aan waxba ka jirin, awoodna u yeelan wayday in ay horistaagto dagaalkii dunida ee labaad.

## AAYATASHIGA IYO SOOHDIMAHA CUSUB EE YURUB

Waxa la doonayay, welwel weynna ku hayay dawladihii reer Yurub ee ku guulaystay dagaalkii in ay Yurub ku soo celiyaan nabadgelyadii oo ay noqotana mid waarta. Waxa u caddaatay in sida arrintaasi ku suurageli karto ay tahay ayadoo loo oggolaado ummadaha ku nool Yurub in ay aayahooda ka taliyaan.

Markii mabda'aa la hirgaliyayna isbeddel weyn ayaa ku dhacay soohdimihii reer Yurub. Waxa dhashay dawlado cusub, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Jukoslafakiya, Yugoslafiya, Rumaaniya IWM. Qaar badan oo kalena soohdimahoodii ama way ballaarteen ama wey yaraadeen. Yurub gudaheeda aad ayay u yaraadeen xaqadarradii jirtay iyo dadkii ku hoos noolaan jirayba, wixii ka dambeeyay 1918kii. Waxase cambaareyn leh in aan haba yaraatee la tixgelin himilooyinkii ummadaha ku noolaa qaaradaha kale.

Dawladihii ku guulaystey dagaalka sidoodii ayay u haysteen waddammadii ay gumeysan jireen. Marna layskuma soo qaadin in dadyowga taliska dalkooda laga qayb galiyo, inkastoo intii dagaalku socday ballammo laga qaaday si gargaar looga helo.

Waxa keliya oo laysku soo qaaday waddammadii ay gumeysan jireen dawladihii dagaalka looga guulaystay, ayagana cidina, ma wayddiin wixii ay aayahooda ka doonayeen ee waxa kala boobay dawladihii dagaalka ku guulaystay. Waxa la yaab iyo isweydiin leh waxa ay ku kala duwanaayeen oo kala saraysiiyay dadyowga ku nool Balkanka iyo dadyowga ku nool Bariga dhexe oo Boqortooyadii Cusmaaniyiintii hore uga wada talin jirtay. Waxay dadyowga reer Yurubna xaq ugu yeesheen in ay aayahooda ka tashadaan, kuwaa ku nool Bariga dhexena ugu baahdeen in loo dhiibo Faransiiska iyo Ingiriiska, inkastoo la yiri waxa dusha ka ilaalinaya Ururka Qarammada oo ay ayagu u taliyaan. Igland waxay qaadatay Ciraaq, Urdun iyo Falastiin oo ay aad isugu hawshay sidii ay gacanta ugu dhigi lahayd, ayadoo doonaysay in ay Yuhuudda u gacan galiso, inta ay ka boobto dadkii degganaa ee xaqa u lahaa. Faransiisku wuxuu qaatay Suuriya iyo Lubnaan.

Dalalkii Afrika ee Jarmalku gumeysan jiray ayana cidna aayahooda lama weydiin ee waa la kala boobay. Afrikada Bari waxa qayb u helay Ingiriis. Afrikada Koonfur galbeed waxa loo dhiibay Afrikada Koonfureed. Kameruun iyo Toogo waxa kala qaybsaday Ingiriis iyo Faransiis, Jasiiradihii ku yiil badweynta Baasifigga waxa loo kala qaybiyay Ustareeliya iyo Jabbaan.

## LIICITAANKII YURUB

Wixii ka horreeyey dagaalkii Dunida ee koowaad Yurub door weyn ayey ka cayaaraysay taariikhda adduunka. Muddadii ka dambaysay dagaalka Yurub waxay bilowday in ay hoos uga soo dhacdo kaalintii ay kaga jirtay adduunka xagga dhaqaalaha, siyaasadda iyo dhaqanka. Inkastoo ayan dadka badankii u muuqan, waxa jiray astaamo tilmaamaya in taliskii amar ku taaglayska ahaa ee Yurub ee dhinac kasta adduunka ugu haystay uu hoos u dhacay, ayna soo guuxayeen isbeddello waaweyni. Waxyaabihii u sabab ahaa liicitaanka Yurub oo horeba u jiray waxay xoogeysteen soona bannaanbaxeen muddadii ka dambaysay dagaalkii Dunida ee koowaad.

Barwaaqada iyo awoodda siyaasadda ee Yurub waxa saldhig u ahaa hantigoosad iyo gumeysi, muddadii dagaalka ka dambeysayna labadaa tiirba weerar ayaa lagu soo qaaday. Weerarkaasi wuxuu keenay dib u dhac dhaqaale iyo xasilooni la'aan siyaasadeed.

Dagaalka hortii dhaqaalaha adduunka waxa maamuli jirtay Yurub. Alaabta Warshadeysan ee adduunkoo idil laga soo saaro, 65% waxa lagu samayn jiray Yurub. Maaliyad badan ayayna ku lahayd waddammada adduunka oy badankooda gumeysanaysay, khayraadkooduna ayaguu gacanta ugu jiray. Yurub sidaan soo aragnay dhibaatooyinkii dagaalkii ka soo gaaray wey ka soo kabsan weyday. Warshadihii reer Yurub badankoodu way baaba'een, oo isla waqtigaana dalka Maraykanka iyo wadammo badan oo ka baxsan Yurub ayaa waxay samaysteen warshado. Waxa warshadaha reer Yurub la tartamayey, kana sitayba faafidda mabda'a hantiwadaagga iyo dhalashadii Midowga Soofiyeeti oo aad u waxyeeleeyey awooddii Yurub.


Kacaankii Hantiwadaagga ahaa ee ka dhashay dalka Ruushka wuxuu u dhacshay ummadda xaqa u leh bankiyadii iyo warshadihii ay lahaayeen maalqabeenka Yurubta galbeed. Waxa kaloo Kacaanku ugu baaqay xoogsatada adduunweynaha oo idil in ay iskaashadaan oo ay iska dhiciyaan dadka yar oo xaqooda duudsiyay,

sidaa darteed waxa kordhay halgankii xoogsatada adduunka waxaana taagdar-reeyay nidaamkii hantigoosadka ahaa ee Yurub ay ku dhisnayd.

Waxa intaa soo raaca dagaalkii oo xoojiyay halgankii gobannimadoonka ahaa ee dalalkii ku hoos jiray gumeysiga reer Yurub. Mabda'a aayatashiga iyo dhalashada dawladda hantiwadaagga ee Midowga Soofiyeeti ayaa aad wax u taray xoogeysiga halganka gobannimadoonka ee waddammada Aasiya iyo Afrika.

Muddo dhan ayay Yurub iska indha tiraysay in ay tahay adduun sii liicaya, waxayse arrintaasi caddaatay dagaalkii dunida ee labaad.

**YURUB DAGAALKII KOOWAAD DABADII**




- Dhulka Jarmalka laga qaadey
- Dhulkii Ruushka laga qaadey
- Dhulkii laga qaadey Boqortooyadii Austeerya - Hangary
- Dhulkii Ururka Qaramada Midoobay uu gacanta ku hayey
- Dhulkii Rhine-Land oo ay qabsadeen dowladihii dagaalka ku guuleystey
- Dhulkii laga qaadey Bulgaariya

## KABSASHADII YURUB

Dagaalkii Dunida ee 1aad waxay Yurub ka soo baxday ayadoo aad u liidata ha noqoto xagga dhaqaalaha, nabadgelyada iyo xasiloonaanshaha siyaasadeed. Dadweynaha reer Yurub aad buu uga gilgilanayay nidaamkii hore loogu dhaqmayey, shuucinimaduna aad bay u fidaysay. Dawladaha reer Yurub waxa dhexyiil isnacayb, colaad iyo kala shaki. Heshiiskii Feersaylis wuxuu eeddii dagaalka oo idil dusha ka saaray Jarmalka oo waxa lagu xukumay in wixii khasaara ahaa uu u geystay wad-dammaduu ku duulay magdhabo. 1921kii magdhowga ay weydiisteen dawladihii ku guulaystay dagaalka wuxuu dhammaa 33 bilyan oo doollar. Jarmalku heshiiskaa kuma calool fayoobayn oo wuxuu had iyo jeer ka doodayey lacagtaa faraha badan oo lagu xukumay. Faransiiska oo ka cabsi qabay in Jarmalku dib u soo xoogaysto ayaanse marnaba oggolayn in loo naxariisto.

Intaa waxa weheliyey Ururka Qarammada oo xoog la'aan darteed ka soo bixi waayey kaalintiisii ahayd in uu sugo nabadda. Ururka Qarammadu ma uusan lahayn xoog uu ku horjoogsado haddii laba dawladood isku soo dulaan, sidaa darteed ayaa dawladihii waxay samaysteen heshiisyo isgaashaanbuureysi ah oo ay doonayeen in ay iskaga badbaadiyaan duulaan shisheeye. Faransiisku wuxuu heshiis isbahaysi ah la saxiixday Jekoslafakiya, Yuguslaafiya, Romaaniya. Jarmalka iyo Midowga Soof-iyeeti waxa dhexmaray heshiiskii Rabaallo 1922kii. Talyaaniga oo heshiiskii Feersey-lis aanu raali gelin wuxuu ku dadaalayay in ay meel ka soo wada jeestaan Ustariya. Hangeeriya, Bulgaariya iyo Albaaniya. 1920kii waxay u ekayd in ay Yurub ka gun-gaartay dhibatooyinkii uu ku reebay dagaalkii.

Kacaannadii demoqraadiga ahaa ee Yurubta dhexe waa la burburiyey. Marey-kanku wuxuu siiyay dawladaha reer Yurub amaah si ay waddammadooda dib ugu dhisaan. Jarmalkii waa loo fududeeyey bixintii magdhowga. Waxa la sameeyay Qorsheyntii Dawes ee 1924kii oo bixinta magdhowga loogu kala qaybiyay sannado iyo tii Yaang oo looga dhigay magdhowgii 8 bilyan oo qura. Baadidoonka nabadsu-gidduna wuxuu dhaliyay heshiisyadii Lokarno iyo Kaalog-Biiryand. Heshiiska hore Jarmalku wuxuu ku oggolaaday in uu ictiraafo soohdinta uu la lahaa Faransiiska iyo Biljinka, isagana waxa loo oggolaaday in uu xubin ka noqdo Ururka Qarammada. Heshiiska Biiryaand oo ay saxiixeen dawlado ka badan 60 waxa laysku raacay in aan dawladina siyaasaddeeda ku dhisin dagaal.

## SABABIHII DHASLIYAY DAGAALWEYNIHII 2AAD EE ADDUUNKA

### QARAMMADA HANTIGOOSIGA AH EE MUSTACMARADAHA HAYSTAY IYO KUWA AAN HAYSAN

Khayraadka dabiiciga ah ee adduunku isku si uguma wada baahsana deg-aanada. Taas waxa si cad u muujinaya meelaynta degaanada si dabiici ah loo beeri karo. Si loo soo saaro midho dadyow tiro badan noloshooda kaabi kara degaan waa in uu yeeshaa ciid hodan ah, roob ku filan, heerkul ku habboon iyo oogo siman. Geyigeena inta qodobbadaas lihi waxay dhan tahay boqolkiiba toddoba (7%) marka dhulka badankiisa la eego. Dhulka badankiisu waxa uu dhan yahay lixiyo soddon bilyan oo eeykar, inta se la beeri karaa waxay dhan tahay laba iyo bar bilyan oo eeykar. Dhulkaasi la beri karo qaybtiisa ugu weyn Yurub bay ku taal. Wax lala yaabo weeye in Yurub oo ah qaaradaha tan ugu yari in dhulka inta la beeri karaa ay saddex dalooloow dalool yeelato. Intaas waxa u raacay iyaga oo reer Yurub gacanta ku dhigay qaarado ka durugsan oo ay ka mid yihiin Ameerika, Ustareeliya iyo Niyuus-

iland, melayowgaasna ay degeen kuna tarmeen. Dalalka Aasiya iyo Afrika labadaba waxay ka sugteen gumeysi iyo ku dulnoolaansho, dabadeedna waxaa u suurtowday in khayraadka geyigeenu uu dadka cad ee reer Yurub gacanta u galo.

Dalalka Yurubse kamay sinnayn taabista mustacmaradaha. Dalalka Isbayn iyo Boortaqiisku inkastooy qarnigii 16aad ay haysteen mustacmaradaha fidsan misana dalal tiro yar maahee intii kale oo dhan waa laga qaaday markii la garay 1914kii. Qarammada Talyaaniga iyo Jarmalka oo qarnigii 19aad midba geestii u noqday qaran midoobay, umay suurtoobin in ay taabaan mustacmarad aad u fidsan oo ay ku dulnoolaansho ka raacdaystaan. 1914kii afarta xoog ee Imbiraadooriyadaha aad u fidsan lahaa waxay ahaayeen Biritayn, Ruushka, Faransiiska iyo Mareykanka. Waxayna ahaayeen dalalka wax haysta. Dalalka Talyaaniga, iyo Jabaanna kuwa aan wax haysan ee ficilo iyo cadho haysay bay ahaayeen.

Xafiiltanka iyo tartanka gumeystayasha ka dhexeeyey ayaa shiday qaskii adduunka ka oogmay. Dagaalweynihii 1aad ee adduunka dabadiisii Biritayn, Ruushka, Farans iyo Mareykanka marka la isu geeyo dhulka gacanta ugu jiray waxa uu dhammaa soddon Malyuun oo mayl oo laba jibbaar ah. Jabban, Talyaaniga iyo Jarmalka dhulkay haysteen waxa uu dhammaa hal malyan oo mayl oo labo jibbaaran. Tirada guud ee dadka ku nool Biritayn iyo Farans waxay dhammayd sagaashan malyan, mustacmaradaha ay haysteenna marka dunida saddex meelood loo qaybsho meel ahaan bay u dhigmayeen. Tirada guud ee ku noolayd dalka Jarmalka, Talyaaniga iyo Jabaanna waxay ahayd boqol iyo siddeetan malyuun. Mustacmaradaha ay maamulayeen waxay u dhigmayeen 1/20 inta dalka Faransiiska iyo Ingiriisku gumeysiga ka sugteen. Waxa halkaa inooga baxay sababaha Ingiriiska, Ruushka, Faransiiska iyo Mareykanku ay u rabeen in Soohdimuhu ay sidooda ahaadaan, dagaalna la baajiyo. Biritayn iyo Farans waxay garab siiyeen ururka Qarammada, dalalka kalena waxay ka dalbeen inay ku biiraan ururkaas. Hase ahaatee, dalalka Talyaaniga, Jarmalka iyo Jabbaanku dagaalkii 1aad ee adduunka dabadii aad bay u calool xumaaden. Saddexda dalba muddadii u dhexaysay 1919 — 1939kii bay xoog iyo itaal ku daldurugsadeen. Gardarrooyinkay oogeen baana dagaalweynihii labaad ee adduunka waddada u sii xaaray.

## TALLAABOOYINKII DAGAALWEYNIHII LABAAD WADDADA U SII XAARAY

Dadyowga aqoonsada in xaqdarro lagula dhaqmay, xaqay u lahaayeen in degaan ku filan ay ku noolaadaanna laga duudsiiyey quus ayey moodaan is daba taagga hadba ruuxa madax ah ee ugu ballan qaada in uu xaqooda marindoono xataa, haddii dagaal lagu heli karo. Saddexda dal ee Jarmalka, Talyaaniga iyo Jabaan way ka dul talaabsadeen dawladahoodii Baarlamaanada ku dhisnaa, waxaanay intii u dhexaysay 1919 — 1939kii dhisteen dawlado kelitashadayaal iyo xukun milateri garabsada.

Dalka Talyaaniga dagaalweynihii koowaad markii uu dhammaaday baa dadku ka calool xumaaday dawladda Talyaaniga oon wax naf leh ka korodhsan dagaalka. Qaskii ka oogmay waxa uu fursad u siiyaa Benito Musaliini in uu unko xisbi ku caan baxay faashisti. 1922kii ayaa Musaliini madax uu ka noqday dawladdii Talyaaniga, isaga ayuuna xukunkii dalku gacanta u galay. Boqorka dalku wax awood ah muusan lahayn ee Taaj ayuun buu xidhnaa. Muusaliini waxa uu dadweynaha ka dhaadhacshay, haddii ay tusaalooyinkiisa raacaan in ay qaran sharaf iyo awoodba leh noqon doonaan. Dadka intii isku dayda inay ka soo horjeestaan keli tashiga fashistiga waa la garaaci jiray, ama waa la xidhi jiray ama waaba la dili jiray.

Dadka Jarmalku iyana waxay ka xumadeen go'aannadii ka soo baxay heshiiskii Feersaylis ee 1919kii. 1933kii ayaa Hitlar xukunka dalka gacanta ku dhigay isaga oo garabsaday Xisbiga Hantiwadaagga waddaniga ah. Hitlar waxa uu sugtay kelitashi, dalka Jarmalkana hub cusub ayuu ku gaashaamay wuxuuna u guntaday in uu Yurub ka dhacsado dhulkii Jarmalka lagaga qaaday heshiiskaas. Jabanka iyagana sida Talyaaniga iyo Jarmalka ayaa dagaalkii koowaad cidhib reebkiisii aanu u raali gelin. Heshiiskii ciidammada badda ee Washington lagu qabtay 1921 — 22kii waxaa Jabaanka lagu faray in marka Maraykanka iyo Ingiriisku midba goonidiis u samaysto shan markab, Jabaan ay samaysan karto saddex. Taas waxa Jabaanku u qaatay yasid. Iyada oo aanay raali ka ahayn Jabaan waxay oggolaatay heshiis qirayey sharafta iyo madaxbannaanida dalka Shiinaha, inkastooy ku doodaysay tigaadleyda Manshuuriya inay qabsato. Jabaan inkastoy ahayd dawlad ku dhisan habka Baarlamaanka, misana madaxda ciidammada ayaa iyaga oo bahaysanaya madaxda hantigoosatada qorshaysatay in ay dalweynaha Aasiya weerar lagu qaado.

Tartanka [illegible] yiil dawladaha Hantigoosiga ah aya sababay in Jabaan, Talyaaniga iyo Jarmalku ay sugtaan xukun Milatari oo keli tashi ku unkan, si ay ula boobtamaan dawladaha ay u tirinayeen inay meelaysteen sadbursi dhaqaale, gumaysi iyo ku dulnoolaansho. Dawladahaasi kale waxay isku deyayeen in dagaal ay baajiyaan, waxayna heshiisyo iyo ballanqaadyo ku sabi jireen madaxda Jarmalka, Talyaaniga iyo Jabaanka.

## JARMALKA OO GAASHAANTAY

Hitlar labada ujeeddo ee xagga siyaasaddiisa ugu mudnaa waxay ahaayeen in uu dadka Jarmalka ah oo dhan mideeyo isla markaasna u meeleeyo oo uu Bariga ka qabsado degaan dadka Jarmalka noolaansho ugu filan. Taasi waxay suurtoobaysay haddii Ruushka iyo Bolishka uu muquunsho. Ulajeeddadiisa hore waxay lid ku ahayd heshiiskii Feersaylis waxaanay ka hor jeedday siyasadda Farans oo u jeedday inay Jarmalka degaankiisa koobto dawlado iyada la heshiis ahna ku waageerto. Ulajeeddada Hitlar dadka qaarkii waxay ula muuqanaysay mid caqli gal ah. Maxaayeelay dalka Ostariya dadweynaha deggani Jarmal buu ahaa Jikoslafakiyana dad badan oo Jarmal ah baa degganaa; heshiiskii Feersalis laftiisuna waxaabu ku unkanaa fikraddii Wilson ee «Aayetashiga» Ummadaha. Ulajeeddadiisa labaadna nabadda ayey halis gelinaysay hase ahaatee Hitlar waxa uu ku hadoodilay heshiis nabad gelyo uu la saxiixday dalka Boolishka 1934kii. Shan sano ka dib ayaa Hitlar qorshihiisii oogta ka caddeeyey.

Hortiiba markii uu xukunka la wareegay ayaa Hitlar muujiyey nacaybkuu u qabay ururrada nabadda. 1933kii dalka Jarmalka waxa uu ka saaray ururka Ummadaha iyo wada hadalladii dhimista hubka ee Janeefa dabadeedna 1934kii ayaa Naasigii dalka Ostariya ay shirqooleen madaxdii dalka Doorfus iyagoo isku dayayey in Ostariya ay ku daraan dalka Jarmalka. Ololahaas «Ururkii Anshalus» muu hirgelin maxaa yeelay ninkii xukunka qabtay ayaa markiiba Ostariya xasiliyey. Muusaliinina ciidammadiisii ayuu soohdimaha Ostariya ku dulfuray. Dadka Talyaaniguna ma oggolayn in Jarmalku dalkaasi uu qabsado, maxaa yeelay qaybo ka mid ah ayey ku doodayeen. Hitlar mar kastaba waxa uu hadalladiisa ku muujiyey in aanu marnaba oggolayn heshiiskii Feersaylis. 1935kii waxa caddaatay in uu ciidanka cirka iyo xoogga dhulkaba uu dhisma hor leh ku bilaabay.

Madaxda siyaasadda ee reer Yurub way ku wareereen talaabooyinkaa Hitlar uu qaaday.

Faraans gaar ahaan nabad sugiddeedii bay u baqday. Arrimaha gudaheeda ka taagnaa ayaana anfariir ku riday. Waxa dhexdooda iska hayey Shuuciyiinta iyo Hantiwadaagga oo dhinac ka soo wada jeeday iyo fashiistada iyo hantigoosiga oo dhinaca kale ka soo wada jeeday. Dadkii dagaalweynihii kaga dhintay umay soo bedin korsocod dhalasho kor u kacaysa sida dalalka kale, tirada dadka dhalinta ihina aad bay u yarayd. Dagaal kalooy gashaana sinaba umay rabin. Dawladda Faransiisku maraaksi digtoon bay rabtay inay dagaal uga nabad gasho. 1920kii waxay heshiis la saxiixatay Juguslafaakiya, Roomaaniya iyo Yugulaafiya si ay uga gargaaraan haddii Jarmalka ay dagaallamaan. Ciidammada Milatariga ee Faransiisku waxay soohdintooda ka dhiseen gaashaandhig ka samaysan sabbad iyo bir, waxay abuureen hurin Farans weerar ka nabad gelinaysa. Hase ahaatee mashruuc qaab daran ayuu ahaa. Mashruucaasi oo lamagac baxay xariiqdii magnot waxa uu ka dhignaa kadin aan dayr iyo sarsar lahayn. Dad tirsan oo ka mid ah madaxda ciidammada Faransiiska uu Jarles Diigol ka mid ahaa ayaa soo jeediyay in dagaalka labaad ay ku guulaysan doonaan hadba ciddii Taangiyada sida dhakhsaha leh u socota haysta. Fiiradaasi diigol dheg looma dhigin Faransana waxa ka luntay dareenkii weerarka.

Dadka Biritayn laba siyaabood bay talaabooyinka Hitlar u arkayeen. Dad badan oo Ingiriis ahi waxay qabeen in heshiiskii Feersaylis uu dadka Jarmalka xaqdarro ku ahaa. Hitlar baaqiisii in loo soo cesho Raynland, dalka Ostariyana lagu daro dalweynaha Jarmalka iyo in Jarmalka loo oggolaado qalab iyo ciidan u dhigma dalalka ay jaarka yihiin awooddooda, waxay dadka Ingiriisku u arkayeen arrin caqli gal ah. Ingiriisku waxa uu aqoonsaday in horumarinta farsamada dayuuradaha wax duqeeya ay halis gelin doonaan difaaca Jasiiraddooda. Sidaas Faransiiska oo kale ayey nabad sugiddooda u baqa qabeen. Sidaas awgeedna dagaal inay baajiyaan bay rabeen. Halkii uu Jarmalka ka cambaareyn lahaa Ingiriisku xiriir saaxiibtinnimo ayuu u gudbiyey Naasiga. 1933kii Ingiriisku heshiis buu Jarmalka la galay u fasaxaya kordhinta ciidammada badda ee Jarmalka.

## ABASIINIYA IYO RAYNLAND

Muusaliini hortii iskumay wanaagsanayn Naasiga. Waxa uu ka xumaa Naasiga oo ku dayanayey habdhiska fashiistiga, aragtida midabka ee Hitlarna fiiro aan micne lahayn buu u qaatay, Hitlar laftiisana waxa uu u haystay ruux waalan. Talyaanigu waxa uu diiddanaa Jarmalka oo qabsan rabay qaybo dalka Ostariya ka mid ah oo Talyaanigu ku doodayey; qaybahaasi oo Talyaanigu dagaalkii koowaad u dagaal galay, hase ahaatee heshiskii Feersaylis uu ka duudsiyey. Talyaanigu waxa uu ka xumaaday heshiiskii Jarmalka iyo Ingiriiska dhexmaray oo lid ku aha qodobbadii heshiiskii Feersaylis. 1935kii Muusaliini wada hadallo uu ku qabtay «Istaresa» waxa uu ku raadin rabay Isbahaysi uu la samaysto Ingiriiska iyo Faransiiska.

Nasiibdarrose duulaankii uu Musaliini Abasiiniya ku qaaday bishii Oktoobar, 1935kii, ayaa dalka Ingiriiska qas ka oogay, maxaa yeelay weerarkaasi Talyaanigu waxa uu u muuqday in uu halis u yahay dhulgumaysiyada Ingiriisku Afrika uu ku leeyahay. Dawladda Ingiriiska waxa la gudboonaatay in tallaabo deg deg ah ay qaaddo. Wada hadallo qarsoodi ah oo ay yeesheen madaxda labada dawladood ee Ingiriiska iyo Faransiisku waxay ku heshiiyeen in la koobo dalka Talyaaniga qabsaday. Hase ahaatee, markii la maqlay heshiiskii "Hoare-Lacal" dadweynaha Ingiriisku way cadhoodeen oo waxay u qaateen in dawladdu gardarrada Talyaaniga isu dhiibtey. Markaasi ka dib ayaa dawladdii iskaga hadhay fulinta arrintaasi. Talyaanigu

dalka Abasiiniya ayuu qabsaday, dawladda Ingiriisku siyaaso qallafsan bay kala hortagtay oo Muusaliini ku qasabtay in uu dhoweysto Hitlar. Ururka Ummaduhu waxa uu guddoonsaday in Talyaaniga laga cuna qabateeyo waxyaabaha dibedda uga yimaada. Markii la isku dayey in saliidda la shito laga cunaqabateeyo, Hitlar baa dhuxusha la shito u diray. Tallaabadaasi waxay noqotay tii ugu horraysay ee labada kelitashade isu soo dhowaysey. 1936kii waxay abuurteen isbahaysi la magac baxay Heshiiskii Rooma iyo Baarliin. Intii u dhexeysay 1936 — 39kii, Iskaashigay u yeesheen gargaarkay u fidinayeen Faraankoo intii uu socday dagaalkii sokeeye ee Isbaanishka ka socday ayaa isu soo dhoweeyey. 1939kiina waxaabay wada galeen «Heshiiskii Xadiidka».

Hitlar ciidammadiisu bishii Maarso 7dii 1936kii ayey ku duuleen Raynland. Tallabadaasi waxay lid ku noqotay heshiiskii Fersaylis iyo Lokaarno. Isla markaasna ciidammada Jarmalku lixaad weyn may lahayn, halis ayuuna gashay. Waxay amar ku haysteen in dib ay u soo gurtaan haddii ay askarta Faransiisku dagaal bilaabaan ciidammada Faransiisku kuwo isku dubbaridan may ahayn, dawladda Faransiiskana waxay ka raarideen xoogga Faransiisku inaanu weerar geli karin.

Ingiriiska arrintaas Jarmalku uu ku kacay Ixtijaaj buu ka dhiibtay, hase ahaatee wax intaa dheer may qaban. Dadweynaha Ingiriiska ah waxaa bay la ahayd in Jarmalku xaq u lahaa in uu Oddiisa cagta dhigo. Waxaanay ku baaqeen in waqtigii uu yimi la daaweyn lahaa gefafkii heshiiskii Feersaylis uu meelmaray ayna habboon tahay in si xaq ah arrinta Yurub loola meel dhigo Hitlar. Dad tiro yar oo Winistan Jeerjiil uu ka mid yahay ayaa diiddanaa sida arrintaasi loo qaatay; intii ka dambeysay 1918kii markii ugu horraysay bay ahayd ee dhibaatada Yurub ka taagan xoog lagu furfuray. Xagga Milateriga in Faransiiska laga qabsado Raynland mid difaaceeda dhaawacaysay bay ahayd.

Jugoslaafaakiya arrintaasi way ka gilgilatay. Jugoslaafaakiya markan dalweynaha Jarmalka ayaa ku wareegsamay. Waddooyinka Reelweeyada iyo webiyadana maamul dhawrkooda yeeshay. Inkastoo Hitlar ku ballan qaaday in Jugoslaafaakiya uu nabad gelinayo, misna wax la hubo umay ekayn, maxaa yeelay, waxa uu qabay in dadkii heshiiskii Feersaylis dhigay ay ku habboonayd in Ostariya ay Jarmalka ku daraan. Bishii Abriil 1938kii ayaa Jambarleyn Talyaaniga heshiis la galay uu ku aqoonsaday in Talyaanigu Itoobiya haysto, Musaliinina uu oggolaado in Ciidammadiisa uu dalka Isbayn kala soo noqdo. Jambarleyn waxa uu Muusaliini heshiiska ula galay si uu uga faquuqo Jarmalka. Hase ahaatee, xaalkii sidii la moodayey uma dhicin.Muusaliini waxa uu booqasho ku tagey dalka Jarmalka Bishii Sebtember 1937kii. Waxaanu ka soo noqday isagoo aad ula dhacay nidaamka Naasiga askartiisiina habka socodka ee askarta Jarmalka ayuu ku soo rogay, Yuhuuddana olole cidhibtir ah buu ku qaaday.

## KULANKII MIYUUNIKH

Hitlar markan waxa uu u soo jeestay Jugoslafaakiya, Jarmalka Naasiga ah ee qaybta Sudetan degganaa ayaa ku guubaabiyay dadweynuhu in ay ka doodaan sifaalaha dawladda Jugoslafaakiya ula dhaqanto. Dawladda Jugoslafaakiya ciidan xoog ah iyo gaashaandhig habsan bay lahayd, gaashaanbuur bayna Faransiiska la lahayd. Ruushka iyo Faransiisku waxay uga ballan qaadeen in ay gargaaraan haddii uu Jarmalku soo weeraro. Arrintaasi Hitlar bay kaga yaabisay, maxaa yeelay waqtigaas duulaan umuu diyaar ahayn. Guud ahaan waxa uu iska dhigayey nimaan

doonayn in uu Jugoslafaakiya ku duulo. Hase ahaatee madaxda Jugoslafaakiya ayuu u ciilcunsanaa waxaanuu hiyiga ku hayey in Jugoslafaakiya uu weerar ku qaado.

Jambarleyn waxa uu aqoonsanaa in Jarmalka loo cesho Sudetenland oo uu u qabay gef ka unkamay heshiiskii Feersaylis. Ingiriiska iyo Faransaba waxay ku dirqiyeen Jugoslafaakiya in qaybtaas dhulka ah ee Jarmalku sheeganayo ay celiso.

Hase yeeshee, dawladda Jugoslafaakiya wey diiday. Jambarleyn wuxuu kulan la yeeshay Hitlar. Saddex goor bay wada hadallo yeesheen. Aakhirkii kulan ay Miyuunikh ku yeesheen bishii Sebtember, 1938kii ayaa Hitlar ku oggolaaday in Sudetenland loo wareejo. Jugoslafaakiya waxay u qaadatay in lugta la jiiday wax ay ka qaban karaysayna ma jirin kol haddii Ingiriiska iyo Faransiisku ka gacma laabteen. Hitlar laftiisu muu jeclaysan sifaha arrintaasi u dhacday, maxaa yeelay waxa uu rabay in jogoslafaakiya ku gacan saydho dabadeedna uu marmarsiiyo u helo uu Jugoslafaakiya ku qabsado Jambarlayn dalkiisii ayuu dib ugu laabmay isagoy la tahay in siyaasaddiisii maslaxadda ahayd ay hirgashay waxaanu, ku faanay in «Nabaddu ay waagii walba waarto».

Hitlar waxa uu hortiiba cusboonaysiiyey ulajeeddadii uu Jugoslafaakiya ka lahaa. Bishii Maajo 15dii ayaa ciidammada Jarmalku soohdinta Jugoslafaakiya ka gudbeen, Jambarlayn markan buu aqoonsaday sida arrini u dhacday. maslaxaddii iyo dhexdhexaadintiiba waa uu ku hoobtay. Ulajeeddooyinka Hitlarna waxay u muuqdeen dar ka qoto dheer ciidammada Jarmalka oo la dhiso. Dawladda Ingiriisku waxay soo rogtay dadka oo qasab ciidanka lagu qoro. Dalka Boolishka gargaar buu Jambarleyn ugu ballanqaaday, haddiiba Jarmalku uu soo weeraro.

Hitlar waa uu gefay maxaa yeelay, waxa uu illaawey in madaxda siyaasadda ee Ingiriiska iyo Faransiisku yihiin «Dirxiilayal yaryar». Jambarleyn markuu Miyuunikh kula kulmay umuu arag nin deggan oo nabadda jecel ee waxa uu u qaatay fulay. Heshiiskii Sebtember waxa uu ku dhaliyey aragti ah in aan Ingiriiska iyo Faranmsiiska midna dagaal rabin, gelina doonin. Bilihii dhexe ee Sannadkii 1939 Hitlar waxa uu cusboonaysiiyey baaq ah in Naasiga iyo dalka Bolishka qaybta ku magacaaban «Bolish korridor» loo soo cesho. Hase ahaatee, markan Isbahaysigu waxay uga digeen haddii Bolishka la weeraro in ay difaaci doonaan, Hitlarse taasi umay dhaadhicin.

## HESHIISKII NAASIGA IYO SOOFIYEETIGA

Markii la gaaray dabayaaqadii 1939kii madaxda ciidammada Naasigu waxay qorshaynayeen siday Boland ugu duuli lahaayeen. Hitlarse dalka Midowga Soofiyeeti ayuu ka cabsi qabay. Imbaayaarkii saarka qayb dalka Boland ah baa gacanta ugu jirtay, sidaa awgeed Hitlar waxa uu aqoonsanaa in Istaliin aanu oggolaan doonin in Boland lagala hoos baxo. Dalka Midowga Soofiyeetku sinaba ugama raali ahayn keligii tashadaha Jarmalka waxanu heegan u ahaa in Jarmalka uu dagaal kala hor tago haddiiba ay hubaal noqon lahayd in Ingiriiska iyo Faransiisku la soo safanayaan. 1939kii Isataliin waxa uu isku dayey in reer Galbeedka u heshiis la galo uu uga dan lahaa in uu difaaco dalalka u dhexeeya Badda Baltic iyo tan madow, haddii Ingiriiska iyo Faranssiku ay iyana sidaas ku ballan qaadaan, hase ahaatee, madaxda siyaasadda ee Ingiriiska iyo Faraans waxay ka cabsi qabeen gacan saar ay dawlad shuuci ah yeeshaan. Intaas waxa dheeraa in dalalka Midowga soofiyeetigu uu ku

ballan qaaday in uu ilaaliyo qaarkood, gaar ahaan dalka Boland ay Ruushka laftiisa iska eegaysay. Sidaas awgeed ayaa arrintaas uu Istaaliin watay u hirgeli wayday.

Hitler fursaddaas ayuu ka faa'iidaystay. Inkastoo uu beryihii hore shuuciyadda si foolxun u caayey una cambaareeyey misana markan waxa uu u fidshay heshiis saaxiibtinnimo iyo gardarraysi la'aan. Jarmalkana waxa u suurtowday in soohdin uu ka difaac geli karo uu yeesho. Foodsaaro gaashaaman buu Jarmalku halkaas ka dhistay oo la magac baxday xariiqda siigfriidh. Sidaas awgeed Faransiisku waxa uu ka faquuqmay bahdiisa Bariga Yurub. Dadka qaarkii waxa bay la tahay in 7dii Bishii Maarso 1936kii ay tahay bilowgii dagaalka.

## MASLAX IYO MIDNIMO

Sannadkii 1937kii ayaa Jaambarleyn dawladda Ingiriiska u noqday Madaxa Wasiirrada. Ilaa waqtigaasna dalka Ingiriisku siyaasad u go'an xagga arrimaha Yurub may lahayn. Jambarleyn waxa uu isagu la yimi siyaaso u go'an waxay la ahayd in qaska Yurub ka taagan uu sababay heshiiskii Fersaylis, Hitlarna waa buu u garaabay markii uu ku andacooday in waxa uu rabaa ay tahay Khaladkii 1919kii oo uu daaweeyo. Markaasi Jambarleyn waxa uu raadin rabay in tigaalada Hitlar heerkay ku siman tahay, dabadeedna uu heshiis kama dambeyn ah la galo. siyaasaddaasi waxay la magac baxday Siyaasaddii maslaxa ama sasabashada (Policy of Appeasement). Hase ahaatee Jambarleyn waxa aan u muuqan Hitlar in uu yahay nin seef la bood ah. Heshiiska sida uu Hitlar u qabay wuxuu ahaa in uu horta hanjabo, xoogsheegto sida uu rabana arrinta loo sugo. Hitlar himilooyinkiisii uu ku muujiyey kitaabka Miinkaaf dar aan xad lahayn bay ahaayeen. Bishii Nofembar 5dii 1937kii waxa uu sarreeyaha ciidanka Jarmalka u sheegay in uu arrinta Jarmalku dhammayn rabo weerar uu ku qaado Ostariya iyo Jugoslafaakiya. Siyaasaddii Jambarleyn hortiiba mid aayo la' bay ahayd.

Dalka Ostariya dad tiro badan oo Jarmal ah ayaa rabay inay dadweynaha Jarmalka ku biiraan. Dalka Jugoslafaakiya Jarmal saddex malyuun dhan baa ku noolaa qaybta Sudelenland. Haddii Naasigu ay ku guubaabin lahaayeen dadkaasi inay kacaan oo ay gadoodaan, ayna codsadaan inay ku biiraan dalweynaha Jarmalka, Hitlar marmarsiinyuu u helilahaa Jugoslafaakiya uu ku qabsado. Dalka Ostariya hortiiba Jarmalka Naasiga ahaa ayaa codsaday midnimo iyo israac 'Anschluss.' Toddobaad isdaba joog ah ayey gadood oogeen. Ostariya waxay isku dayday in Jugoslafaakiya iyo Yugoslaafiya ay gaashaanbuur isu bahaystaan, bishii Maajo, 1938kii, Hitlar arrintaas waa uu diiday waxaanu ku qasbay Ostariya nin Naasi ahi inuu xukunka qabto. Ninkaasi isaga ah ayaa dhiirrigeshay in qaskii uu sii oogmo,ciidammada Jarmalka ayuuna markii dambe codsaday in ay dalka soo galaan si ay xasilooni u sugaan. Toban cisho dabadeed Hitlar magaalo madaxda Fiyeenna ayuu joogay oo ahayd magaaladii uu beri ku macaluulay. Hitlar in ku siman muddo shan sano ah ayuu isaga oon Jarmalka dagaal gelin wax qabadkii Bismaark baro dheeraysiiyey.

Bishii Agoosto 24dii waxa adduunka ka yaabshay labadaasi dawladood ee col daahood go'ay ahaa oo heshiis kala saxiixday. Hitlar waxay la ahayd in uu irmaanta qaaday madaxda siyaasadda, maxaa yeelay waxa u muuqatay in uu hurin kaliya ka dagaal geli doono. Inkasta oo Ruushka ugu ballan qaaday in dalka Boland barigiisa uu siiyo haddana kuma tala jirin in uu oofsho axdigaasi. hase ahaatee, Istaalin laftiisu wuu la socday ulajeeddooyinka Hitlar, waxayna kala saxiixdeen heshiiskii ugu daacadda darraa ee laba dal ay isu galaan.

Heshiiska Hitlar uu Midowga Soofiyeetiga la galay ayaa hubaal ka dhigay in Boland uu weerarayo. Toddoba cisho ka dib ayaa raadiyaha Idaacadda ee Jarmalku ku andacooday in askarta Jarmalka ee soohdinta labada dal fadhiya qaar ka mid ah ciidanka Boland uu toogtay, ayna halkaas ku dhinteen. Askar Jarmal ah oo la dilay may jirin ee se Jarmalku ay maxaabiista xeryahooda dar ka mid ah intay dirays u soo gesheen dabadeed toogteen. Bishii Sebtember 1dii ayaa taangiyada ciidanka Jarmalku soohdinta Boland ka talaabeen. Hase ahaatee, sidii uu Hitlar mooday gacmaha dib loogama laaban. Ingiriisku bishii Sebtember 3dii, koob iyo tobankii subaxnimo ayey Jarmalka gaadhsiisay in dagaal uu qabo, dalka Faransana lix saacadood ka dib bay ku dhawaaqday. Jambarleyn qalbi jab baa ku dhacay, Hitlarna waaba uu u qaadan waayey Ingiriis iyo Faransiis dagaal ayey qab yidhaahdeen. Markii warka loo sheegay intuu nabar aamusay ayuu yiri: «Maxaynu hadda yeelnaa» Gooring baa jawaabay oo waxa uu yiri; «Haddii aan dagaalkan weyno alla hayna caawiyo». "Dirxiilayaashii" Miyuunikh ayaa libaaxyo isu rogay.

## DAGAAL TOLKII ISBAANISHKA

Siyaasaddii ku dhisnayd in maslaxo lagu dhammeeyo gardarrooyinkii iyo dhul durugsigii Jabaanka, Talyaaniga iyo Jarmalka waxay ka muuqatay kaalinta xooggagga reer Galbeedka iyo ururka ummaduhu ka ciyaaray dagaal tolkii Isbaanishka. Bishii Juulay 1936kii ayaa dagaal tol ka oogmay dalka Isbayn. Muddo ku eg siddeed sano ayaa xukunkii keli tashiga ee Biriimo dii Rifeera uu cadaadis xoog leh ku hayey dhaqdhaqaaqyo kacaan ah (1923-31kii), hase ahaatee 1931kii ayaa kacaan muddo dheer la dhowrayey ka dhashay dalka Isbayn. Distoor Jumhuuri ah oo soo baxay Bishii Disembar 8dii waxa uu dhigay in hantida Kaniisadda la toleeyo, diinta in aan lagu dhigin dugsiyada iyo in la iska dhaafo amarada diinta ku lug leh. Nimanka Jamhuuriyadda Isbayn ka dhisay waxay Kaniisadda u arkayeen gacanta ugu weyn ee meelaysay xukunkii kelitashiga, hase ahaatee, weerarkaasi ay Kaniisadda ku qaadeen dadweyne badan oo la jiray ayaa kaga leexday. Jamhuuriyadda Isbayn ka dhisantay waxay qorshe u gashay sidii dhulka loogu qaybin lahaa dadweynaha beeralayda ah.

Isla markaasi waxay isku dayday in awoodda ciidammada ay koobto, maxaayeelay madaxda xooggu waxay ahaayeen gacanta labaad ee Taliska kelitashiga.

Madaxdii siyaasadda ee Jamhuuriyadda dhisay waxay colaad ka muteen saddex qaybood oo awood hidaysi ah leh. Culimada diinta, dhulgoosatada iyo taxamaamulka ciidammada xoogga. Madaxda siyaasadda ee horusocodka ahaa waxay abuurteen hurin ka kooban Shuuciyiin iyo Hantiwadaag sidaas awgeedna waxay ku guulaysteen doorasho Bishii Febraayo 1930kii la qabtay. Saraakiil Ciidammada ka mid ah oo uu hoggaaminaayo Sarreeye Guud Faransisco Faranco ayaa ku kacay Jamhuuriyaddii. Ciidammadu waxay gargaar ka heleen qaybihii kale ee iyana taliskii Jamhuuriyadda diiddana. Waxaanay noqdeen tirrkii shanaad ee ku biiray afartii guuto ee ciidammada ahaa ee ka baxay magaalada Madrid Bishii Julay. Waxay askartu filanaysay guul dhakhsa leh, hase ahaatee, sutida ayaa loo qabtay.

Hortiiba askartaasi fallaagowday oo la magac baxay waddaniyiinta, hub, rasaas, dayuurado iyo gargaar milateri bay ka heleen Jarmalka iyo Talyaaniga. Midowga Soofiyeetigu isaga oo ka cabsi qabay Jarmalka oo gaashaantay, ayu ku biiray ururka Ummadaha 1934kii. Midowga Soofiyeetigu waxa uu rabay in Jamhuuriyiinta Isbaanishka uu ka gargaaro weerarka iyo xoogagga fashiistadu ku qaaden. Dawladaha Faransiiska iyo Ingiriisku waxay weli meelaynayeen siyaasaddii maslaxadda. Dawla-

daha oo dhan waxay ka codsadeen in ay ka noqdaan dagaalka sokeeye ee Isbaanishka farahana aanay la gelin, iyaga oo isla markaa ogsoon in Hitler toban kun oo askar ah uu u diray waddaniyiinta, Muusaliinina in ka badan boqol kun oo isugu jirta askar fashiista ah iyo Farsamoyaqaano. Ciidammada cirka ee Jarmalka ayaa gacan weyn siiyey askartaasi afgambiga rabtay, oo si joogta ah u duqeeyey magaalooyinka ay Jamhuuriyiintu haysteen. Jarmalku waxa uu goobahaas ku muujiyey awoodda sare ee cirka. Isbayn markani waxaabay noqotay goob ay fashiistada Jarmalku hubkooda iyo tabaha dagaalka ku tijaabshaan .... Jamhuuriyiinta mar dambe ayaa Ruushku hub, taangiyo, dayuurado iyo niman aqoon u leh uu u diray. Soddon bilood ka dib ayaa dagaalkii ku dhammaaday Sarreeye Guud Faranco oo libaystay. Bishii Maajo 1939kii waxa istaagay dagaalkaas ay ku nafwaayeen dad malyuun ku dhowaad ahi. Ciidammada Jarmalka iyo Talyaanigana waa laga daadgureeyey ka dib markay, Madrid, askartii Faranco u gacan gashay. Dagaalkaasi Isbayn ka oogmay waxa uu tilmaan u ahaa siday arrimuhu u sugmeen markii dambe.

## DAGAALKII LABAAD EE ADDUUNKA — HILLAACIISII

Markii dagaalkii labaad ee adduunka bilowday Baariis, London iyo Berliin midina kumay riyaaqin. Qolona nabad may filanayn waqtigaas isaga ah. Hitlarse waxa uu u hanqaltaagayey gul dhakhso leh. Jarmalku waxa uu u fiigtay in dagaal uu u guntado. Laba nin oo wax qora oo kala ah Jaarlas Digool iyo nin Jarmal ah oo magaciisu yahay Hans Gudaryan ayaa waxay soo jeediyeen in cutub taangiyo wataa oo hubka culus adeegsanayaa ay jebin karayaan ciidan xarun joogta ah leh. Madaxda ciidanka Faransiiska ayaa diiday in ay qaataan fiiradii Diigool. Hase ahaatee, madaxda ciidanka Jarmalku aragtidaasi ayey ku habeeyeen ciidammadooda.

fiiradii Diigool waxa ay rumowday markii Jarmalku galay dalka Bolishka sannadkii 1939kii. Ciidanka Boland waxa u ahaa mid aad u tiro badan oo ku dhisan habkii dagaalkii koowaad, kuna gaashaaman dagaal galka dhufayska. Jarmalka ciidankiisa oo gaaraya lix guuto oo taangiyo wata diyaaradaha Bamka ridana ay taageerayaan ayaa ciidammada Boolishka tusay habka dagaalka Hilaacaya. Sannado hore ayaa Hitlar waxa uu yiri «Haddii aan cadow weerari rabo . . . waa in aan si kadis ah sida hillaaca oo kale cadawga ka dul ifaa. Markan ciidankiisii tabtaasi ayey yeeleen. Muddo toban cisho ah ayuu ciidankii Bolishku ku baaba'ay. Bishii Sebtember 17dii Ruushka ayaa iyana weeraray gobollo ka mid ah Boland intaan bishu dhammaanna Boland madaxbannaani may jirin.

Weerarkaasi kadiska ahi waxay ahayd in uu dhaliyo Faransiiska iyo Ingiriiska oo iyana nidaamiya ciidammada taangiyada. Hase ahaatee, muddo lix bilood ah wax dagaal ahi ma dhicin muddadaasi waxa lagu magacaabaa dagaalkii Beenbeenta; in kasta uu ciidanka Ingiriisku daanta Faransiiska u diray ciidammo, misana goob dagaal ay ka galeen may jirin. Inkastoo magaalooyinku ay ka cabsi qabeen in hawada laga soo weeraro, misana wax diyaarad ah oo dagaal soo qaaday may jirin. Qulqulada qudha ee dhacday waxay dhexmartay Ruushka iyo Finland. Dagaalka dhexmaray oo loo yaqaan dagaalkii Jiilaalka Istaaliin waxa uu Finland ka samaysan rabay saldhig Militari. 1940kii dagaalkii waxa uu ku dhammaaday Finland oo la jabshay.

Hitlar waxa uu dhammaystirayay qorshaha dagaal galka, madaxda ciidankiisa talooyinkooda ayuu dhegaysanayey. Iyaga sida ay la ahayd ciidanka Badda sababta

ugu weyn ee uu u hoobtay 1914-1918kii waxa ugu wacnaa Jarmalka oo aan lahayn xeeb fidsan taasina ay dhalisay in la hareereeyo. Haddii xoogga Jarmalku qabsado Denmark iyo Noorwey, doonyahoodu waxay ka dagaal geli kari lahaayeen xeeb fidsan oo gaashaandhig leh. Bishii Abriil 8dii 1940kii Hitlar arrintay codsadeen ayuu meelmarsahay. Ciidammada Jarmalka oo xagga hawada ku gacan sarreeya ayaa sida hilaaca labadaas dalba u maray dabadeedna qabsaday. Ingiriisku waxa uu u muuqday dal aan cidina u ciidmi karin. Markii ciidanka Badda ee Boqortooyada Ingiriisku isku dayey in uu ka hortago weerarrada Jarmalka, Jarmalku waxa uu ka dejiyey laba Markab oo kuwa dagaalka ah iyo mid kale oo qaada Dayuuradaha. Guuto uu Ingiriisku u diray in Norwey ay gargaarto ayaa Jarmalka ka qabsatay Norvik, hase ahaatee Bishii Juun ayey misana ka qaxeen.

Jabkaasi Ingiriiska ku yimi waxay samirsiis ka dhigteen doonyo badan oo ay ciidanka Badda ee Jarmalka ka burbursheen.

Hoobashada ciidanka Ingiriiska waxa lagu canaantay Jambarleyn. Hortiiba waa uu gefay; waxaanay la noqotay in weerarka Jarmalku uu ahaa mid khalad u dhacay, waxaanu Hitlar ku tilmaamay nin Baabuurkuu raaci lahaa ka tegay. Hase ahaatee dood ka dhacday golaha baarlamaanka ee Ingiriiska waxa Jarmbarleyn lagu tilmaamay nin isagu ka hadhay baabuurkii uu raaci lahaa. Waxa laga codsaday in uu is casilo, waana uu yeelay. Bishii May 10dii 1940kii ayaa Jerjil noqday Ra'iisal Wasaaraha. Jerjil waxa uu 1933kii intii ka dambeysay ka digay waxyaaba laga yaabo in uu Hitlar ku kaco. Hase ahaatee, waxa loo qaatay in uu yahay nin dagaal jecel Cidina kamay shaki qabin maskaxdiisa. In yar baase u haysatay nin madax adag.

Xaalku sida uu ku ahaa Ingiriiska waayadii hore wuu ka duwanaa. Ingiriisku muu rabin nabad iyo qaboojis. Jiiraankooda ayey nabadgelyo rabeen. Sidaas awgeed ayey Jerjil u doorteen. Jambarleyn nin dagaal muu ahayn, wax ksta oo uu yiraahdana sidaa may noqon karayn. Jeerjilse waxa uu ahaa nin daran. Saddex cisho markii uu ra'iisal wasaaraha ahaa waxa uu Baarlamaanka ku yidhi «Anigu waxaan tacab, dhiig, dhidid iyo ilmo ahayn idiin ma hayo», hase ahaatee waxa uu ku ballan qaaday guul si kastaba ha lagu gaaro eh. Shaki kuma jirin in waxa uu yiri uu u jeeday. Ingiriisku markan waxa uu xilsaaray hoggaamiye hal adaygga Hitlar ugu dhigma.

Kolkii uu xukunka qabtay ayaa dagaalkii run ahaan u bilowday. Bishii May 10dii Hitlar waxa uu furay weerar ku magacaabnaa Ololihii huruudda ahaa oo Jarmalku ku weeraray Holand, Biljin iyo Farans. Ciidammada Baarashuutka ayaa cirka ka soo degay, dabadeedna ciidammadii dalalkaasi daba ka meerteeyey oo baabi'iyey.

Diyaaradihii Jarmalka ayaa iyana waddooyinka iyo magaalooyinkaba burburshay. Ciidammada taangiyada ayaa u soo gudbay xariiqa Maginot ilaa ay gaareen soohdinta Lugsanbeerj. Saddex cisho ka dib ayaa Ciidammada taangiyada ee Jarmalku ka gudbeen Sedan. Dabadeedna waxa ay raaceen Godanka Soome ilaa ay gaareen Badda Abafiil, halkaasna waxay ku go'doomiyeen ciidammadii, Ingiriiska iyo Faransiiska ee u soo gurmaday dalka Biljimka. Dhawr toddobaad ayey isku dayen in ay u jilib dhigaan ciidanka Jarmalka inkasta oo rasaasta iyo saliidduba ku yaraadeen. Ciidammadii Faransiisku dib ayey uga gurteen dagaalka Jarmalka. Taliyihii ciidanka Ingiriiska Lord Gort waxa uu yaqiinsaday in gargaar ay helaan aanu nabad gelin karayn. Sidaas awgeed ayaa isaga oo amarkii taliska sare ee ciidanka Faransiiska diiddan uu dib ugu gurtay magaalada Dunkirk si markaasi askartiisu dalka Ingiriiska ugu baqo cararaan.

Markii dalka Ingiriiska laga ogaaday saymaha ciidankii Ingiriisku galay ayaa wax ala wixii badda dul maaxi kara oo dhan loo soo diray si askarta loo soo daad gureeyo. Askartii oo isdaba taxan oo xeebta iyo baddaba ku cag dhabanaysa ayaa hadba dul fuula doonyaha iyo wixii kale ee gargaarka loogu soo diray. In ku siman muddo lix cisha ah ayaa 300,000 oo askar Ingiriis iyo Faransiisba leh dalka Ingiriiska loo soo daad gureeyey. Jeerjil sifaha askartaasi ku nabad gashay waxa uu ku tilmaamay Mucjisad.

Faransiiskuse wax mucjisad ah oo cadowga ka nabad gelisa muu helin. Muusalini oo aad ula dhacay guulaha dhakhsaha leh ee Jarmalku gaaray ayaa isna Bishii Juun 10dii 1940kii ku dhawaaqay in Faransiiska iyo Ingiriiska uu dagaal ku qaado. Waxa hubaal ahaa in dagaalku aanu mid dheer noqon karin. Saddex cisho markii laga joogay caddayntii dagaal galka Talyaaniga ayaa Baariis Jarmalka u gacn gashay. Ciidanka Faransiiska qorshaha dagaal galkoodu waxa uu noqday mid warqadda uu ku qoran yahay oo qudha ku kooban, maxaa yeelay, Faransiiska ciidankiisii guud oo dhami waa uu jabay, ka dibna sagaal cisho dabadeed ayaa Faransiiska, Jarmalku ku qasbay in ay saxiixaan heshiis nabadgelyo oo ka qaab daran kii Faransiiska laga saxiixay 1871kii. Qaybta waqooyi oo idil Jarmalka askartiisa ayaa qabsatay. Dawlad Jarmalku ku adeegsadona Koonfurta ayaa laga dhisay. Nin askarta Faransiiska ka mid ah "Diigool" ayaa xammaasadii Faransiiska lagu yiqiin ku hadlay. Markii uu London ku degay ayuu caddeeyey in Faransiisku uu ku hoobtay goob eese aanu ku hooban dagaal galka. Diigool waxa uu ku dhaqaaqay sidii uu u habayn lahaa ciidan Faransiis ah. Hitlar waxa uu u qaatay in dagaalkii dhammaaday, waxaana uu Ingiriiska ka dalbay nabadgelyo. Waxa lama filaan ku noqotay in Jeerjil ku diido nabadda. Madaxii Naasigu dabadeed waxa uu ku dhaqaaqay qorshaynta weerarka dalka Ingiriiska.

## WEERARKII BIRITAYN

Jeerjil khudbad u dadweynaha Ingiriiska u jeediyey waxa uu ku muujiyey mintidnimada dadka Ingiriiska laga rabo in ay la yimaadaan. Dadkii si niyo san ayuu ugu soo qulqulay warshadaha waxayna naftooda u hureen dalka. Waxa la qoray ciidan lagu magacaabay difaaca guriga oo diyaar u ahaa in ay wixii gacanta ay ku dhigaanba ay ku dagaal galaan. Dadka Ingiriisku qiireqiire ayuu galay iyaga uun baana is bixin karayey. Dayuurado ay ku dagaal galaan ayaa baahidooda ugu weynayd.

Isaga oo dhiirrigelin iyo kalsooni ka helay Gooring (Goering) kuna ballan qaaday guul dhakhso ah, ayaa Hitlar Bishii Ogosto 13dii, dalka Ingiriiska dayuurado ku soo weeraray si ay ugu suura gasho in dabadeed baddana uu ugaga soo duulo. Dagaalka Biritayn oo markaa bilowday waxa uu noqday mid aad u kulul. Maalinba maalinta ka dambaysa ayaa cirka koonfurta Igland uu u noqday duuliyayaasha Jarmalka iy Ingiriiska goob ay isku haleelaan. Dadku waxay arki jireen widhwidhka dayuuradaha cirka isku eryoonaya, ee midiba, midda kale rabto in ay riddo. Yaalaabaa waxa kale oo la maqli jiray guuxa dayuuradaha iyo qaraxa ka yeera mishigaanada. Kuwa iyagu ka qayb qaadanayey dagaalka waxay u ahayd dannan isugu jira baqe, niyo jab iyo hiyi kac. Saacado sugniin ay ku dhammaystaanna waxa u xigi jiray daqiiqooyin wareer gesha oo cirka ay isteerinka qabashadiisa iyo qaylo, digniin, dhaar iyo amaro ay hadba ka maqlaan hadal tebiyayaasha dhegaha ugu jira. Qaarkood nabadgelyo ayey dalkooda ugu laabmi jireen. dhimash had iyo jeer wehelkooda eyey ahayd. Markii dagaalku dhammaaday nin duuliyayaashii ka mid ahaa waxa uu sheegay in saaxiibbadiis oo dhan uu waayey, waxaanu ahaa saddex iyo labaatan jir. Duuliyayaasha in yar oo ka mid ah ayaa duuliyayaal dagaal ahaa.

Badankoodu waxay ahaayeen niman aan milateriga hore ugu jirin. Raggaasi waxa la gudboonaatay inay dagaallanka bartaan, baqe u joogna ahaadan. Nin ka mid ahaa duuliyayaashii Ingiriiska ugu sitay waxa uu qoray «Markaan dagaalka ku jiro lugta bidixda ayaa baqaha aan qabo awgeed i gariiri jirtay. Waa aan iska bi'in kari waayey».

Duuliyayaasha Jarmalka iyo kuwa Ingiriiska midkoodna muu aqoonsanayn, qiimaha dagaalka, manay ogayn cidda libinta helaysa. Ingiriiska waxa caawiyey «raadaarka» oo u suuragashay in diyaaradahoodu gegidooda ku diyaar noqdaan ilaa inta uu sheegayo soo gelidda cadawga. Waxa laga yaabaa in Jarmalku dagaalka ku guulaysan lahaa haddii weerarrada ay ku ekeeyaan gegooyinka dayuuradaha iyo goobaha Raadaarada, halkii ay magaalda London Bamka kala dhacayeen. Diyaaradaha Ingiriiska Herkaynis iyo Isbitfaayiris way ka fududaayeen kuwa Jarmalka. Inkasta oo kuwa Jarmalku ka dheerayn jireen kuwa Ingiriiska. Waxaase hubaal noqotay, in maalinba maalinta ka dambaysa uu ciidanka dayuuradaha ee Ingiriisku dhaawaca la gaarsiiyo mid ka laxaad weyn uu ku ridayey ciidanka Dayuuradaha Jarmalka. Bishii Sebtember 17dii, 1940kii Hitler waxa uu dib u dhigay qorshihii weerarka dalka Biritayn. Dalka Ingiriiskana ciidan lexaad lihi muu nabadgelin ee waxa nabadgelin u sugay dhawr kun oo duuliyayaal ah.

Dalka Biritayn waxa uu isu diryaarshay dagaal qaraar. Habeen walba diyaaradaha Jarmalka ayaa London iyo magaalooyinka kale ee waaweyn Bamam ku rida. Ingiriisku isna waxa uu dhisay diyaarado meelo aad u durugsan bamam ku soo ridi kara oo markii dambe kumanaan ka mid ahi ay weerar ku qaadeen dalka Jarmalka. Xeebaha iyo degaanka ku dhow oo dhan miinooyin ayaa lagu aasay, waayerona waa lagu wareejiyey waxaana lagu gaashaamay Banaadiiq. Cuntada oo la isu qiyaaso, bamamka magaalooyinka lala dhacayey iyo mugdiga habeenkii ayaa Biritayn ka dhigay dal darxumo soo food saartay.

## DUULAANKII HITLAR RUUSHKA KU QAADAY

Goobaha dhulka la iskaga horyimi dalka Biritayn wey ka durugsanaayeen. ciidammada Muusaliini waxay ahaayeen dad qalab ilxun wata. ciidankiisa baddu ma wadan dayuurado sidaas awgeedna weerarradii dayuuradaha Ingiriisku ku qaadeen Taranto ayaa ciidanka Badda ee Talyaaniga lagu curyaanshay. Ciidankiisa kale Taangiyo tiro badan ma lahayn gaadiidka Baabuurtuna wuu ku yaraa. Masar iyo dalka Giriigga oo ay ku duuleen, labadaba waa lagu jebshay. Markii Giriigga Talyaanigu dib ugu riixay Albaaniya, ayaa Jarmalka ay qasab ku noqotay in uu Yugoslaafiya qabsado si Talyaaniga uu ciidammo ugu diro. Isla markii ciidan Ingiriisku dal ka Giriigga u diray waa laga adkaaday, degaankaasna waa laga saaray. Hase ahaatee, dhinaca Masar, Ingiriisku intuu taangiyadii uu heli karayey oo dhan isu soo urursay ayuu ciidammadii Talyaaniga burburshay kumanaan askartii Talyaaniga ka mid ahna way isdhiibeen. Imbraadooriyadii Talyaanigu Afrika ku lahaana afka ayey u dhacday. Mar labaad ayaa misana Jarmalku u ciidmay Talyaaniga. ciidammadii Jarmalka ee gaar ahaan u qaybsanaa Afrika oo Roomeel uu hoggaaminayo ayaa Ingiriiska dabada uga wareegay, Masarna dib ugu riixay. Dagaalkii waxa uu u ekaaday mid aan dhinacna u dhacayn.

Hitlarse isga oo xaal halkaas marayo ayuu gefay, Faransiiska, Boolishka, Yugoslaafiya iyo Giriigga si hawl yar ayaa Jarmalku ku qabsaday. Yurub markan cagtiisay ku hoos jirtay. Waxay u muuqatay in hiyigii Jarmalka ee ku jeeday in bed lagu noolaado uu xagga Bariga ka helaa ay u rumowday. Bishii Juun 22dii 1941kii ciidam-

madii Hitlar waxay jebsheen heshiiskii 1939kii. Dalka Ruushkana duulaan ayey ku asqaysiiyeen la magac baxay ololihii Barbaroosa. Ciidanka Ruushku umay muuqan xoog haybad leh markay Finland la dagaallameen. Madaxdii ciidanka Naasiguna waxay filanayeen in sifihii ciidammada Faransiisku u dumeen u ciidanka casina u dhabar jabo. Jarmalka malahoodii waa uu rumoobay markii hore. Ciidanka soofiyeetigu waxa uu ahaa mid aan tababar qabin si hufanna aan u gaashaanayn. Saraakiisha ciidankooda cirkuna waxay ahaayeen kuwo laga tegay Banaadiiqda iyo hubka culusna waxaaba u jiidaayay fardo ama cagafcagafyo. Muddo dhawr bilood ku siman ayaa Jarmalku ciidankii Ruushka uu maskaxdooda jaray waxaanay qaadeen toobiye ku rida Leningaraad. Moosko iyo Kiif, malaayiin askartii Ruushka ahayd ayaa lagu dilay ama iyaga oo la hareereeyay la qabqabtay. Oktoobar markii la gaaray ciidammada Jarmalku waxay hareero tubnaayeen Leningaraad Mooskana in yar ayey u jireen. Dad badan ayaa ka qaxay magaalo madaxda Ruushka xafiisyadii dawladdana waa laga baqa cararay. Istaaliin iyo la taliyayaashiisii ayaa kirimilinka ku haray.

Markaasi dabadeed ayaa Jiilaalkii Ruushku soo dhacay. Ciidammadii Jarmalka oon hu' ku filan qabin ayaa dhaxantii asqaysiisay. Baabuurtii iyo taangiyadii iyana dhaxan awgeed bay isku dhegeen qaarna dhoobada ayey limbadeen. Ciidammadii Jarmalka dabadeed waa ay hakadeen, Ruushkuna waxa uu helay fursad uu ciidan laxaad leh ku dhisto. Xaalkii dagaalku markaasi ayuu weji cusub yeeshay. Askar, aad u tiro badan ayaa Beeraleyda laga soo qoray, warshado dhisnaa ayaa la kala dhigay oo is dhakhso ah loogu raray Buuraha Uural (Ural). Dadweynihii reer Liningaraad si geesinnimo leh ayaabay magaaladooda u difaaceen, ciidanka cas ee Ruushkuna duulaan rogaal celis ah ayuu ciidanka Jarmalka ee Mooskoagagaarkeeda joogay ku qaaday Diisembar 6dii 1941. Iyaga oo uu wato Sarreeye Sakhoof ciidammadii Ruushku cidhiidhi ayey gasheen ciidankii Naasiga, runtii waabay dul mari lahaayeen ciidanka Jarmalka ah oo Hitlar amar ku siiyey inay dhintaan dibna aanay u soo guran. Tabtaasi mid joogta ah may noqon karayn. Bishii Jenwari 15dii 1942kii ayaa Hitlar oggolaaday inay askartiisu dib ugu soo gurato goob gaashaaman oo la magac baxday hoyga doofaarka. Halkaas ayey ku abaadeen, gaajo iyo dhaxannina nafta u keentay.

Markii kaliishu curatay ayaa misana Hitlar rogaal celis ku dhaqaaqay. Dhinaca Masar Roomeel ayaa duulaankiisa ugu soo gudbay Masar ilaa uu Aliskandariya konton mayl u jirsaday. Ciidanka lixaad ee Naasigu waxa uu weerar ku qaaday Kirimliinka iyo ceelasha saliidda ee Kookayshiyan. Markanse dawladda Mareykanka ayaa dagaalka soo gashay ka dib markii Jabbaanku dakadda Biiral weeraray. Iyada oo ay Warshadaheedu ka nabdoon yihiin duulaan cirka ah. Waxa u suura gashay in ay gargaar u soo dirto isbahaysiga. Xooggii Jarmalku markaasi ayuu wiiqmay. Ciidankii siddeedaad ee Ingiriiska oo qalab cusub ku gaashaaman, sarreeye gaas Moontgamarina uu hoggaaminayo ayaa Roomeel bishii Oktoobar ku weeraray Al Calamayn, dabadeedna Tuniisiya dib ugu riixay. Ciidanka lixaad waa uu qabsaday Istaalingaraad oo muddo shan bilood ah dagaal adagi ku dhexmarayey. Taako taako ayaa ciidammada Jarmalku isugu hawleen inay Istaalingaraad u qabsadaan, hase ahaatee, ciidammo soofiyeeti ah oo cusub ayaa weerar ku soo qaday Jarmalkiina hareereeyay. Intaan si dhab ah la isugu xeerin ayaa abbaanduulihii Jarmalku isku dayey in uu dib u gurto hase ahaatee Hitlar ayaa u diiday. Sidaa darteed ayaa askar 300,000 oo Jarmal ahi ku go'doontay Istaalingaraad oo burburtay, iyaga oo ku nool hilibka fardaha dhar dhaxanta ka celiyana aan gashanayn. Ruushku markii uu duul-

aan adag ku qaaday, Jarmalku si mintidnimo leh ayey u dagaallameen, maxaa yeelay waxaanay doonayn in Ruushka ay u gacan galaan. Markii uu taliyihii Jarmalku isdhiibay Bishii Jenwari 1943kii askartii Jarmalku waxay dhammayd 97,000.

Labadaasi Jabniin ee askarta Jarmalka ku timid dagaalkii ayey weji cusub u yeeleen. Ciidanka cirka ee Jarmalka waa la muquuniyey. Dagaalkii badweynta Atlantigga ka socday, maraakiibtii Jarmalka ayaa lagu daadiyey qaarna dekadaha ayaa lagu burburshay. Doonyihii Jarmalka waxa si joogta ah weerar ugu hayey dayuuradaha Ingiriiska oo adeegsanaya Raadaro. Maraakiibta Isbahaysiga Mareykanka ayaa beddelayey hadba inta la dejiyo ama la burburiyo. Hadh iyo habeenba magaalooyinka Jarmalka iyo Warshadahooda iyana Bamam ayaa lala dhacayey. Dawladihii la jiray Jarmalka qaarkood waxay ahaayeen dad taag daran sida Talyaaniga, Roomaaniya, Bulgeeriya iyo Finland ama way fogaayeen sida Jabaanka. Jarmalka waxa ka soo horjeeday xoogagga Mareykanka, Imbaraadooriyadda Ingiriiska iyo Midowga Soofiyeeti sidii Imbaraadooriyadii Jarmalka ee hore ugu khatalantay inay la dagaallanto dalal badan ayaa markanna Jarmalka Naasiga ahi isugu dayey in uu hafiyo dawlado ka tiro badan. Jabniin ayaa Jarmalka hurranaa. Isbahaysiga oo heshiis nabadeed ay la saxeexdaan ayuunbaa Jarmalka sabato saari lahaa, hase ahaatee Jeerjil, Ruusfelt iyo Istaaliin midna ma rabin in uu sidaas falo.

Bishii Nofembar 1942kii ayaa ciidammo Ingiriis iyo Mareykanka isugu jira oo uu hoggaaminayo Aysanawar ayaa Aljeeris iyo Marooko ku degay, halkaasna ku muquuniyey ciidammadii Roomeel. Bishii Juulay 1943kii ciidammadaasi oo ciidankii saddexaad ee Montgamri ku soo biiray ay ku duuleen Sisili. Ciidammo Talyaaniga ka falaagoobay ayaa Muusaliini xiray, dabadeedna abuuray dawlad goosatay inay Isbahaysiga ku biirto. Hase ahaatee dalka badankiisa ciidanka Jarmalka ayaa faraha ku hayey, dad Talyaani ah oo badannina Muusaliini ayey barbar taagnaayeen. Ciidammada cirka ee Jarmalka, ayaa Baarashuut ku soo degay dabadeedna si geesinnimo leh u madax furay Muusaliini. Waxa markaasi la geeyey waqooyiga dalka Talyaaniga oo uu ka dhisay dawlad la magac baxday Jambuuriyadda Salo. Iyaga oo Talyaanigu labada dhinac u kala dagaallamayey misana Jarmalka waxa u suurtowday in ay hakiyaan horusocodkii weerarka Isbahaysiga. Si kastaba xaalku ha u dhaco ee Jarmalku si daran ayuu gaashaanka ugu daruuray duulaankii isbahaysiga. Magaalada Roomna waxay gacanta u gashay ciidammada isbahaysiga bishii Juun 1944kii. Duulaankaasi si habsan bayna uga gaashaanteen. Ciidammadii Jabaan iyaga oo ku kalsoon weerarka midhway, ayaa dayuuradihii Mareykanku soo dul hadhiyeen. Dayuuradaha Jabaan iyaga oo ka soo laabtay weerarkii hore, oo mid rogaal celis ah u gaashaamanaya una qalab qaadanaya, aanse weli duulin, ayaa dayuuradihii Mareykanku oo raabe raabe u socdaa soo dul hadhiyeen maraakiibtii dagaalka ee Jabaanka goobtaasna ay maraakiibtii dayuuradaha siday ku duqeeyeen kuna dejiyeen saddex ka mid ah. Markab afraad waxa uu isna degay kadib markii uu mid kale oo Mareykanku leeyahay uu duqeeyey.

Dagaalkaasi midhwey la isku haleelay waxa uu weji cusub u yeelay dagaalka. Markii ugu dambaysay ee ciidan Jabaan ah oo xooggani uu weerar soo qaado halisna gesho ciidammada isbahaysiga ayey ahayd. Tan iyo intii goobtaasi ka dam-

beysay, dayuuradaha iyo gujisyada Mareykanka waxa u suurtowday inay bil walba duqeeyaan Maraakiibta baayacmushtarka ah ee Jabaan. Markabkii wal ee Jabaan laga dejiyaaba wuxuu u ahaa halbowle la jaray. Maxaa yeelay Maraakiibta ganacsigu waxay Jabaan u soo daad guraynayeen alaabta ay Warshadaheeda ku habayso. Sidaa awgeed Jabaan waxa lagama maarmaan u ahaa in xooggeeda baddu u gacanta sare lahaado. Goobtii Midhway waxa ay Jabaan u ahayd bilow dhammaaday, sidii Jarmalkaba ay Istaalingaraad ugu noqotay curis dhammaaday.

Maraykanka dagaalka Yurub ka taagnaa ayaa aad ugu dheeraa, kan Bariga Fogse indho gaar ah ayey u lahaayeen qalab gaar ah ayey u dhisteen dagaalgalka badda hase ahaatee, si dhib leh ayey guul ku gaarayeen, Maxaayeelay, Jabaanku ninka isdhiiba waxay u qabeen qof aan sharaf lahayn. Sidaa awgeedna ninka Jabaanka ahi inkasta oo la jabsho ismuu dhiibi jirin. Maraykanku Jasiiradda Gudaknaal si dhab yar ayuu ku qabsaday. Hase ahaatee, toddoba weerar oo rogaal celis ah ayey Jabaanku ku qaadeen Maraykanka, Jasiiraddiina dib bay uga qabsadeen, khasaare xoog lehna ciidankii badda ee Mareykanka ayey u geysteen. Ciidammada Maraykanku mar labaad bay soo weerareen ka dib markii dagaal aad u kulul dhexmaraynа Jabaankii ayaa laga qabsaday Jasiiraddii. Mintidnimadii askarta Jabaanka ayaa ka yaabisay Maraykanka cabsina ku beertay.

## GACANKA LEEYTE

Jabaanka, isgaarsiintii qalabka iyo hubka ayaa laga jaray. Ciidammada Ustareeliya ayaa ku horjoogay Jabaanka Kaymaha Ginida cusub. Bishii Nofembar 1943kii waxa Jabaanka laga saaray Jasiiradaha Jilbart, ka dibna Jasiiradaha Marshalas ayaa ciidan 100,000 ahi qabsaday. Bishii Juun 1944kii ayaa Jabaanka misana laga qabsaday Jasiiradaha Mariyans, Tinyaan iyo Guwaam,Jabaanka Bishii Oktoobar ayaa guuldarradii ugu weyneyd gaartay ka dib markii Makaartar oo ciidammo laxaad leh wataa uu ku degay Filibiin. Jabaanku in Filibiin uu waayaa waxaanay malaysan karin ayay ahayd. Maxaa yeelay ciidankooda Baddu dalkaasi ayuu ku maamul dhawri jiary jidadka badan ee loo maro maxmiyadaha Dhajku Bariga fog ku lahaa. Haddii laga hantiyo Filibiin, micnaheedu waxa uu ahaa Jabaan oo wayda marinka saliidda la shito.

## WEERARKII NORMANDI

Galbeedka Yurub waxay u muuqanaysay mid ka xoroobaysa ciidammadii Naasiga. Istaaliin, waxa uu hore uga codsaday Biritishka iyo Mareykanka in ay Jarmalka weerar labaad kaga furaan dhinac kale. Ciidammada Hitlar in xagga Atlantigga lagaga soo duulaase waxay ahayd arrin aad u adag oo halis ah. Sannado ayuu qaatay qorshaha weerarkaasi bishii Juun 6dii 1944kii, ayaa Maraakiib 5.000 dhami xeebta Normandi ku soo xirteen, ciidammadiina xeebta cagaha soo dhigteen.

Weerarkaasi fajiciso ayuu Jarkalka ku noqday. Waxay filanayeen in xeebta Jarmalka laga soo weeraro muddo dambe. Taliyaha ciidammadooduna Roomeel waxaabu booqasho ugu maqnaa xaaskiisa oo Berliin joogtay. Si kastaba xaal ha u dhaco eh ciidankii Jarmalka sutida ayaa ciidammadii Isbahaysigu u qabteen xeebaha qaarkood si dhib yar ayey ug degeen. dar kalena gawrac ka daran kii ka dhacay Galipoli ayaa ka qabsaday. Maalintii ugu horraysay 130,000 oo askari ayaa xeebta ku degay. Lix beri ka dibna tiradu waxay gaartay 326,000 oo askari. Tab iyo xeel toona isulamay hadhin isbahaysigu si ay weerarka ugu guulaystaan. Ciidammada Baarshuutka ku booda ayaa gudaha dalka Jarmalka ku degay si ay isgaarsiinta ciidam-

mada Jarmalka u jaraan. Dekad ku meel gaar ah ayaa dalka Faransiiska laga dhisay si maraakiibtu ugu adeegsato. Dhuumo saliiddu soo marto ayaa badweynta, Atlaantig gunteeda la soo taxay, si saliid joogta ah Baabuurta, taangiyada iwm ay u helaan. Dhuumuhu waxay saliidda si toos ah uga soo qaadayeen dalka Biritayn, ciidammada Jarmalka si door roon ayey isu difaaceen, ciidammada isbahaysigana umay suuragelin in ay wajahad furtaan ilaa Bishii Agoosto la gaaray, markaas oo ay Jeerborg qabsadeen.


Dalka Jarmalka dagaalkii waxa uu ku noqday mid laba wajahadood leh. Hitlar, talo gudcur ayey ku noqotay. Dabadeed waxa uu amar ku baxshay in London lala dhaco Bamam. Hubabkaasi cusubi khasaare weyn ayey London ku rideen dad badanina way ku dhinteen, hase ahaatee, go'aankii dagaalka waxba kamay beddelin. Saraakiil ka tirsan ciidammada ayaa ka niyo jabay sida ammuuruhu u socdaan dabadeed waxaabay isku dayeen inay Hitlar dilaan. Bishii Julay 1944kii ayey Bam ku rideen Shandadiisii gacanta oo miiskiisa hoos tiilay. Mar xarunta shir lagu lahaa ayuu Bamkii ku qarxay, hase yeeshee, Hitlar waxba kuma uu noqon. Ciidammadu mar ay Hitlar ka soo horjeestaan may joogin.

Dagaalka sagaalkii bilood ee ugu dambaysay dalka Jarmalka waxa weerarro adagi kaga ekaayeen Bariga, Galbeedka iyo Koonfurta. Ciidammada isbahaysigu waxay wateen askar dar dar cusub qabta, Jarmalkase carruur iyo odayaal ayuun baa dadweynahoodii ugu badnaa. Dhinaca bariga ciidanka cas ayaa qabsaday Roomaaniya, Bulgaariya iyo Hangri. Xagga koonfurna isbahaysiga ayaa ku guulaystay qabsashadii dalka Talyaaniga. Dhinaca galbeedna Aaysanawar ciidammadiisii ayaa horjoogto lexaad leh ka furay. Ciidammadaasi Maraykanku sida ay uga gudbi lahaayeen webiga Rayn ayaa dhibaato ku noqotay. Bishii Sebtember 1944kii ayey isku dayeen inay webiga qaybtiisa Holand ku taal ka gudbaan, si markaasi ay horjoogtada Jarmalka u daba ka meerteeyaan. Ciidammada Baarashuutka ku booda ayaa ku degay Aayndhoofen, Naymegen iyo Aanhem hase yeeshee goobnaba kumay libaysan. Aanhem ciidankii Baarashuutku waxaabay ku degeen bartamaha laba ciidan oo isbahaysigu ka gudbinayeen webiga Raayn, waxaanay qabsadeen Aakhen oo noqotay magaaladii ugu horraysay ee dalka ay ka qabsadeen.


Hitlar mar labaad ayay talo gudcur ka noqotay, dabadeedna go'aan uu ku khammaray ayuu goostay. Waxa uu isku soo duway siddeed iyo labaatan qaybood iyo wixii markaasi hub iyo qalab dalka ku haray, dabadeedna weerar ayuu ku qaaday isbahaysiga. Bishii Disembar 15dii 1944 iyaga oo garabsaday cimilo ceeryaani hadoodshay ayaa askar dhalin u badan oo Jarmal ahi jabsheen horjoogtadii ciidanka Mareykanka ee ku ekayd Ardemnes. Laba cisho ka dib siddeed mayl ayaabay u jirsadeen xarunta ciidammada Mareykanka. Mareynkanka waxa u suuragashay in ay ka soo kabtaan weerarkii fajiciska ahaa, dabadeedna bam ayey la dhaceen toobiyihii isgaarsiinta ciidammada Jarmalka. Jarmalku waxay ka dalbeen askartii Mareykanka ee fadhiday Baston in ay is dhiibaan, laakiinse, Mareykankii way diideen. Ka dib markii uu dhammaaday dagaalkii Bulo-Battle Bishii Janwari 1945kii Jarmalku goobtay markii hore joogeen ayey ku ekaayeen, waxaana laga dilay 120.000 oo askari.

Geesinnimo ka sabata saari karaysay in dalka Jarmalka la qabsada may jirin. Bishii 13dii Ruushka ayaa Fiyana qabsaday. Siddeed cisho ka bacdi waxay ku ekaayeen agagaarka Barliin. Bishii dhammaadkeedii ciidanka qaybtiisii lugta ee 69aad iyo kan Ruushka qaybtiisa 58aad ayaa ku kulmay Torgow. Dalkii Jarmalkuna laba gobol ayuu u qaybsamay. Hitlar maalmihiisii ugu dambeeyey waxa uu ku dhammaystay guriga madaxtooyada Jarmalka ee Berliin. Halkaas oo uu ku noolaa meel konton fiit hoos u qodan. Ilaa iyo intii la isku dayey in la shirqoolo Hitlar waxa uu noqday nin Buka. madaxdiisu waaba uu gariiri jiray cagahana wuu jiidayey, gacanti-isa bidixna naafo ayey ku dhoweyd. Waxa uu noqday nimaan sida wax u jiraan garan karin. Askarta waxa uu ku toogan jiray gefaf yar yar ah. Ciidammo aan gaashaandhig u suurtoobayn ayuu ku amar siinayey inay sutida qabtaan oo ay dhintaan. Amaro ayuu bixinayey lagu baabi'inayo magaalooyin dhisan, isaga oo diiddan in la qab-sado. Aakhirkii markii uu ka war helay in Muusaliini ay dileen asxaabtiisii ayuu goostay in uu isna is dilo. Bishii Abriil 29dii 1945kii ayuu guursaday Iifa.Buruun oo ahayd gabadh in door ah jeclayd. Subaxdii bishii Abriil 30dii ayuu Hitlar istoogtay. Iifa iyada in kastoo tamuujad la siiyey misana sun in ay cabto ayey ka door bidday. Adeegihii guriga ayaa markaasi labadoodiiba kor u saaray, dabadeedna inta Batrool lagu shubay ayaa dab lagu qabtay. Goobalis isna inta uu ololkii salaantii Naasiga u taagay ayuu dabadeedna is toogtay. Bishii Meey 7dii 1945kii ayaa dalka Jarmalka bilaa shuruud is dhiibay markii labaad muddo ku eg soddon sano.

**Goobihii ugu waaweynaa ee dagaalkii Labaad ee Yurub iyo waqooyiga Afrika.**




GOOBIHII UGU WAAWEYNAA EE DAGAALKII LABAAD EE YURUB IYO WOQOOYIGA AFRIKA



**Dhulkii ay qabsatey gaashaanbuurta "AXIS"**

**Jidadkii sahayda ee isbaheysiga.**

**Duullimaddadii isbaheysiga.**

**Goobihii ugu waawaynaa ee dagaalka.**

## MARINKII DEKADDA BIIRAL LAGA SOO WEERARAY BARIGA FOG — 1917 — 41KII

Dalka Maraykanka waxa u suurtowday in uu iska go'doonsho qaska Yurub ka oogmaayey. Heshiiskii Nabadgelyada ee ku magac dheeraa heshiiskii Fersaylis Maraykanku wuu diiday. Hase ahaatee, mid gooniya ayey Jarmalka kala saxiixdeen 1920kii. Madaxweynihii Maraykanka Harding waa uu diiday in ururka uu ku biiro. Dadka Maraykanku arrintaasi kamay yaxyaxin ee wayba ku farxeen. Waxay iyaga la ahayd inay ku nacasoobeen dagaalkii koowaad ee ay ka qayb qaateen. Waxay qabeen in aanu ahayn dagaal iyaga ka dhashay, dad badanna way ku waayeen, dhulna kamay korodhsan. Dagaalka laftiisana dayn badan ayaa ka raacay oo isbahaysigu bixin kari waayey, ama ay bixinba waayeen. Dad badan aya hanfariir ka qabsaday dagaalkii hore, markanse waxay u fiigteen inaan mar labaad la khatalin.

Marka la eego sida xaal ka yahay Yurub, siyaasaddaasi way aragti gaabnayd. Haddii Bariga fog la fiirshana halis ayey ahayd. Jabaan intii ay Dalka cusuboonaysay tirada dadkeedu si lexaad leh ayuu u kordhay. 1852kii waxa dadkeedu tiro le'ekaa 27 malyuun. Jabaan waa dal aad u yar, sida darteed ayaa madaxda dalkasi u doonaysay in ay degaan dalweynaha Eeshiya. Taasi ayaana dhalisay in Jabaanku qabsado dalka Shiinaha, Ruushkana ay dagaal iskaga horyimaadaan. Waxa ay ka faa'iideysatay dalalka reer Yurub oon tartan la gelin dagaalkii Koowaad. Waxaaba u suurtowday in dalka Shiinaha ay oggolaysiiso kow iyo labaatan qodob oo dalka Shiinaha ka dhigay goob ay Jabaan ka duusho.

Dowlado Maraykan ah oo isdaba joogay waxay isku dayeen inay xoogga Jabaanka laba siyoodba u yareeyaan. Marka hore waxay ku adkaysteen in Shiinuhu aanay aqbalin koow iyo labaatanka qodob, ee Jabaanku ku soo rogey iyo in dawladaha uu saaxiibka la yahay oo idil dalka Shiinaha irridihiisu ay u wada furnaadaan. Jabaan arrintaasi may jeclaysan, hase ahaatee,kol haddii Maraykanku ka xooggana dalka Shiinahana uu la bah ahaa, Jabaan arrintay wadatay way ka gacma laabatay. Mar labaad, Maraykanku waxa uu isku dayey in xoogga badda ee Jabaan oo si daran u korayey la yareeyo. 1921kii shir guud oo ciidammada badda loogu qabtay magaalada Washington waxa Jabaanka lagu qasbay inay koobto tirada Maraakiibta dagaalka. Waxa la gudoomay in mustaqbalka Ingiriiska iyo Maraykanka uu midba dhisan karo shan Markab, Jabaanna saddex. Dalka Biritayn markan waabay ka shiixaysay heshiiskii ay Jabaan la gashay 1902dii, kol haddii sababtii ku kaliftay, oo ahayd halista dalka Jarmalku geshay ay haatan dhammaatay. Aad ayey u jeclaysatay in heshiiskii ay ku beddesho heshiis afar xoog dhexmara iyada, Maraykanka, Jabaan iyo Faransiis, mid walibana kan kale ugu ballan qaado in uu ilaasho xaqa uu kan kale ku leeyahay Bariga fog.

Tallaabooyinkaas oo dhammi midina may raali gelin Jabaan. Maxaa yeelay, sida Talyaaniga oo kale ayuu qabay in bahdii ay wada dagaallameen ay lugta jiiday. Gaar ahaan colaadda Maraykanka ay u qaadeen waxay korodhay markii xeerkii Joonsan uu mamnuucay dad Jabaaniis ahi inay degaan dalka Maraykanka. Dadka Jabaaniisku colaadday u qabeen reer galbeedka waxay korodhay markii ay dalal reer Yurub ahi cashuur dheeraad ah saareen alaabta warshadaysan ee Jabaanka. Madaxda ciidammada qalabka sida arrintaasi way la qaraaraatay. Ururro qarsoodi ah iyo kuwo saraakiisha ciidammadu leeyihiin ayaa dadweynaha dagaal ku guubaabiyey. Niman-

kaasi waxay ku doodayeen in taag darrida dalka Shiinuhu aanay mid waarta noqonayn. Sidaas awgeedna ay habboon tahay in Shiinaha lagu duulo inta aanay xoogaysan.

Arrintaasi waxa aad ugu hanqal taagayey askarta Jabaaniiska ah ee Manshuuriya degganayd. Waxa gobolkaas joogay askar iyo niman Baayacmushtar ah oo ku dulnoolaansho ka abuuran rabay dalka Shiinaha. Khayraadka gobolka Manshuuriya iyo dalka Shiinaha guud ahaan ayey u hamuun qabeen. Dalkaasna waxay doonaan ayey ka samayn jireen, maadaama ay dawladdoodii aad uga durugsanayd. Waxaan tusaale ahaan u soo qaadan karnaa 1928kii markii shirqool lagu dilay nin madaxda dalka Shiinaha ka mid ah si dagaal ay u ridaan. Hase ahaatee dawladda Jabaan ee Tookiyo ayaa garab siin wayday, dabadeedna siyaasadday wateen ayaa hoobtay.

1931kii Shiinuhu waxay ku mashquuleen daadad ku soo rogmaday Yurub iyo Maraykanna dhibaatooyin xagga dhaqaalaha kaga yimi ayaa gacma xiray. Ciidankii Jabaaniiska ayaa tareen agmara magaalada Mukdin waxyeello u geystay. Hase ahaatee, dhibaatadaasi waxa qoorta loo sudhay dadka Shiinaha, marmarsiiyana waxay uga dhigteen gobolka Manshuuriya oo ay isku baahiyeen. Markii ku xigtay Magaalada Shaangahay ayaabay bam la dhaceen.

Weerarka Manshuuriya waxa uu ahaa talaabadii ugu horraysay ee ururka ummadaha kartidiisu ku soo shaac baxday. Maxaa yeelay Shiinaha iyo Jabaanba xubno ururka ka mid ah bay ahaayeen. Jabaanku in uu dagaal gardarro ku kacayna si cad ayuu u muujiyey, hase ahaatee ururku wax dhaafsiisan in Jabaan uu cambaareeyo muu qaban. Guddi soo eegta sida xaal u dhacayna waa la diray. Iyada oo aan Maraykan iyo Ruush midna ku jirin Ururka, Ingiriiskuna uu aad u taag darraa, ayuu dalka Shiinuhu Jabaan u gacan galay. Hashiisyadii Jabaan lala galay waxay ciidanka Kuwantung la ahaayeen xaashiyo aan qiimo lahayn. Askartii Jabaaniisku Manshuuriya oo idil ayey qabsadeen waxaanay ka dhiseen dawlad dabadhilif ah oo lagu magacaabo Maanjukno. Dalka Jabaan dadkii taageersanaa ciidammada ayaa af gambiyey dawladdii. Madaxdii Wasiirradana waa la dilay.

1930naadii gardarradii Jabaaniisku si dhakhso leh ayey u fidday. Jabaan waxay rabtay Shiinaha inay u garabsato dagaal ay reer galbeedka kala hortagto. Shiinuhu markii uu ku diidday fikraddaasi waxay Jabaan goosatay in duullaan buuxa ay dalka Shiinaha ku qaaddo. Bishii Julay 1937kii qulqulad ayaa ciidammada Jabaanka iyo Shiinaha ku dhexmartay Buundada Markopoolo oo Bekiin u dhow. Inkastoo Shiinuhu ka cudurdaartay arrintaasi iyada ah oo waliba ciidammada Jabaanku aanay xaq u lahayn in halkaasi ay joogaanba, misana qulquladdaa waxay Jabaanku marmarsiinyo uga dhigteen weerar ay dalka Shiinaha ku qaadaan. Arrintaasi Jabaan walaac ayey ku ridday. Maxaa yeelay, Ruushka ayey ka baqo qabeen in uu Manshuuriya soo weerarro inta ay dalweynaha Shiinaha ka dagaallamayaan. Si kastaba ha ahaatee (ciidammadii Kuwaantung siday rabeen bay yeeleen. Dadkii Shiinuhu si geesinnimo leh bay u dagaallameen, hase ahaatee, muddo sannad ku siman ayaa meelihii aad loo degganaa oo dhan Jabaanku qabsaday, dawladdii ummadda Shiinahana waxay ku qasbeen inay degto Jangking.

## BARAARUGGII MARAYKANKA

Roosfelt wuxuu ka walaacsanaa sida arrimahaasu u soconayeen, maxaa yeelay, waxa uu iska dhigayey nin nabadda jecel. Sida uu arrimaha gudaha ugu soo rogay siyaasad la magac baxday wax qabasho cusub ayuu tan arrimaha dibeddana aragti u jeedda Jaarnimo wanaagsan — ku maamulay. Taasi waxay gaar ahaan ku lug lahayd dalalka Koonfur Ameerika. Beryihii hore ee dalalkaasi loo xoogsheegan jiray waa laga gudbay. Baanamana madaxbannaani ayey heshay. Ciidammadii badda ee Heeti degganaana waa laga soo qaaday. Xeerkii dawladda Maraykanka u oggolaanayey in arrimaha Kuubba ay dhexgasho golaha ayaa baabi'iyey.

Tallaabooyinkaasi guulo ayey u soo hooyeen dalalka Koonfurta Ameerika. Nasiib darrose waxba kamay beddeli karayn qaska Yurub iyo bariga fog ka taagnaa. Markii Jarmalka iyo Jabaanku kala saxiixdeen heshiis saaxiibtooyo oo ka horjeeda ururka dhaqaalaha ee Shuuciga, Madaxweynaha Maraykanku, Roosfelt, aad ayuu uga walaacay, dadka Maraykankana wuu uga digay halista ka dhalan karta heshiiska labadaas dal dhexmaray. 1937kii isaga oo ka hadlaya dagaallada ka socday Isbayn iyo Shiinahaba waxa uu dadweynaha u sheegay xaalku haddii uu sidaas ku socdo in dalka Maraykanku aanu ka nabad geli doonin weerar lagu soo qaado. Dadku markay hadalkiisii maqleen aad ayey ula yaabeen, niman xisbigiisa ku jirayna waxay ku tilmaameen nin dagaal jecel. Laba sannadood ka dib markii uu dagaalkii labaad ee adduunku qarxay, dadweynaha Maraykanku dareen go'doon u ah ayaa hayey. Ninka Maraykanka ahi dan kamuu lahayn waxa Yurub ka dhacaya, madaxda ciidammada Maraykankana waxay la ahayd in Biritayn iyo Farans ay ka guulaysanayaan Jarmalka iyagoon cid kale la hiishan. 1940kii Roosfelt wuxuu dadkiisa u sheegay «In aanay hubkooda ku isticmaalayn dagaal gardarro; in aanay askar u dirayn dagaal reer Yurub ka dhexeeya».

1940kii markii Farans jabtay ayaa Maraykanku indhaha kala qaaday. Waxa ka yaabiyay xoogga Jarmalka, taasina waxay Maraykan ku dhalisay in dadka qasab lagu qoro milatariga iyo in la weyneeyo ciidanka badda. Xagga badweynta Atlaantigga doonyihii Jarmalka (U-Boats) ayaa maraakiibta Baayacmushtarka ee Maraykanka kula kacay in ay dejiyaan. Roosfelt wuxuu markaas amar ku baxshay in la toogto gujisyada Jarmalka iyo Talyaanigaba. Dalka Biritayn waxa uu Maraykanku u diray wixii qalab ah ee lagu dagaal geli karo, si ay uga gaashaamato duullaan lagu soo qaado. Maraykanku waxa uu ciidammada badda ee boqortooyada Biritayn siiyey Konton Markab oo duug ah, isna waxa loo oggolaaday in saldhigyo uu ka samaysto Jasiiradaha kariibayanka. Sannad ka hor gargaarkaasi waxa u ahaa mid aan suurtoobeyn. Hase ahaatee, Maraykanku waxay aqoonsadeen markan sida uu xaal yahay. Sannadkii 1940kii dhammaadkiisii ayaa Roosfelt mar saddexaad loo doortay madaxweyne in uu noqdo. Isaga oo ku dhiiraday kalsoonidaas uu helay ayuu soo bandhigay Mashruuc ku caan baxay Mashruuc Amaaha — Ijaar ah (Land-Leas Scheme). Talaabadaasi waxay suuragelisay in Biritayn alaabo kala duwan loo diro. Lacagtana laga sugo ilaa uu dagaalku dhammaado. Haddii alaabtu degto ama la waxyeeleeyo, waxa loo qaadanayey sidiiyoo uu Maraykanku ku takrifalay. Marka laga bilaabo Bishii Maajo 1941kii, Biritayn iyo bahdeedii. Maraykanka ayaa waxyaabahay ugu baahnaayeen inay dagaalka ku wadaan u dirayey.

Shan bilood ka dib Roosfelt iyo Jeerjil baa ku kulmay xeebta Niyuu Fawndland (New Foundland) halkaasna ku saxiixay Axdigii Atlantigga ee caanka ku noqday xornimada dadyowga adduunka loogu baaqay iyo sameynta urur nabadeedka ka dib marka Naasiga laga guulaysto.

## DEKEDDA BIIRAL

Isla waqtigaas madaxda Jabaanku waxay ka doodayeen waxay fali lahaayeen. Qaska Yurub ka taagnaa waxa uu Jabaan fursad u siiyey takri fal madaxbannaan.

Askartu waxay rabtay dalka Shiinaha iyo Manshuuriya oo la isku baahiyo. Ciidammada Baddu waxay rabeen in Koonfur lagu duulo si gacanta loogu dhigo ceelasha saliidda ee Dhajku ku lahaa Indooniisiya. Hase ahaatee, waxay ka baqe qabeen Ruushka. 1940kii Ruushka ciidankiisa Taangiyada ayaa ku libaystay dagaal ay iskaga horyimaadaan Jabaanka oo ku ekaa soohdinta Manshuuriya. Waxa Jabaan u caddaatay in Midowga Soofiyeetigu aanu ahayn Raashiyadii hore ee taagta darrayd. Jabaan waxa kalooy aqoonsatay in Jarmalku dagaalka ku libaysanayo. Sidaa awgeedna waxay u hamuun qabtay in gacanta ay ku dhigto maxmiyadaha Biritayn, Dhajka iyo Farnsiisku Bariga fog ku lahaayeen. Haddii ay hubi lahaayeen in Ruushku aanu soo weerari doonin ciidammada Jabaan Koonfur bay duulaan ku qaadi lahaayeen si warshadaha Jabaan ay markaas uga helaan alaabta caydhiin ee dalalka Indoo-Jayna, Siyaam, Barma, Maleeshiya iyo Bariga Hindiya ee Dhajku gumaysto. Mashkaladay Jabaan ka walaacaysay, Jarmalka ayaa u furay, ka dib markay ciidammadii Naasigu weerareen dalka Ruushka bishii Juun 1941kii. Markii la gaaray Bishii Disember 1941kii Jabaan wax waliba way u dhammaayeen Kono oo ahaa Madax Wasiirrada, nabaddana jecel waa la casilay, sarreeye gaas Tojo ayaana lagu beddelay. Jabaan kelitashi millitari ah ayaa ka dhismay. Hore markii Faransiiska la jabshay (Juun 1940kii) Jabaan Indoo Jayna ayey qabsatay. Markaas ayaa Roosfelt joojiyey birtii Jabaan loo dhoofin jiray, moodkay dalka Maraykan ku lahaydna la fadhiisiyey. Madaxweynaha Maraykanku waxa uu Hitlar u arkaayey nin halis ah. Jabaaniisku si cad umay muujin himilooyinkooda ay dagaal ku rumayn rabeen Jabaan waxay la soo taagnayd nabad ayuun baanu rabaa, bal muu Maraykan Shiinaha dagaalkay wadaan ka joojiyo. Roosfelt waxba kama uu qaban arrintaasi. Wadahadallo ayaa la furay ku ekaa Bishii Noofembar 26dii 1941, markaasoo Maraykanku diiday waxay Jabaan codsatay. Kolkaas ayaa Tojo xiriirkii dibloomaasiga ahaa u jaray dawladda Maraykanka. Warqaddii Jabaan ay ku caddaysay arrintaas Washington way gaartay, hase yeeshee, waxa dib u dhac ku riday tarjumadii oo lala habsaamay. Wixii ku yiil waxa la ogaaday lix saacadood ka hor intaan dekadda Biiral Jabaanku weerarin, oo ku taal Jasiiradaha Hawaay, 7dii Disembar 1941kii.

Bil horteed ayaa lix markab oo kuwa dayuuradaha qaada, laba kuwa dagaalka ee waaweyn, laba kuwa badda maaxa iyo konton markab oo yar yari ka amababaxeen Jabaan. Waxa ay sideen 423 dayuuradood oo Bamam ku gaashaaman. Waxay amar ku qabeen in ay ka gudbaan waqooyiga Jasiiradda Aluushiyan iyo midhway halkaasna ay weerar ka qaadaan. Inay guulaystaan waxa sal u ahaa in aan la arag oon la ogaan.

Qorshaha weerarkaasi waxa lahaa Admiral Isoroku Yamamoto, dhowr sano ayuu ku dooday in kol haddii uu Maraykanku ka xoogweyn yahay, sida keliya ee

Jabaan kaga rayn kartaa ay tahay, iyada oo burburisa ciidanka badda ee Maraykanka. Si taasi u suuragasho Maraakiib dayuuradaha qaada ayuu dhisay, oo loogu tala galay in lagu dhoweeyo goob aan durugsanayn oo dayuuraduhu ka weerari karaan saldhigga ciidanka badda iyo kan cirka ee Maraykanka. Maraakiibtu intay dhexda soo socotay duuliyayaasha waxa laga dhaadhacshay Jaangooyada weerarka dekadda Biiral. In duuliyayaashu ay gaaraan dekadda Biiral iyada oon la arag, waxay u muuqanaysay hal aan suurageli karin. Hase ahaatee wax weliba sidii ay rabeen ayey u dhaceen. Maraakiibta Jabaanka ee waaweyneyd. Kasumi iyo kuwii kaleba diyaaradihii Maraykanka ee ilaalada ahaa Indho may saarin. Waxa Maraykanka lagu canaantay in waagaas ay foojigo darraayeen. Runtu waxay ahayd in madaxda taliska ciidammada Maraykanku ay ogaayeen Jabaanku in weerar uu ku soo qaadayo, hase ahaatee gees uu kaga imanayo ayaanay garaneyn.

Jabaan qorshe si habaysan u sugan ayey u dejisay weerarkaasi. Jabaanku waay ogaadeen dekadd Biiral samayskeeda, baaxaddeeda, maraakiibtu meelahay ku xirtaan IWM. Maalin axadeed ayeyna weerarkooda u doorteen, maxaa yeelay, maraakiib dheeraad ah ayaa maalintaas oo kale dekadda ku xirata. Madaxdii taliska ciidammada ee Haway joogtay, Anfiriir ayaa ku dhacay markii taliye Mitno Fuchida oo wata 183 dayuuradood uu dul fadhiyey saldhiggii Maraykanka 8dii saacadood ee subaxnimo. Askartii waqtigaas nin baa meel ayuu jiray, qaarba waxbay ku foognaayeen, reedyowga ayaa furnaa oo Muusiko ka baxaysay. Dekadda Maraakiibtii dagaalka ee Maraykanka ayaa laba laba isugu dhinac xirnaa muddo yar ka hor ayaa horjooge kuwa Raadaarka maamule ka mid ahi dareemay dayuuradaha Jabaanka, hase ahaatee sarkaalkii uga sarreeyey ayey la noqotay dayuurado aan cadow ahayn. Dhawr daqiiqo ka bacdi gegooyinkii dayuuradaha iyo Maraakiibtiiba dayuuradihii Jabaanka ayaa Bamam la dhacay. Afar dayuuradood oo keliya ayaa ka kacay gegooyinkii, hase ahaatee Markiiba dayuuradihii Jabaanka ayaa riday, 117 kalena intaanay dhulka ka kicin ayaa la duqeeyey. Maraakiibtii dekadda ku xirnayd iyakana askaxa ayaa laga dhigay. Ciidankii Maraykanka talo gudcur bay ka noqotay. Qaar tamuujado ayey dayuuradihii ku toogteen, nin askari ahina intuu daasad furkeed ku daba dhuuntay ayuu mishigaan ku toogtay dayuuradihii Jabaanka.

Markii labaad oo 170 dayuuradood Jabaanku soo kacshay 9kii saac ee subaxnimo qiiq iyo olol aya ka dul oogmay Maraakiibtii Maraykanka. Afar ka mid ahaa ayaa markaas degay, markabkii ku magcownaa Aristoone markaas ayuu degayey isaga oo ololayey, 1000 qofna wey ku guda jireen. Aakhirkii Jabaanku markii ay weerarkii joojiyeen 1:30kii duhurnimo (8) siddeed markab oo kuwa dagaalka ah ayey ka dajiyeen 2,403 qof oo Maraykan ahna weerarkoodii ayey ku dhinteen.

Weerarkay Jabaanku ku qaadeen dekadda Biiral kumay taabin ulajeeddadii oo dhan. Maxaa yeelay, saliid fara badan oo kayd u ahayd Maraykanka waxyeelo may gaarin, saddex Markab oo kale oo qaada dayuuradaha Badda ayey ku maqnaayeen. Dhirbaaxadii weyneyd ee Jabaanku Maraykanka la rabay lamuu helin. Dhinaca siyaasaddase weerarkaasi waxa uu Maraykan ku dhaliyay in go'doonkuu ahaa ka baxo. Maraykan, marka maalintaas laga bilaabo waa uu ka go'ay fikraddii ahayd in amuuraha dunida kale ka dhacaa aanay isaga waxba ka gelin. Weerarkaas 1941kii lagu soo qaaday waxa uu gun u noqday siyaasadda uu Maraykanku ilaa maanta kaga dhaqmo adduunweynaha.

## DAGAAL WEYNIHII 2aad EE ADDUUNKA IYO BARIGA FOG.

Dawladda Maraykanku cunaqabatayntii dhaqaalaha ee ay 1941kii Jabaanka ku soo rogtay, waxa uu Jabaanka ku dirqiyey in laba arrimood oo kale kala doorato. In dagaalka ay Jabaan joojiso ama in ay Koonfurta Bariga Aasiya oo dhan gacanta ku dhigto dabadeedna ka dhigto irmaan ay ku habto Warshadaheeda. Kan hore midh aan u cuntamayn madaxda Milatariga ee Jabaanka ayuu ahaa. Kan labaad ayaa ula ekaa mid ay guul ka gaarayaan. Dalka Filibiinis, Boorniyu, Sumatra, Maalaya, Taayland, Barma iyo Dar kaleba difaac adag may haysan. Dalalka reer Yurub ee meelaha muhiimka ah ka hayey waxa ka mid ahaa Dhajka, Biritayn iyo Maraykanka, Dhajka iyo Biritayn labaduba midna taag ma hayn, Maraykankuna diyaarba muu ahayn. Ruushkii ay ka baqa qabeenna laftiisa ayaa dagaal Jarmalku ku soo qaaday. Dawladaha isbahaysigu waqtigaas umay babac dhigi karayn xoogga-Jabaanka. Jabaanku waxa uu dagaal gelin karayey 200, oo markab, isbahaysiguna 90 sidoo kale 7500 oo dayuuradood ayaa Jabaanku haystay, isbahaysiguna 1000 dayuuradood. Askarta isbahaysigu meelayow kala durugsan ayaa fadhigoodu ahaa. Jabaanse ciidammadeedu meel bay isugu gayn karaysay dabadeedna meeshii ay doonto ayay weerari karaysay.

Hirgelinta qorshaha dagaal galka Jabaanka ciidammada Badda ee Maraykanka ayaa caqabad ku ahaa, isagana dekadda Biiral bay la noqotay inay ku dhabar jabsheen weerarkay dekadda Biiral ku qaadeen. Dabadeed waxay ku duuleen Filibiin, Maleeshiya, Tayland, Borniyuu iyo Jasiiradaha Wayk, Guwaam iyo Hongkong. Dalalkaas oo idil guul bay ka gaareen. Hongkong, Wayk iyo Guwaam waxa uu Jabaanku qabsaday Bishii Disembar 1941kii Maleeshiya, Tayland iyo Singabuur waxa Jabaanku qabsaday Bishii Febraayo 1942kii. Dhajkuna maxmiyadihii uu Bariga fog ku lahaa waxa laga qabsaday Bishii Maajo. Dhinaca Filibiin ciidammada Maraykanka waxa laga saaray Bishii Abriil. Bishii May 1942kii Biritishka waxa dib loogu riixay Barma, Jabaankuna Koonfurta Bariga Aasiya oo idil isaga ayaa taabay.

Jabaanku markii uu dalalkaas qabsaday dagaalkii Bariga fogi waxa uu ku ekaaday Badda. Waxa markan soo shaac baxay hab cusboon oo badda lagaga dagaallamo. Dayuuradaha Jabaanku weerarkay dekadda Biiral ku qaadeen iyo laba markab oo kuwa dagaalka ah ooy ka dejiyeen Biritishka, waxay daaha ka rogeen fiirooyinkii Yamamoto uu ku doodayey. Maraakiibta dagaalka ee madaafiicda ridaysay wax laga tegey ayey noqdeen. Maraakiibta dagaalka ee cusub waxay noqdeen dar dayuurado gana halkay xabadda ka ridi lahaayeen. Waxa soo baxay dagaal cusub oo badda maraakiibta isku haleeshaa qolona qolada kale ay la dagaallamayso aanay arag. Maraakiibta dagaalku iyaku iskamay hor imaanayn. Dagaalka waxa qayb weyn ka qaadanayey dayuuradaha kor saaran maraakiibta dagaalka. Qolada maraakiibta dayuuradaha qaado laga dejiyo ayaa laga adkaanayey.

Guulihii dhakhsaha lahaa ee ay gaareen ayaa madaxda dalka Jabaan hiyi tiigaallo dheer gashay. Bishii May 1942kii, Jabaan ciidan xooggan oo soo qabsada Jasiiradaha Soolomon bay dirtay. Ciidanku in uu maro badda Kooral, halkaasna uu ka duulo ayaa qorshuhu ahaa. Hase yeeshee, Maraykanka ayaa yelay furihii haltilmaamsiga dagaalka ee ciidammada jabaanka. Ciidammadii Jabaanka iyagoon ka war hayn arrintaasi ayey badda Koral isku haleeleen ciidankii Maraykanka. Dagaalkii

halkaas ku dhexmaray waxa uu ahaa kii ugu horreeyay ee Maraakiibta dayuuradaha qaadaa iskaga horyimaadaan. Jabaan laba markab ayaa laga dejiyey, Maraykankana mid. Labada dhinacba dayuurado tiro badan ayey iska soo rideen. Markii ugu horreysay bay ahayd ee ciidan duullaan ah oo Jabaaniis ahi uu dib u laabto.

## DAGAALKII JASIIRADDA MIDHWEY

Goobtii dagaalka ee badda Kooral waxay Jabaan ku ridday niyo jab, laakiin guuldarro way u dambaysay sannadk horraantiisii ayaa dayuuradaha meelaha durugsan bamamka ku duqeeyaa ka dul kaceen markab dayuuradaha qaada, dabadeedna ay soo duqeeyeen Tookiyo. Inkasta oo aanay dayuuraduhu khasaare xoog leh geysan, haddana madaxdii shir guud oo ay yeesheen waxay isku raaceen in weerarkaasi laga soo qaaday Jasiiradda Midhwey oo Maraykan saldhig Milatari u ah. Yamamoto oo ahaa abaanduulihii weerarkii dekadda Biiral ayaa ku adkaystay in ciidan kuwa Maraakiibta ah oo xooggani uu weerarro Jasiiradda Midhwey. Isla bishii May ayaa ciidan 5 markab oo kuwa dayuuradaha qaada ah, laba kuwa dagaalka ah iyo 5,000 oo nin dhammi ay u ambabaxeen inay duullaan Jasiiradda Midhwey ku qaadaan. Yamamoto hadduu markii hore guulo soo hooyey, markan wuu gafay. Maxaa yeelay, waxa uu u qaatay in laba markab ay Maraykanka badda Kooral kaga dejiyeen laba markab oo kalena meel durugsan kaga maqan yihiin.

Ciidammada Maraykanku markaasi waxay halqafeen haltilmaamihii. Hadduu hantiyo Filibiinis, micnheedu waxa uu ahaa Jabaan oo wayda saldhigga saliidda la shito ee lafdhabarka noloshooda ah. Ciidanka Jabaanka waxay la ahayd in ciidankeeda badda ay u huraan gacan ku haynta Filibiinis. Gacanka Leyte waxa ka dhacay dagaallada badda kii ugu weynaa intii dagaalweynuhu socday. Ciidammada Maraykanka oo Biiral u aar gudi rabey iyo askarta Jabaanka oo iskood niyo mintid ah ku dagaal gala ayaa dayuurado iyo Maraakiibta isku haleelay. Markii dagaalkaasi dhammaaday ciidanka badda ee Jabaanka waxa laga dajiyey afar markab oo kuwa dayuurada qaada ah iyo (2) laba kuwa dagaalka ah. Dhinaca xeebta askartii Jabaanka waa lagu jabshay, markii magaalo madaxda Maniila laga qabsadayna waxa Jabaaniiska ka dhintay 170,000 oo askari.

Xagga degaanka Barma iyo Asaam ciidammada Ingiriiska iyo Hindidu dhibaato hor leh bay kala kulmeen sidii ay ciidammada Jabaniska u jabin lahaayeen. Taakadii wal ee dhul, buur ama kayn ahba ciidan Mintid ah oon la mari karin ayaa Ingiriiska iyo Hindidu doonayeen in ay ka qabsadaan. Ciidanka 14aad ee Ingiriisku dagaallo isdaba joog ah ayuu ku qaaday Jabaanka si waddada Barma ugu furanto dabadeedna uu dalka Shiinaha qalab joogto ah uga helo. Jabaanku xooggiisii waxa uu dul dhigay Ingiriiska. Bishii Maajo 1944kii ayaa Jabaanku weeraray Asaam. Dagaallkii halkaasi la iskaga horyimi waxa uu socday saddex bilood, waxaanu istaagay markii ciidammadii Jabaan lagaga guulaystay imfal (Imphal). Ingiriiska dabadeed waxa u suurtowday in uu Barma weerar ku qaado. Taasina waxay dhalisay in ciidammadii Jabaan dib loo sii riixo oo guuldarro walba tu kale ugu darsanto. In ku siman saddex bilood xoogga Milateriga Jabaan waxa laga burburshay saddex ciidan oo 347,000 oo askari dhan. Bishii Janwari 1945kii waddadii Burma ayaa Ingiriisku furtay. Singabuur iyo Raanguunna ciidammada cirka ee isbahaysiga ayaa duqaynayey. Ciidammada isbahaysigu waxay ku qalqaal jireen in Maliishiya Bisha Juun duullaan lagu qaado.


Dawladaha caddaanka ahi indho gaar ah bay ku eegayeen xoogga Jabaanka. hal aan suuragal ahayn bayna la ahayd in ummad ka baxsan diirka cad ee reer Yurub, inuu laxaad intaas le'eg yeesho dad badan oo caddaan ahina ay ku nafwaayaan dagaal ay ku qaadeen dalka Maraykanka, madaxda Maraykanku waxay u fiiro lahayd, kana cabsi qabtay geesinnimada iyo mintidnimada Jabaanka waxayna rabeen in si dhib yar ay uga lug baxaan dagaalka ay kula jiraan Jaban. Laga bilaabo Bishii Noofembar 1944kii Jabaan waxa lala dhacay Bamamkii ugu darnaa inta taariikhdu og tahay. Bishii Maajo 1945kii waxa dayuuradaha cirka ee isbahaysigu bamam ku rideen Tookiyo, halkaasna waxay ku gubeen 16 Mayl oo laba jibbaar ah, 78,000 oo qofna way ku qudhbaxeen. Weerarkaas cirka isbahaysigu waxay u aadeen si ay Jasiiradaha Indo-Jayna iyo Okinawa ay u qabsadaan dabeedna ay ka dhigtaan saldhig ay Jaban kaga duulaan. Ciidankii Jabaanse sutida ayuu u qabtay in ay isdhiibaanna hiyigoodaba ma gelin. Duuliyayaashii Jabaankuna wax kaleba iska daayoo. Maraakiibta Maraykanka ayaabay shoolada uga dhacayeen. Duulaankii ay labada Jasiiradood ku soo qaadeen waxa ciidammada Maraykanka kaga dhintay 15,000 oo askari. Maraykankii cabsi iyo naxariis darro ayay u qaadeen Jabaanka. Taliyaha dalka Jabaan Imbarador Togo inkasta oo Ruushka uu waydiistay 13kii bishii Julay 1945kii in uu heshiis nabadeed dhexdhexaadsho, madaxda Maraykanku way isk indho daaheen. Maxaa yeelay, Maraykanku waxay taabeen xeeshii ay waligoodba rabeen in Jabaanka ay kaga guulaystaan. Culimada saynisku waxay sannado door ah ogaayeen haddii Atomka lagu dhambaalo hirdan (bombardment) ka yimaada Atom kale, in tamarta ka dhalataa ay u dhigmayso malyuun goor quwadda Baaruudaha qarxa. 1939kii ayaa saddex culimada Fisikiska ka mid ahi Albert aayneystayn, Szelnd iyo Enrko Fermi u soo baxsadeen dalka Maraykanka. Madaxweynaha Maraykankana waxay u sheegeen Khatarta ka dhalan karta haddii Naasigu ay Bamkaasoo kale ay sameeyaan. Nimankaasi waxa loo sameeyey meel ay ku raacdeeyaan arrintaasi. Muddo gaaban ayaa Fermi uu ku sameeyey (Self Sustaining Nuclea Reactor) oo heerka labaad ee lagu tabi karo abuurka Bomka Atomiga. Nimankii guul khakhso ah ayey ka gaareen samayntii Bomka Atomigga waxaana loo raray dugsi ku yiil magaalada Las Alamos oo ah gobolka Niyuu Meksiko, halkaas ayaana tijaabadii ugu horraysay lagu sameeye bishii Julay 6dii 1945kii. Maalintaasi ayaana waa cusubi u dhashay taariikhda aadamiga.

Turuman, Madaxweynaha Maraykanku, waxa uu tallaabadaasi u aqoonsaday, xeeshii uu kaga sabata bixi lahaa la dagaallanka Jabaanka. Bishii Agoosto 6dii 1945kii ayaa Bambar B29 oo lagu naanaysay Enola geey oo uu waday gaashaanle sare Bool Tibetis dul fadhiyey magaalada Hirooshima iyada oo ay tahay 8dii iyo rubuc subaxnimo ayaa Tibetis uu albaabada u furay Bamkii dayuuraddiisu sidday oo miisaankiisa lagu qaddaray 10,000 oo rodol. Saddex iyo Afartan ilbidhiqsi ka dibna Atomik bamkii ugu horreeyey ayaa dad aadamiya ku qarxay.

Dadkii ka doogtay qaraxaasi Atomik Bamka sheekooyin kala geddisan ayey ka tabiyeen waaya-araggaasi murugada leh. Hortii wax sanqadh ah oo la maqlay maysan jirin, laydh wax indho tiraya ayuun bay dadku arkeen. Dayuuraddii markii ay ridday bamkii adduunku waxa uu isu rogay dab sida kubbadda oo kale ah kulaylkiisu yahay 100 Malyuun oo digrii oo dagaankii magaalada ku fiday. Qaraxii Bamku waxa uu Hirooshiima u rogay moofo ay dadyowgii kumanaanka ahaa ku gubteen. Dadkii aan markaasi dhimaninna muddo yar ka bacdi ayey si darxumo leh ugu dhinteen suntii iyo dabkii ka dhashay Atomik bamka.

Dabkaasi arliga gubay waxa ka dambeeyey dabayl jaraysa saacaddiiba 500 oo mayl. Dhirtii ayey xididdada u saartay, guryihii dhisnaana dhulkay la sintay, waxaanay di'isay roob galaasyo jabjab ah oo dadkii jarjaray. Tiirarkii dhulkay hoos u galeen, xataa dooggii ayaa isu rogay finiin ka dusaya dadka jidhkiisa. Baddii iyana way kacday Mawjad lexaad leh ayaana dadkii badda u baqo cararay dajiyey. Duulaannadii dayuuradaha hore ugu qaadeen dalka Jabaan waxa ku dhintay dad ka tiro badan intii Hirooshiima ku dhitay. Hase ahaatee, dhimashadeedii mid gooniyay ahayd. Dhowr toddobaad ka dib dadkii waxa naafeeyey xanuun yaab leh. Diirka ayaa is midab rogay dabeedna timaha ayaa ka daatay dabeedna way dhinteen. Ilaa maantadan dadkii an maalintaas dhalan ayaa u dhinta suntii maalintaasi Atomik Bamka ka dhalatay. Maxaa yeelay, wax la yidhaahdo Raadiyo Aktif ayaa ku dhaca meelo kumanyaal mayl u jira meeshii Bamku ku dhacay dabadeeedna ciidda ayaa nuugta, carrada iyo dhirtuna ku dhafmaa. Xoolaha markaas degaankaas daaqaa suntaas bay ku tebshaan hilibkooda iyo caanahooda. Qofkii markasi cunaa waxa uu qaadayaa Kansar. Sidaa awgeed Atomik Bamkii Hirooshiima lagu riday iyo kii labaad ee Nagasaaka lagu riday saddex cisho dabadeed, waxa uu dibindaabyo iyo darxumo weli ku hayaa dadweyne xasilooni, nabad iyo caanaba ku noolaan lahaa.

Dagaalkii wuu istaagay. Bishii Sebtembar 2dii 1945kii baana wafdi ciidanka Jabaan ka socdaa isu dhiibay sareeye gaas Makaartar, hase ahaatee waxa isweydiin leh Maraykanku Atomik Bamka uu Hirooshiima ku riday in uu ahaa sifaha keliya ee nabad lagu dhalin karayey iyo in kale.




**DAGAALKII BADWEYNTA BAASIFIGA IYO JASIIRADAHA MIDHWAY KU DHEXMARAY JABAAN IYO ISBAHAYSIGA 1942–45**

## QASKA NABADDA ADDUUNKA
## URURKA UMMADAHA MIDOOBAY

Dagaalkii labaad ee adduunku waxa uu ahaa mid ka daray kii koowaad. Waxa dagaalka ku dhintay toban malyuun oo Askar ah. Waxaa ugu dhimasha badnaa dalalka Jarmalka oo 3.4 malyuun ka baxeen, Ruushka oo (3) saddex malyuun ka dhinteen iyo Jabaaniiska oo malyuun iyo badh ka dhinteen. Faransiiska waxa iyana dagaalka kaga dhintay 167,000, Ingiriiskana 400,000 Maraykankana 325,000. Khasaaraha ku yimi dhismaha iyo moodkaba aad ayuu u lixaad weynaa. Xuddunta Yurub iyo Jabaan labaduba waxay isu rogeen dhul baaba'ay. Khasaaraha dagaalku uu dhaliyey waxa lagu qiimeeyey 120 malyuun oo Gini, marka laa reebo dhibaatooyinkii dalka Shiinaha ka soconayey muddo siddeed sano ah. Intaas waxa dheeraa 12 malyuun oo dadweyne ah oo ku qudh baxay dagaalka. Taas waxa inta badan sababay Bambooyin magaalooyinka lala dhacay iyo cuntada oo yaraatay. Gaar ahaan waxa dhibaato ku timid dadka Yuhuudda oo si habaysan Jarmalku u ciribtiri jiray. Intii u dhexaysay Nofembar 1945kii iyo Oktoobar 1946kii ayaa ay ka soo shaac baxday sifihii loo xasuuqay Yuhuudda ka dib markii Ingiriiska, Farnsiiska, Ruushka iyo Maraykanku maxkamad soo hortaageen madaxdii Naasiga intii nolol lagu qabtay. Xukunkaasi waxa uu ku magac baxay dacwaddii Nuuranbeerg.

Hitlar had iyo jeer waa uu necbaa Yuhuudda. Waqtigii dagaalku socday ciidammadiisu waxay qabsadeen meelayowgii ay Yuhuuddu degganayd. 1942kii Hitlar waxa uu goostay in uu «xalkii ugu dambeeyey» arrinta Yuhuudda ka gaaro. Taas waxa uu uga jeeday ciribtirka dadkaas. Xasuuqa sifahaas leh markii ugu horraysay waxay ka hirgashay dalka Ruushka iyo Boland.

Dhalinta Yuhuudda inta la urursho ayaa lagu qasbi jiray in ay xabaashooda qotaan, dabadeedna waa la toogan jiray, markii dambe hab aanay rasaasi kaga bixin oo nidaamsan ayaa loo ciribtiri jiray dadkaasi Yuhuudda ah. Waxa magaalooyinka Treblinka, Oskwits, Dakhan iyo Belsen laga dhisay warshadaha xasuuqa. Warshadahaasi sida kuwa alaabta warshadeysan oo aad u tiro badan u soo saara, ayaa iyagana dad fara badan nafta lagaga qaadi jiray. Dadka waxa lagu soo guri jiray baabuurta waaweyn ee lo'da lagu qaado, markiibana 2000 ayaa la gelin jiray warshadahaas xasuuqa oo ahaa Gaas Sun ah, saacad badhkeed baanay ku qudh bixin jireen. Carruurta waxa loo oggolaa in ay iska ciyaaraan ilaa waqtigooda la gaaro, dabadeedna waxa lagu sabi jiray in ay maydhaan; markaasaana nolol ugu dambayn jirtay. Dadka dhintay jidhkooda waxa lagaga faa'iideysan jiray dagaalka. Ilkaha dahabka ah waa lagala bixi jiray. Baanka ummadda ee Jarmalka ayaana loo diri jiray. Jiidhkana waa la shiili jiray aakhirka waxa soo hadhana waa la gubi jiray.

Magaalada Oskwits qayb ka mid ah oo shan iyo toban mayl oo wareeg ah ayaa sifahaas loogu laayay lix malyuun oo Yuhuuda. Garsoorayaashii Nurenbeerg laba iyo toban ka mid ah madaxdii Naasiga ayey dil ku xukumeen qaar kale oo badanna xabsi daa'im.

Intii aan Jabaan la jabin wakiillo ka socda konton dawladood ayaa ku kulmay San Faransiisko oo saxiixay Axdigii Ururka Ummadaha Midoobay oo beddelay distoorkii u dhignaa ururkii ummadaha. Axdigu waxa uu dhigayey in nabadda la ilaasho. Iskaashiga ummadahana la dhiirrigeliyo, xuquuqda aadamigana la daryeelo. Ururkii hore waa uu hoobtay, maxaa yeelay dawladaha xoogga leh ayaan

ururka ku jirin, ciidammo milatari ah oo u adeegana ma haysan. Ururka waxa markan galay dawladihii dagaalka ku guulaystay, qodobka 43aad ee axdiga ururkuna waxa uu awood siinayaa in UUM dalalka xubnaha ka ah ka qaato ciidammo wax ka qabta hadba halkii qas ka bilaabmo. Magaalada Niyuu York ayaa xarunta ururka laga dhisay, halkaas ayaana golaha guud ee adduunku ku kulmaa si la isula meel dhigo arrimaha la xiriira dagaalka, cudurka iyo nacaybka.

## GOLAHA GUUD

Sannadkii ayuu mar kulmaa, qarammada xubnaha ka ahna shan qof ayaa ka wakiil noqda, hase ahaatee cod keliya ayey leeyihiin. Golaha doodaha guud iyo falanqaynta amuuraha adduunka ayaa lagu dhammeeyaa. Waxaase ka mudan golaha nabadsugidda oo ka koobma toban iyo shan qaran oo had iyo jeer shira si ay wax uga qabtaan hadba wixii nabadda adduunka halis geliya. Toban kursi qarammada ayaa hadba mid la siiyaa, shanta dal ee Ingiriiska, Faransiiska, Ruushka, Maraykanka iyo Shiinaha iyana waxay golaha ka yihiin xubno joogto ah. Go'aanka la gooyo waa in sagaal dal oo ay shanta joogtada ahi ku jiraan isku raacaan. Shanta dal ee joogtada ahi waxay leeyihiin awood dheeraad ah oo ay ku burin karaan go'aannada soo baxa (Veto Power). Nasiib darro nidaamkaas shanta xubnood awoodda dheeraadka ah siinayaa golaha kartidiisii ayuu soo koobay. Maxaa yeelay kolba Ruushka ama Maraykanka ayaa midba mar golaha go'aannadiisa buriyaa. si taas looga baxo ayaa ka dib golaha guud awood loo siiyey in saddex meelood marka xubnaha ku jira loo qaybsho ay laba meelood codkooda ku burin karaan diidmada xubin ku jirta golaha nabadgelyada. Awoodda ururka ee la xiriirta ilaalinta nabadda waxa had iyo jeer qas ku rida xafiiltanka ka dhexeeya dawladaha Bariga iyo Galbeedka. Hase ahaatee laamaha kale ee ururku malaayiin ka mid ah dadyowga adduunka ayay gargaar faraxti leh u gudbiyaan. ururku waxa uu la wareegay hay'adaha war isgaarsiinta caalamiga ah oo isu duwa war laliyaha, telifoonka iyo Boostada. Waxa kale oo ururku ka dhaxlay ururkii hore ururka shaqaalaha ee caalamiga ah iyo maxkamadda adduunka ee Hayg ku taal. Ururku waxa uu abuuray «Yunisko», oo ah hay'adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka (United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization — UNESCO). Waxa kale oo isna jira Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) oo dalalka soo koraya ka gargaara horumarinta adeegga caafimaadka; iyo ururka cuntada iyo beeraha oo ummadaha soo koraya ka kaalmeeya sidii ay cunto ku filan u heli lahaayeen.

Xoghayaha Guud ee Ururka ayaa Shaqada oo dhan maamula. Tan iyo intii la abuuray shan Xoghaye ayuu ururku yeeshay. Trygve Lee oo ahaa Norwiijiyan, Daag Hamarshold oo Iswidin ahaa, U Tan oo Barmiis ahaa, Kurt Weldhem oo Ostariya ahaa iyo Javier Perez oo Peru ah. Waxa ay ahaayeen niman karti iyo talo aragti hufan leh. Hamarshold waxa uu dhintay ka dib markii diyaaradi la dhacday, isaga oo ujeeda dalka Koongo oo dagaal ka socday. Xoghaynta ururka waxa ka shaqeeya 5000 oo qof. Xubnaha ku jira ururka ayaa soo dira dadka ka shaqeeya ururka. Hase ahaatee dal walba inta qof ee ururka uga shaqayn karaa waxay ku xiran tahay hadba lacagta dalkaasi baxshaa intay le'eg tahay. Maraykanka dadka ka tirsan ayaa ka badan dadka ka socda dalalka Norway ama Iswiserland.

## YURUB OO KALA QAYBSANTAY

Aadamiga tiigaaladiisii ku aaddanayd in nabad lagu waaro ka dib markii dagaalkii koowaad ee adduunku dhammaaday waxa wiiqay taliskii Hitlar. Intii 1945kii ka dambaysana waxa nabadda adduunka halis geliyey xafiiltanka ka dhexeeya dawladaha Hantigoosiga ah iyo kuwa Hantiwadaagga ah xafiiltankaasi waxa uu ku caan yahay dagaalka qabow. Maraykanka iyo Ruushka ulajeeddo keliya ayey ka lahaayeen isbahaysigii dhexmaray markii dagaalkii II ee adduunku socday. Iyada oo Jarmalka la Jabshay, Istalin iyo Roosfelt waxay ku kulmeen shir guud, heshiisyana waa ay wada gaareen. Hase ahaatee, khilaafka labada madaxda ah iyo labada dal ka dhexeeyay aad ayuu u qoto dheeraa. Tan iyo markii laga gudbay sannadkii 1917kii Ruushku waxa uu horumariyey habka hantiwadaagga ah. Habka hantiwadaagga iyo kan hantigoosigu midba waxa uu u arkaa kan kale in uu cadowgiisa dabiiciga ah yahay. Madaxda dalalka reer galbeedku waxa ay markaasi qabeen in Soofiyeet Raashiya ay qalad ku tahay xornimada aadamiga waxaanay hortiiba isku dayeen in ay cududdooda ku af gambiyaan taliskii Bolshafiikiska. Markay taasi u meelmariwayday, sanooyin badan ayey diiddanaayeen in ay aqoonsadaan dawladnimada Ruushka, madaxda dalkaasna cay iyo canbaareyn ayey u jeedin jireen. Dawladaha hantigoosiga ahi waxay ka cabsi qabeen in hantiwadaaggu dalalkooda u soo gudbo dabadeedna taliskooda dhulka la gooyo. Yaalaaba waxay (farta ku fiiqi jireen taliskii argagixiska ee Istalin oo ay sal uga dhigi jireen cambaareynta hantiwadaagga). Si kastaba ha u taag yaraato eh Soofiyeet Raashiya in kasta oo ay khasaarooyin lixaad lihi ka gaareen dagaalkii misana waxay ka soo baxday iyada oo intii ka xooggan. Ciidanka cas ee lixaadka leh ayaa ku soo qulqulay Yurubta Bari. Markii dagaalkii dhammaaday dalka Ruushka waxa ku kordhay dhul ah 200,000 oo mayl oo laba jibaaran iyo dad dhan 22 malyuun. Soohdinteedu saddex boqol oo mayl ayey xagga galbeedka uga jirsatay halkii ay 1939kii u ekayd. Barashiya, Jukuslafaakiya iyo Boland waxa qasab ku noqotay in ay dhul siiyaan Ruushka, markii shirkii nabadda lagu kulmay. Markii ugu horraysay taariikhdooda ayaa dadka Ruushka ah oo idil dawlad Ruush ahi xukunka u qabatay.

Yurub waxa ay markan u muuqanaysay meel baaba'day oon tamar lahayn. Hangary, Roomaaniya, Bulgaariya, Jogoslofaakiya iyo Boland ciidammada Ruushka ayaa qabsaday markii ay Jarmalka duulaanka ku qaadeen. Jarmalka, Faransiiska iyo Talyaaniga waa la jebshay. Ingiriiskuna naftiisa ayuuba qaadi kari la'aa. Waxa halkaas ka muuqday in labada dal ee xoogga ah Ruushka iyo Maraykanka gacan ku yeelanayaan aayatiinka dalalka reer Yurub. Markii 1948kii la gaaray Hangari, Bulgaariya, Roomaaniya, Boland iyo Jugoslafaakiya waxa ka dhashay dawlado Hantiwadaag ah.

Colaaddii labada dhinac ka dhexeysay waxa sii ololinayey Ruushka oo ahaa dawlad Shuuci ah, maxaa yeelay, axsaab shuuci ah ayaa ka furnayd dalalka hantigoosiga ah oo dawladaha dalalkaasi ka cabsi qabeen. Raashiya ciidammadeeda lixaadka leh oo kaliya dawladaha hantigoosiga ahi kamay cabsi qabin ee se waxa halis ku hayey fiirooyinka Shuuciyadda oo dadka shaqaalaha ah iyo dadweynaha maankooda ifin kara dabadeedna hantigoosatada taliskooda dabarka u jaraya. Dad badan oo reer Galbeed ah waxa ay la ahayd in dadka shuuciga ahi aanay dalalkooda dan ka lahayn eese ay iyaga u daran tahay dhidibka waddaniyadda shuuciyadda. Sida si le'eg ayaa dalalka ku dhaqma Shuuciyaddu cabsi uga qabeen hantigoosiga

oo ay u arkayeen hab aan isku dubbaridnayn oo sida qura ee uu qaska iyo shaqa la'aanta ku baajin karaa ay tahay iyada oo dadweynahu shaqo ku helaan dhismaha hubka. Waxay u qabeen in dawladaha hantigoosiga ahi u baahan yihiin dagaallo yar yar ah oo ay oogaan si nidaamkoodu u waaro. Fiiradaasi waxa raadiyaha ka sharaxay Istaaliin, dadkiisna ku guubaabiyey in la dajiyo mashruuc Ruushku xoog milatari ah ku noqdo, sida awgeed ayaa cabsida labada dhinac kala qabeen keentay in intii aanu dagaalkii labaadba dhammaanin uu dhinac kastaaba dhisto hub iyo ciidan lixaad weyn.

Markii 1947kii la gaaray Ingiriiska iyo Faransiisku waxay kala saxiixdeen heshiis konton sannadood ah. Markii dambe waxa ku biiray dalalka «Binuulegas» oo ka koobma (Beljin, Luksemberg iyo Niderlands). Ka dibna waxa halkaas ka dhashay ururka reerka galbeedka. Bishii Abriil 1949kii ayaa dawladda Maraykanku u soo bandhigtay dawladaha reer Yurub in ay Isbahaystaan waxaana abuurmay ururka NATO kana koobma Maraykanka, Ingiriiska, Faransiiska, Biljin, Luksemberg, Kanada, Denmark, Aysland, Noorway, Talyaaniga iyo Bortuqaal. Labo sano ka dibna Giriigga iyo Turkiga ayaa ku biiray. Dawladda Maraykanku dalka reer Yurub kaalmo milliteri ah oo kaliya may siin ee waxa ay u gudbisay mashruuc la magac baxay «Fikraddii Turuuman oo hub, lacag iyo qalabba dalalka Turkiga iyo Giriiggu ay kaga gaashaanteen weerar kaga yimaada Ruushka. Waxa kale oo Maraykanku reer Yurub u fidshay mashruuc ku caan baxay jaangooyadii Maarshal (Marshal Plan) oo ka gargaaray reer Yurub siday wax uga qaban lahaayeen qaskii dhaqaalaha kaga dhacay, gaajada iyo fakhriga. Qalab iyo cunto lagu qaddaray 13 bilyan oo doollar ayaa Yurub Maraykanku u diray. Mashruucaasi oo loo yaqaan Kabashadii Yurub (European Recovery Programme ERP) waa uu ka hirgalay Yurub gacan sare ayaanu Maraykanku Yurubta galbeed ku yeeshay. Hirgalka Mashruucaasi ayaa Maraykanka ku dhiirrigeliyey in uu dawladaha soo koraya iyagana kaalmo u gudbiyo si uu u meelaysto gacan dadban oo uu ku maamulo ammuuraha dalalkaasi. Ruushku isaguna waxa uu dejiyey mashruuc kaasi u dhigma oo la magac baxay Jaangooyadii Molotov. Hase ahaatee intii 1955kii ka dambaysay ayuu baaqday. Sidaa awgeed ayaa kaalmada dalalka soo koraya loo fidiyaa ilaa hadda u tahay tabaha bari iyo galbeed ku dagaallaman.

## JARMALKA OO KALA QAYBSAMAY

Tartankii Bariga iyo Galbeedku markii uu sii kordhay dalka Jarmalka ayaa noqday goob lagu xoogtamo. Bishii Jenwari 1943kii Jerjil iyo Roosefelt waxa ay isla garteen in aan madaxda Naasiga heshiis lala gaari karin. Jarmalka waxa lagu qasbay inay shuruud li'i isku dhiibaan. Taasi micnaheedu waxa uu noqday in dalka Jaramalku aanu dawlad yeelan, dawladihii isbahaysiguna ay qabsadaan maamulka dalkana ay sugtaan. Afarta dal ee Faransiiska, Ingiriiska, Ruushka iyo Maraykanka ayaa midba qayb ka mid ah in uu maamulo ay noqotay. Nidaamkaasi waxa uu si fiican u hirgali lahaa haddii ay afarta dawladood heshiis lahaan lahaayeen, haddiise qoonsimaad dalalkaasi dhexmaro . . . . Jarmalka waxa hurnayd qayb dalka ku timaadda. Faransiiska, Ingiriiska iyo Maraykanka qoonsimaad adagi ma uu dhexmarin in kasta oo ay siyaabo kala duwan qaybahooda u maamuli jireen. Faransiisku waxa uu raacayey siyaasaddiisa ah in dalka Jarmalku qaybsanaado. Waxa ay dhiirrigelisay dawladda hoose goobaha saar ee dhuxusha laga qodo in ay la wareegto. Ruush iyo

Maraykanka midba maamul gooni ah ayuu sugtay. Dalkii Jarmalku waxa uu u qaybsamay bari oo Shuuci ah iyo galbeed oo hantigoosi ah.

Xaaladda Baarliin ayaa siiba ugu darnayd. Magaalo madaxdii hore ee Jarmalku waxa ay raacday qaybta Ruushku maamulo, hase ahaatee iyada lafteeda ayaa afar qaybood u kala baxaysay. Baarliin lafteeda ayaa noqotay goob loollan siyaasi ah ka oogmay. Istaalin waxa uu ku andacooday in Jarmalku Ruushka u magdhabo khasaarihii uu ugu gaystay dagaalka. Dalalka reer galbeedkuse waxa ay ku dhaqaaqeen dhismihii dhaqaalaha iyo warshadaha Jarmalka qaybaha ay ka haysteen. 1948kii isbahaysigii waxa ay qaybahoodii ka fureen doorashooyin. Ruushka arrintaasi way cadho gelisay, maxaa yeelay, waxa uu Istaalin ku andacooday in madaxdii Naasiga taliska lagu soo celinayo. Shirkii Botisdam ee 1945kii waxa lagu heshiiyey in la koobo wax soo saaridda Jarmalka. Lacagtii Jarmalka ee «Reichsmark» qiimaheedii ayaa dhacay, dawladihii shisheeyuhuna way ka gacmo laabteen. Dalalka reer Galbeedku waxa ay la ahayd in dhaqaalaha Jarmalku aanu dhismi karin haddii aan lacag cusub loo soo saarin. Sida awgeed waxa ay isku dayeen in ay Ruushka dhacsiiyaan arrintaas iyada ah. Hase ahaatee waxa ay dhalisay in Jarmalka aanu ku kala taagnaanin soohdin kaliya ee se laba dhaqaale oo kala duwan uu midba raaco.


Tallaabadaasi ay reer galbeedku qaadeen ayaa Ruushku ka xumaaday. Qaybaha Ingiriiska, Faransiiska iyo Maraykanku, Baarliin ku lahaayeen waxa ay boqol mayl ku guda jireen qaybta Ruushku xukumo. Labada malyuun ee Baarliin ku noolna waxa ku xeernaa ciidammada Ruushka markii la bilaabay isticmaalkii lacagta cusub Ruushku talaabooyin uu isku hortaago arrintaasi ayuu ku dhaqaaqay. 1948kii Bishii Maajo Ruushku waxay dib u cesheen afar tareen, ka dibna waxay mamnuuceen in aanay tareennadu Baarliin ka bixin iyaga oo fasax Ruushka ka hela maahee. Bishii Juunna Ruushku waxa uu xiray Buundo ku taal Webiga Elbe oo ay ku andacoodeen in uu samays u baahan yahay. Markii isbahaysigu Baarliin ku soo rogeen lacagta cusub xaaladdii way dhabaqday. Bishii Juun 23dii, 1948kii waddooyinka, reelweeyadii iyo kanaalladii isku xidhayey Baarliin iyo qaybta Jarmalka galbeed ayaa Ruushku xiray. Xoogga korontada oo Baarliin uga iman jirtay dhinaca Ruushku xukumo ayuu ka jaray. Baarliin waxa caddaatay in la cuna qabateeyey, isbahaysigana la rabo in ay ka guuraan.

## CUNAQABATAYNTII BAARLIINTA GALBEED

Cunaqabatiinka Baarliinta Galbeed lagu soo rogay waxay u muuqanaysay, in Ruushku aanu rabin joogitaanka Maraykanka. Hase ahaatee reer galbeedku waxay u arkayeen arrintaasi mid qalafsan, oo marka Baarliinta Galbeed u gacan gasho Ruushka, Jarmalka Galbeed intiisa kalena ku xigi doono. Madaxdii Maraykanka iyo Ingiriiska waxa ay la noqotay in ay dib ula noqdaan lacagtii cusbayd, hase ahaatee, Sarreeye Guud Kilay oo Maraykan ahi waxa uu ku taliyey in taasi aanay wax isbeddel ah dhalin kareyn waxaana lagu raacay in Baarliin cunto, qalab iwm cirka looga soo dejiyo. Markaasi waxa bilaabmay olole dad 2 malyuun tiro le'eg in cunto, qalab IWM. diyaarado loogu keeno. Garoono diyaaradood oo cusub ayaa isbahaysigu dhiseen, waxaana caddaatay markii Oktoobar la gaaray in diyaaradaha lagu habi karo nolosha dadka reer Baarliin. In kasta oo dhibaatooyin hor lihi ku yimaadeen nimankii duuliyayaasha ahaa markii barafkii jilaalku soo kordhay misana, dadka reer Baarliin cunaqabatinkii la rabay waa ay ka badbaadeen. Bishii May 1949kii ayaa misana Ruushku furay waddooyinkii iyo isgaarsiintii oo idil. Ka dibna isbahaysigii waxa ay isku dareen qaybahoodii oo la magac baxay Jamhuuriyadda Isutagga Jarmalka Galbeed. Qaybtii kalena waxa ay iyana la magac baxday Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Jarmalka Bari. Tan iyo maalintaasi dadka Jarmalku waxa ay u kala taagnaayeen laba dawladood oo laba walxood tilmaan u ah. Tan hore oo ah in

gidaarka dhexmara Baarliin uu tusaale u yahay sifihii ay Jarmalka iyo gumeysatadu Afrika u kala qoqobi jireen iyo tan labaad oo ah inuu gidaarku astaan u yahay qaybaha adduunku ugu kala baxo shuuci iyo hantigoosi.

## YURUB WAQTIGII DAGAALKII QABOOBAA



## BARIGA DHEXE
## KACAANKII DHALLINYARADA TURKIGA 1918 - 38kii

Boqortooyadii Cusmaaniyiintu waxay noqotay, wixii ka dambeeyey qarnigii 18aad, mid xiddigteedu hoos u dhacayso. Dawladaha reer Yurub oo ayagu soo xoogaysanayeyna waxay ku dhaqaaqeen sidii ay arrintaa uga faa'iideysan lahaayeen. Qaarkood waxay ku soo qaadeen dagaal cad oo ujeeddadiisu tahay dhulballaarsi, sida Ruushka, qaar kalena waxay gacanta ku dhigeen dhaqaalihii waddanka. Boqortooyadii Cusmaaniyiintuse waxay dhab ahaan awood beeshay oo burburtay wixii dagaalkii dunida ee koowaad ka dambeeyay, markii dalalkii ay u talin jirtay ee Afrikada Woqooyi iyo dalalka Carabta ee Bariga Dhexe faraheeda laga baxshay, cadawgeedii guduhuna batay.

Dawladaha Gaashaanbuurta ee reer Yurub kuma ay ekaan, intuu dagaalku socday in ay heshiisyo ku kala qaybsadaan dalalkii Turkigu u talin jiray ee waxay kala saxiixdeen oo kale heshiisyo ay isku raacayaan in ay qabsadaan meel allaale meeshii ay is yiraahdaan waxay khatar u tahay nabadgelyadiina. Cadawgaa shisheeyaha waxa uga darnaa midka gudaha.

Boqorradii Cusmaaniyiintu way dareemi waayeen isbeddellada adduunka ka socda oo waxay maamulka ku wadeen hab aad gaboobay oo ku dhisan keli tashi. Waxa markaa dalka ka dhashay dhaqdhaqaaq isku magacaabay Dhaqdhaqaaqa Dhallinyarada Turkiga. Kacaanka Dhallinyarada Turkiga oo uu u horseedayo Enfer Baasha wuxuu ku kallifay boqorkii la oran jiray Cabdul Xamiid in uu is casilo. Kacaankaas oo bilowday Juulay 1908 wuxuu si dhab ah u hirgalay Abriil 12dii 1909kii kolkii ay taliska gacanta ku dhigeen Dhallinyarada Turkigu, ayagoo ka cabsi qabay dhaqdhaqaaq Kacaan kale oo ku lid ahi in uu bilowdo. Suldaan Maxamedkii Shanaad oo Suldaanimada loo caleema saarayna wuxuu la mid noqday sawir meel iska yaal.

Himilooyinkii dawladda cusubse waxay noqdeen kuwa hirgali waayey, waxaana arrintaa u sabab ahaa ayagoo diiday in ay burburiyaan imbaradooriyadda, u oggolaadana aaya tashi iyo madaxbannaani dadyowga taliska Turkiga ku hoos noolaa. Intaa waxa u raacay ayagoo la saftay dagaalkii dunida ee koowaad dawladaha dhexe, halkaana ay ka raacday jab iyo foolxumo.

Suldaanka iyo dawladdaba waxa lagu khasbay in ay saxiixaan heshiis aan dadka Turkiga marna oggolaan karin. Waxyaabaha dadka Turkiga ah ay qaadan kari waayeen waxa ka mid ah heshiiskii Seefris oo ku taal dalka Faransiiska, lagu kala saxiixday. Dawladihii reer Yurub ee dagaalka ku guulaystay, kuma ayan qancin kala qaybsigii dalkii imbaradooriyadda ee waxay ugu dambayntii u soo dhaceen dhulkii dadka Turkiga ahi ay degganaayeen. Heshiiska waxa abaabulay Ingiriiska iyo Faransiiska oo kala qaybsaday waddammada Carbeed oo ku yaal Bariga Dhexe. Waxa intaa wehelisay ayadoo heshiiskaa loogu aqoonsaday dawladda Talyaaniga dhulbadeedyada Dodekaniis, Giriiggana lagu siiyay dhulbadedyo ku yaal badda Ayjiyanka iyo Taraasiyada Bari, looguna oggolaaday in uu maamulo muddo shan sano ah gobolka Ismirna. Marinada waxa laga dhigay dhul milliteri ka caaggan.

Ingiriiska iyo Faransiisku waxay Giriigga ku dhiirrigelinayeen in uu Ismirna xalaalaysto, dhulka Turkiga intiisa kalena qaar ka qabsado. Giriigga oo hore u degganaan jiray dhulka loo yaqaan Aasiyada yar waxay weligoodba ku taamayeen in ay dib u soo nooleeyaan boqortooyadii hore, siyaasaddaas dhalanteedka ahna waxa u horseedayey boqor Kostantiin.

## MUSTAFA KAMAAL IYO DHALASHADII JAMHUURIYADDA

Heshiiskii Seefris (Serve) oo lagu kala boobay dalka Turkiya, dadka reer Turkiga aad bay uga dhiidhiyeen, waxaana dhashay dhaqdhaqaaq uu horseedayo nin waddani ah oo la oran jiray Mustafa Kamaal. Kamaal wuxuu magaciisu caan noqday markuu ciidammadii Talyaaniga ahaa ku jabshay Galliboli. Inkastoo uu u riyaaqay in Turkiga dhallinyarada ahi ay qabsadeen awooddii, haddana wuxuu ku diiddanaa badbaadinta jiraalka Imbaraadooriyadda. Kamaal kama xumayn in dalalka Carbeed farahooda ka baxaan, waxaase marnaba aanu oggolayn dhiibista Taraasiyada bari iyo qodobbada ku saabsan Kostantinoobol iyo Marinada. Kamaal markuu muujiyey in uu ka soo horjeedo siyaasadda dawladdiisa iyo dawladaha shisheeyaha oo dalkiisa u tashanaya, ayaa loo diray Aasiyada yar. Arrintaas waxay fursad u siisay in uu abaabulo dhaqdhaqaaq ka soo horjeeda dawladaha isgaashaanbuuraystay iyo boqorka wax ma taraha ah.

Sebtembar 1919kii, Kamaal wuxuu shir isugu yeeray waddaniyiintii oo dhan, waxaana shirkaas laysku raacay lix qodob oo ay ka mid yihiin aaya-tashi, heshiiskii Seefris guuldarradii ka dambaysay oo la baabi'iyo, nabadda Kostantinoobol oo la sugo iyo heshiiska ku saabsan marinada oo lagu noqdo. Doorashooyinkii Oktoobar 1919kii dalka ka dhacay waxa ku guulaystay Kamaal iyo dadkii raacsanaa kolkuu baarlamanku isu yimid Jannaayo 1920 waxa laysku raacay in wax laga qabto lixdaa qodob ee hore.

Gaashaanbuurtii reer galbeedku waxay qabsadeen Kostantinoobol tallaabadaas oo ay ulajeedaan in ay ku horistaagaan waddaniyiinta. kamaal mudanayaashii waddaniyiinta ahaa ayuu isugu yeeray magaalada Ankara oo ku taal bartamaha Aasiyada yar. Abriil 23dii 1920kii waxay cambaareeyeen boqorka, waxayna dhiseen dawlad ku meel gaar ah oo uu madaxweyne u yahay Kamaal. Ciidammadii boqorka iyo kuwii waddaniyiintu waxay ugu dambaystii isaga horyimaadeen Inounu, waxaana halkaa ku guulaystay waddaniyiintii, Jamhuriyaddiina waxay noqotay dawladda qura oo dalka u talisa.

Dadka Turkiga ahi aad ayey isugu duubnaayeen, isku duubnaantana waxa adkeeyay duullaamadii shisheeyaha, kuwaasoo kala ahaa duullaankii Gaashaanbuurtu ku soo qaadday Kostantinoobol iyo kii Giriiggu ku soo qaaday Ismirna. Kamaal dawlado ka mid ah Gaashaanbuurta ayuu heshiisyo gooni ahaantood ula saxiixday. Heshiisyadaas oo ahaa kuwo lagu daryeelayo danaha dadka Turkiga ah waxa ka mid ahaa kuwii lala saxiixday Talyaaniga, Faransiiska iyo Midowga Soofiyeeti. Ingiriisku iskuma howlin hirgelinta heshiiskii Seerfis, sidaa darteed goobtii dagaalka waxa isugu soo haray Giriig iyo Turkiga. Dagaalkaasu wuxuu bilowday Maarso 1921kii.

Turkigu ma ayan yaqiinsanayn khatarta ka horaysa ee dagaalkii halkii ayay ka wadeen. 1921kii Giriiggii waxay ula ekaatay in guushu ayaga raaci doonto. Kamal wuxuu markaa amar ku bixiyey in ciidammada Turkigu boqol mayl dib u noqdaan oo

gaaraan agagaarka wabi-Sakaraya. Hoggaankii Dagaalka iyo kii siyaasaddaba isaga ayaa gacanta ku dhigay. Dadkii Turkiga ahaanna wuxuu dhammaan ku baraarujiyey in ay dagaal u diyaar noqdaan.

Laba iyo labaatan cisho ayaa Giriigguna weerar waday, Turkiguna gaashaandhigga jilibka u aaseen, goobta dagaalku waxay ahayd meel buuro leh. Carcartii u horreysay waxay guushu raacday Giriigga. Ciidammada Turkiguse waxay yaqiinsanaayeen in ay yeelan doonaan guusha kama dambaysta ah Sebtembar 1921kii ayaa ciidammadii Turkiga ahaa jabsheen kuwii Giriigga Kamaalna noqday abaanduulihii dadka Turkiga oo dhan.


Guushii Sakaraya ka dib ciidammadii Giriiggu waa kala biiqbiiqeen kuwii Turkiguna way sii xoogaysteen Sebtembar 9, 1922kii ayaa ciidammadii Turkiga ahaa galeen Ismirna. Magaalada dadkii Giriigga ahaa oo weligood ku noolaan jiray way ka qaxeen. Markuu arkay inuu dagaalkii ku guuldarraystay boqorkii Giriigga oo la oran jiray Kostantiin wuu is casilay. Nofembar 1922 ayuu Maxamadkii Shanaad isna is casilay, waraystayna magangalyo dhulbadeedka Maalta. Dhulkii Turkiguna waxa lagu dhawaaqay in uu yahay Jamhuuriyad, madaxdna waxa u noqday Mustafa Kamaal.

Kamaal laba wax ayuu kaga duwanaa nimanka taariikhda adduumku ay ku tilmaanto «Keli tashiga» marka hore haba yaraatee ma uu rabin dhulballaarsi. Run ahaantii wuuba ka soo horjeeday. Tan labaad guushii dagaalka uma uu qaadan in shaqadiisii hirgashay oo dhammaatay ee wuxuu u qaatay in guushu tahay Kacaan ka bilowgiisii. Wuxuu aad ula dagaallamay dhaqanka dib-u-socodka ah oo ay ku noolaayeeen dadkiisu. Kamaal wuxuu rabay in dadkiisu hore u maro, qaatana dhaqan cusub. Dhaqanka cusub si uu u hirgaliyo olole ayuu ku qaaday dalka Turkiga oo dhan.

1924kii wuxuu shaqada ka fariisiyay Khaliifkii diinta ka wakiil ahaa. Arrinta niman sheekhyo ah oo isku dayay inay horistaagaan waa la qabqabtay. Laba sannadood dabadeed wuxuu beddelay xuruuftii afka Turkiga ahi uu ku qornaa ee carabiga ahayd oo wuxuu ku beddelay xuruufta laatiinka ah. Amarna wuxuu ku bixiyay in nin kasta oo Baarlamaanka ku jiraa si degdeg ah u barto qorista iyo akhriska xuruufta cusub. Olole ayaa lagu qaaday Turkiga oo idil si afka lagu hirgeliyo. Darbuushka cas ee Turkigu caadada u lahaan jireen waa la mamnuucay. Dumarka shaadirkii wuu ka joojiyay. 1926 wuxuu ku dhawaaqay in dumarka iyo raggu siman yihiin. 1935 waxayba ka qayb galeen baarlamaanka. Magacyadii Giriigga ahaa ee magaalooyinka waa la beddelay sida constantinople oo loo bixiyay Istanbuul. Dadka Turkiga oo dhanna waxa lagu amray in ay la baxaan magac qoys. Mustafa Kamaal wuxuu isu baxshay Ataateerk oo ah aabbihii Turkiga.

Ataateerk 1938kii markuu geeriyooday wuxuu ka tegay Jamhuuriyad cusub iyo dad qarannimadooda aqoonsan.

# BARIGA DHEXE DAGAALKII 1aad EE DUNIDA KA DIB




BARIGA DHEXE DAGAALKII 1aad EE DUNIDA KA DIB

## DHIBAATADA FALASTIIN

Intii 1945kii ka dambaysay dareenka waddaninimadu adduunka badidiisa way ku fiday. Waqooyiga Afrika iyo Bariga dhexe si daran ayay dadyowga deggana gumeystayaasha uga horjeesteen. Aljeeriya ilaa iyo soohdinta Turkiga dadyowga Carabtu waxay wadajir uga hortageen gumeysiga Faransiiska iyo Ingiriiska. Faransiisku waxa uu maamulayey Aljeeriya, Morooko, Tunis, Suuriya iyo Lubnaan. Ingiriisku isna waxa talis gumeysi uu ku lahaa Falastiin iyo Urdun; Ciraaq iyo Masarna gacanta ayey ugu jireen. Dareen qarannimo in uu Carabta ka dhex dhasho, gumaystayaasha, arrin aan dhici karin ayey la ahayd. Waxa ay arkayeen in degaanku kala gooyey oo dano iyo dhaqanba kala qaybshay. In kasta oo ay diinta islaamka ka sinnaayeen, af kaliyana lahaayeen, misana labadaasi may noqon kuwa keliya ee gilgilay dareen Carabnimo. Waxaase ay gun u noqdeen wadajirka Carabta oo ka dhashay nacaybka ay gumeysiga Faransiiska, kan Ingiriiska iyo dhaca Yuhuudda ay u qabeen.

Ururka Carabta oo ka kooban Masar, Ciraaq, Suuriya, Lubnaan, Jordan, Sacuudi Caraabiya iyo Yaman waxa uu markii ugu horraysay unkamay 1945kii. Ingiriisku hortii waa uu jeclaystay samayska ururka, isaga oo ay la ahayd in Carab oo isutagtay uu gacantiisa ku qaban doono. Waxaase in yar ka dib u caddaatay in ururka himiladiisu u jeeddo dabargoynta taliska gumeysiga. Dagaalkii labaad ee adduunku isbeddel ayuu adduunka ku riday taageeraya dareenka qarannimada. Faransiisku 1940kii ayuu jabay. Ingiriisna dagaalka dabadii ayuu kacay awooddiisiina yaraatay. Labada midna lama tartami karayn xoogga Maraykanka iyo Ruushka oo labaduba gumeysiga ka horjeeday. Madaxda siyaasadda ee dalalka Carabtu waxa ay aqoonsadeen tabardarrida gumeysatada, sidaa awgeedna dagaallo ayey ku qaadeen. Faransiisku waxa uu isku dayey in uu dansho gadoodyo kaga oogmay dalka Suuriya, hase ahaatee, ururka Ummadaha Midoobay ayaa ka dalbay in uu dalkaasi ka baxo. Suuriya iyo Lubnaan ayaa Faransiisku ka googoosatay, Ingiriisna Urdun.

## ABUURKII ISRAA'IIL

Halgankii gobannimadoonka ee Aljeeriya ka oogmay waxa uu ahaa dagaal ka dhexeeyay Carabta iyo Faransiiska. Hase ahaatee, Bariga Dhexe dagaalku intaasi wuu ka qoto dheeraa. Saddexdii daloolba laba dalool saliidda adduunku shito ayaa degaanka Bariga Dhexe ku fadhiyaa.

Taasi micnaheedu waxay ahayd in dalalka Warshadaha leh ee reer galbeedku ay fiiro gaar ah u lahaayeen xaaladda Bariga Dhexe. Inkasta oo reer galbeedku ku hadhay abuurka gumaysiyo fidsan, haddana si gaar ah ayey dalalka saliidda soo saara ugu fiiro lahaayeen, maxaa yeelay, dhaqaalahooda iyo jiraalka ilbaxooda ayaa saliidda ku xirnaa. Sidaasi awgeed gumeysatada reer Galbeedku may rabin in Bariga Dhexe uu noqdo degaan nabad iyo xasilooni ka jirto, Carabina saliidda ay gacanta ku hayso.


Dhammaadkii dagaalkii labaad ee adduunka ayaa reer galbeedku Bartamaha deegaanka Carabta ka dhiseen dhaqdhaqaaq la magac baxay «Sahyuuniyadda». Waxaanu ahaa dhaqdhaqaaq ay Yuhuuddu ku rabtay in ay Falastiin hoygooda ka dhigtaan. Yuhuuddu adduunka ayey ku kala filiqsanaayeen. Xukunkii Naasiguna xasuuq iyo cidhibtir ayuu kula kacay. Falastiin qaybtii ka joogtay waxay abuurteen

ururro qarsoodi ah oo u jeeda in Falastiin noqoto dalka hooyo ee Yuhuudda. Carabtu marnaba may oggolayn in dalkoodu dhaxal wareego, hase ahaatee maalinba maalintii ka dambaysa ayay soo kordhaysay. 1900kii nin ka mid ah Yuhuudda ku hawoonaysay abuuridda qaran Yuhuudda ah oo magaciisu ahaa Hersal ayaa waxa uu abuuray Baan loogu tala talay in lacag uu u gudbiyo Yuhuudda rabta in Falastiin ay degaan.

1914kii markii la gaaray 12,00 ayaa sifahaa Falastiin ku tagay. Intii uu dagaalkii koowaad ee adduunku socday Ingiriisku waxa uu Yuhuudda ugu ballan qaaday in Falastiin noqon doonto hoyga Yuhuudda. Ballanqaadkaas oo la magac baxay Ballanqaadkii Balfoor laguna dhawaaqay Nofembar 2dii, 1917 waxa uu ahaa mid uu ku daba meerteeyey dadyowga Carabta oo uu ugu ballanqaaday in madaxbannaani uu siiyo dadyowga Carabta oo in badan Ingiriiska la safnaa. Markii dagaalkii dhammaaday Carabtii iyo Yuhuuddii labaduba Ingiriiska waxay ka dalbeen in uu oofiyo Ballankiisii. Hase ahaatee, waxa caddaatay in aanu labada dhinacba wada raali gelin karayn. 1929kii intii ka dambaysay Carabtii Falastiin degganayd waxa ay ku kaceen Yuhuuddii iyo Ingiriiskaba weerarro iyo dagaallo kulul ayaanay ku qaadeen. Yuhuuddu iyaga oo qaxootiya ayay ku soo qulquleen Falastiin ka dib markii Hitlar taliska Jarmalka la wareegay. Carabtu dabadeed waxay abuureen ciidammo, Yuhuudda iyo Ingiriiska weerarro ku qaada. Buundooyinka, reelweeyada iyo xarumihii Ingiriiska ee Yuhuuddu degganayd ayey baabi'iyeen. Falastiin waxay noqotay goob dagaallo qaraari ka oogmeen. Si kastaba Carabtu ha isu hortaagto abuurka Israa'iil ee Ingiriisku waxa uu rabay Falastiin oo noqota hoyga Yuhuudda. Sifihii arrintaasi u hirgeli lahaydna waddada ayuu u sii xaadhay. Ingiriisku tirada Yuhuudda ee Falastiin imaanaysa waxa uu rabay in ay ku ekaato 2,000 oo qof bishiiba, taasi waxa Ingiriisku uu u yeelayey isaga oo ku andacoonaya in Falastiin ay noqoto dal laba qaran ka koobma. Hase ahaatee, Yuhuudda arrintaasi uma ay ahayn. Tiradii Yuhuuddu in ay korodho ayey u fiigganaayeen. Yuhuuddu waxay abuureen ururro qarsoodi ah oy ka mid ahaayeen halgan, Gang IWM. waxaanay ku kaceen qas, dil iyo weerarro. 1946kii waxay qarxiyeen xaruntii Ingiriiska ee Jurusalaam ku tiil, 1947kii 150 qof ayey qudha ka jareen.

1946kii ayaa guddi ka kooban Maraykan iyo Ingiriis ku talisay in 100,000 oo Yuhuud ah Falastiin la dejo, hase ahaatee aan la qaybinin dalka Falastiin. Hase ahaatee, fikraddaasi Carabta iyo Yuhuudda mid koodna may raaligelin. Ingiriisku dabadeedna Maraykanka ayuu ka dalbay in uu Falastiin u soo diro ciidammo nabadda iyo xasilloonida ilaasha. Markii uu Maraykanku arrintaasi diiday, Ingiriisku aayihii Falastiin waxa uu ku wareejiyey Ummadaha Midoobay. Bishii Nofembar 1947kii Golaha Guud ee U.U.M. waxa uu guddoonsaday in Falastiin la kala qaybsho. Ingiriisku markaas ayuu ku dhawaaqay in uu xilkii Falastiin faraha kala bixi doono bisha May 1948. Maalintii ciidammada Ingiriisku Falastiin ka baxeen. Yuhuuddu waxay ku dhawaaqday in Falastiin ay tahay Qaran Israa'iil ah oo madax bannaan. Arrintaasi Carabtu aad ayey uga gilgisheen weerar ayaanay ku soo qaadeen. Ciidammadii Carabta oo aad uga fara badan kuwa Yuhuudda nasiib darro waa la jabshay.

Israa'iil qaybtii UUM ugu tala galay in ka badan ayey gacanta ku dhigtay. Dagaalkaasi Carabta niyo jab iyo murugo ayuu ku reebay 600,000 oo reer Falastiin ah ayaa ka qaxay dalkoodii hooyo ee ay kumanaal sannadood dheeftiisa ku noolaayeen. Xeryaha ay Yuhuuddu dadkii reer Falastiin u ooday ayaa tusaale u noqday nacaybka Yuhuuddu u qabto jiraalka Ummadda Carabta. Dawlad wal oo Carab ahina waxay dadweynaheeda uga ballan qaaday in maalin, maalmaha ka mid ah ay Yuhuudda jebin doonto, dadka reer Falastiinna dalkooda hooyo degi doonaan. Dadka reer Falastiin waxa ay abuureen jabhado xornimo doon ah. Jabhaddaasi waxay ka dhisan yihiin, xarumona ku leeyihiin dalalka Carabta. Magaca guud ee ay wadaagaanna waxa uu yahay ururka xoraynta Falastiin UXF waxaana u madaxa ah Yaasir Carafaat. Shirkii guud ee Golaha UUM 1974kii ayaa lagu aqoonsaday dhibaatada Falastiin in ay tahay mid adduunweynaha xil ka saaran yahay. Shirkaas isaga ahna Yaasir Carafaat ayaa loo aqoonsaday in UXF uu madax u yahay, murtidii uu goobtasi ka akhriyeyna waxa uu ku caddeeyey in nabad ka dhalata Bariga Dhexe ay ku xiran tahay dadka reer Falastiin oo aayahooda laga tasho. taasna lagu dhammeeyo Qaran Falastiin ah oo Bariga Dhexe ka dhasha. Jabhadaha xoraynta Falastiin adduunka waxay tuseen sifaha qof uu naftiisa ugu huri karo dalkiisa uu jecel yahay, iyo qaska nabadda adduunka lagu ridi karo marka ummad jirta xaqeeda la iska indho saabo.



DAGAALKII JUUN EE CARABTA IYO YUHUDDA

## YURUB TAN IYO 1919kii
## DALKA JARMALKA

Nofembar 1918kii Jarmalka dagaalkii koowaad ee dunida waa looga adkaaday. Arrintaasi waxay dhalisay in ay yaraato awooddii siyaasiga ahayd ee milliteriga. Dadkii ayagoo niyad xun ayuu ku kacay dawladdaa u keentay Jarmal guuldarrada. Gadoodyo ayaa ka dhacay Baarliin iyo Munikh, magaalooyinka Jarmalka oo dhanna waxa laga dhisay Soofiyeeti. Kayserki wuu is casilay, waxaana lagu dhawaaqay jamhuuriyad. Waxa la moodayey in dalka Jarmalka uu ka dhalan doono Kacaan Hantiwadaag ah, mase ayan noqon. Sababihii uu dalka Jarmalka uga hirgeli waayey Kacaan hantiwadaag ahi way badnaayeen, waxaase ugu weynaa xisbiga hantiwadaagga ah oo ku kala qaybsamay dagaal geliddii. Xoogga hantiwadaagga ee dalka Jarmalkuna wuxuu u kala qaybsamay Xisbiga Dimoqraadiga ee Hantiwadaagga oo ay hoggaaminayaan Faraydirik Ebert iyo Filib Shildman oo ayagu doonayey isbeddel aan Kacaan lahayn iyo Xisbiga Golaha Shaqaalaha iyo askarta oo doonayey Kacaan oo ay hoggaaminayan Karl Liib Nekht iyo Rosa-Lugsambeerg. Waxa ayana jiray laba Xisbi oo kale oo taageera Golaha Shaqaalaha iyo Askarta oo lagu magacaabo Xisbiga dadka Hantiwadaagga ah oo madax bannaan iyo Ururka Isbaartanis. Waxa la dhisay dawlad uu hoggaaminayo Ebert. Markii Filib Shiidmaan uu kaga dhawaaqay guriga baarlamaanka in ay dhalatay Jamhuuriyad Jarmal ah, ayaa Liibnekht isna kaga dhawaaqay guriga boqortooyada in ay dhalatay Jamhuuriyad Jarmal ah oo Soofiyeeti ah.

Ebert oo dawladdiisu ayan shacbiga kalsooni ka haysan, heshiis qarsoodi ah ayuu la gaaray milliteriga dibusocodka ahaa si lagu baabi'iyo Xisbiga Golaha Shaqaalaha iyo Askarta iyo Ururka Isbaartanis oo ayaga taageersanaa. Karl Liibnekht iyo Rosa Logsemberg waa la xiray dabadeedna la toogtay, dadkii Xisbiga taageersanaana in 1000 qof ka badan ayaa waddooyinka si sharci darro ah loogu laayey. Sidaa ayaa looga hortagay dhismihii Jamhuuriyadda Jarmalka ee hantiwadaagga, waddadana loogu xaaray dhalashadii Xisbiga Naasiga.

Jannaayo 1919 ayaa la doortay baarlamaan isugu yimid magaala yar oo la yiraahdo Weymaar. Cabsi awgeed Ebert wuxuu noqday madaxweynihii u horreeyay ee Jamhuuriyadda Weymaar, Shiildmaan wuxuu noqday hoggaamiyihii dawladda.

In kastoo ay dhisantay Jamhuuriyad dastuur lehi, haddana nidaamka bulshadu ku dhisnayd waxba lagama beddelin oo taliska waxa iska haystay qolooyinkii hore, kuwaasoo ahaa warshadlayda, dhulgoosatada iyo milliteriga.

Dawladdii Weymaar waxay Juun 1919kii saxiixday heshiiskii Feersaylis. Jarmalka badankiisa waxay la ahayd in heshiiskaasu aad u adag yahay oo aanu ahayn mid xaq ah. Guurtidii lagu magacaabay Shirkii Baariis, oo loo xilsaaray in ay soo qiyaasan dhibaatooyinka ciidammada Jarmalku u gaysteen waddammada ay ku duuleen siiba Beljinka iyo Faransiiska waxay go'aan ku gaareen in dawladda Jarmalku waddammadaas magdhow u siiso 6,600 Malyuun oo Gini. Labadii sano ee u horreysay dawladdu way bixisay magdhowgii la rabay. Lacagtii Jarmalka oo intii dagaalku socdayba qiimaheedu hoos u dhacayey ayaa waxa ku dhacay qiima jab, taasina waxay ciriiri gelisay bixintii magdhowga. Faransa, markii la siin waayay magdhowgeedii waxay qabsatay gobolka Rur oo hodan ku ahaa xagga macdanta.

Dawladdu waxay daabacday lacag fara badan, arrintaasina lacagtii waxay kala qiima dhigtay xaashi. Shaqaalaha Jarmalku markuu mushaharada doonanayo wuxuu u baahan jiray sanduuq uu ku soo qaato. Waxyaabaha oo idil waxay waddada u xaareen soobixitaankii Hitlar iyo Xisbiga waddaniga ah ee hantiwadaagga ee Shaqaalaha Jarmalka oo dabadeed magaciisa loo gaabiyay Naasi.

Busaaraddii 1929kii ka bilowday Maraykan ayaa aad u saameeyay dhaqaalaha iyo siyaasadda waddanka. Markii busaaraddaa darteed Jarmalka laga joojiyay amaahdii ay ka heli jirtay Maraykan, alaabtii ay dibedda u dhoofin jirtayna hoos u dhacday, ayaa dhaqaalihii dalka Jarmalka, oon hortiiba caga wanaagsan ku taag-nayn afgambi u dhacay. Shaqa la'aanta oo 1929kii ahayd 1.3 Malyuun waxay gaartay 1933kii lix milyon taasoo u dhigmaysay saddex-laab tirada Shaqaalaha Qaangaarka labka ah ee aan shaqo haysan.

Hitlar wuxuu Xisbiga Naasiga ah ku biiray 1919kii siyaasadda xisbigu ma ayan caddayn oo waxay ku dhisnayd waddannimo iyo hantiwadaag oraahda aan dhafsi-isnayn. Tirada dadka taageersanaa aad bay u yarayd. Hitler afkumaalnimadiisa, dharka u gaarka ah, calanka Swastikada leh iyo isticmaalka xoogga ayaa taagee-rayaal badan u soo jiiday. Waxa xisbiga soo saaray Roor, Hess, Gooring oo kurtood hore uga tirsanaan jiray ciidammada iyo Istreshar oo bare ahaa, Hitlarna ka sii necbaa Yuhuudda.

Hitlar wuxuu damcay in uu ka faa'iideysto dib u dhicii dhaqaalaha ee 1923 oo uu taliska Bafariya la wareego iyo kan Berliinba. Waase la xiray waxaana lagu xukumay shan sano oo xarig ah, sagaal bilood ka dib ayaase laga soo daayey xabsigii. Intuu xabsiga ku jiray wuxuu qoray buug, ka hadlaya noloshiisa iyo mabaadi'ida siyaasiga ah oo lagu magacaabo Miin Kamf.

Xisbiga Naasiga inkastoo aad la isugu dubbariday uuna ku soo biiray Josef Gobalis oo ah warfidiye aad ugu wanaagsan borobagandada, haddana xagga siyaas-adda kuma uusan guulaysan, wixii ka horreeyey busaaraddii. 1931kii ayaa dawladdu si ay uga hortagto dibudhaca dhaqaalaha waxay yaraysay maaliyaddii ku bixi jirtay hawlaha bulshada. Inkastoo baarlamaanku diiday siyaasaddaas madaxweynuhu uu waday, arrintaasina waxay fursad u siisay Naasigii in ay borobaganda ku kiciyaan dawladda ayagoo xagga dhaqaalahana hoo iyo hiilba ka haystaan warshadlayda waaweyn. Doorashadii Sebtembar 1930kii waxa codkooda siiyay lix malyan oo qof waxayna qayb u heleen 197 kursi. Abriil 1932 Hitlar wuxuu isu taagay doorashadii madaxweynaha asagoo la tartamaya Fon Hindenbeerg oo Madaxtooyada dalka hore u hayey. Madaxweynihii doorashadii wuu ku guulaystay, halka uu ka helay 19 malyanse Hitlar wuxuu helay 13. Doorasha cusub ayaa baarlamaanku galay Julay 1932 Naasiguna waxay heleen 230 kursi, waxayna noqdeen xisbigii ugu kuraas badnaa baarlamaanka. Hitlar waxa loogu yeeray in uu ka qayb galo dawladda, wuxuuse u diiday hanweynaan, Nofembar, markii dawladdii dhismi wayday ayaa waxa la sameeyay doorasho cusub. Naasigiise waxay hoos u dhaceen 2 Malyuun oo cod kuraastoodiina waxay noqotay 196. Jannaayo 1933 waxa dawlad wada dhisay Xisbiga waddaniyiinta oo uu hoggaaminayo fombobem iyo Naasiga. Hitlar wuxuu noqday hoggaamiyihii dawladda fom beben ku xigeenkiisa.

Hitlar waxa u muuqatay in uu taliska oo dhan gacanta ku dhigo, sidaa darteed wuxuu ka dhaadhiciyey Hindenbeerg in doorasho cusub lagu dhawaaqo. Naasigu waxay gacanta ku hayeen raadiyaha, warsideyaasha iyo lacagtii dawladda, waxayna ku dhaqaaqeen olole ay ku sameysanayaan Borobaganda. Doorashadii oo toddobaad ka haray ayaa waxa la gubay aqalkii baarlamaanka. Gubiddaas waxa danbigeeda lahaa rag ka tirsan xisbiga Naasiga, ujeeddadeeeduna waxay ahayd in lagu eedeeyo dad shuuci ah si loo jideeyo baabi'iska Xisbiga Shuuciga oo ahaa xisbiga labaad ee waddanka, loona laayo dadka ka soo horjeeda xisbiga Naasiga. Waxa la sameeyey sharci baabi'inaya dhowridda xuriyadda qofka oo ahayd qodob ka tirsan dastuurka Jamhuuriyadda Weymar.

Inkastoo ayan waxba kala reeban, haddana doorashadii waxay ku heleen 43% cod. Xisbigii shuuciga ahaase, oo siyaasadda waddanka kaga jirey kaalinta labaad waa la baabi'iyay, Naasigiina ayagoo ay gargaarayaan waddaniyiintii iyo xisbiga dhexe ee Katooligga Rooma, ayaa waxa u suuragashay in ay gudbiyaan sharci lagu magacaabay Sharciga awood siinta. Sharcigaasi wuxuu Hitlar siinayey muddo afar sano ah awood kalitashi. Halkaa ayaa dimoqraadiyad ku sheegtii ku dhimatay.

## TALISKA HITLER 1933 - 1945

Hitlar markuu awood buuxda u yeeshay maamulka dalka ayuu wuxuu falkeeda galay siduu gacanta uga dhigi lahaa maamulka dalka Jarmalka dhinac kastaba ha ahaadee. Tallaabooyinkii u horreeyay oo lagu taabbagalinayey siyaasaddiisa waxay noqdeen baabi'inta axsaabtii kale, iyo ururradii shaqaalaha. Waxa intaa la raacshay in la xirxiro madaxdii ururrada shaqaalaha, shaqaalahiina lagu sanduleeyo in uu ku biiro Ururka Jarmalka ee Shaqaalaha. Waa la diiday in shaqada laga istaago mus-haarooyinkuna waxay noqdeen kuwa dawladdu soo goyso. Waa la baabi'iyay daw-laddii iyo baarlamaankii. Xisbigii Naasigu wuxuu noqday mid awood buuxda leh meel kastana gaarsiisan. Waxa la dhisay Booliis lagu magacaabo Gestaabo oo si sharci darro ah ku fulinaya siyaasadda dawladda, wixii ka soo horjeedana baab-i'inaya. Gestaabada iyo ciidanka Nabadsugidda oo hore u ahaan jiray ilaaliyayaasha Hitlar, waxa u talin jiray Hitlar, waxana ku xigeenkiisu ahaa Heydrikh oo masuul ka ahaa xerooyinka cadaadiska. Xerooyin waxa la sameeyey silig koronto ahi uu ku wareegsan yahay oo si naxariis la'aan ah loogu ciqaabi jiray, laguna laayey markii hore kumanyaal Jarmal ah, dabadeedna malaayiin Yuhuud ah.

Siyaasadda Xisbiga Naasiga ahi waxay ku dhisnayd in dadka Jarmalka ahi ka dhaladsan yihiin qolooyinka kale, sidaa darteed takoor ayaa lagula dhaqmay dadka Jarmalka ee dhalashadoodii hore Yuhuudda ahayd, oo markaa badankoodu iskaga cararay dalalka, Nofembar 1938 ayaa nin Yuhuudi ah oo qaxooti ah Baariis ku dilay sarkaal ka tirsan Safaaradda Jarmalka. Beeshii Yuhuudda ee dalka Jarmalka degga-nayd waxa lagu xukumay in ay bixiyaan 80 malyuun oo Gini, dalka dhammaantiina waxa laga qabanqaabiyay bannaanbaxyo lid ku ah Yuhuudda. Baabi'inta dadka Yuhuudda meel kastaba ha joogaan waxay ka mid noqotay ujeeddooyinka waaweyn ee dawladda Naasiga ah.

Agoosto 1934kii Hindarbeerj wuu dhintay, Hitlarna hoggaaminta dawladda wuxuu ku darsaday madaxtinnimadii dalka, wuxuu noqdayna Taliyaha Ciidammada Qalabka Sida. Dhaqaalihii waddanku kor buu u soo kacay, ayadoo ay saameysay dhammaadkii busaaraddu iyo wax qabashada dawladduba. Horukaca dhaqaalaha waxa kordhiyay oo waxtar u noqday hawla guud oo fara badan oo la qabtay, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen dhismo guryo, waddooyin, dhul beerid iyo hub sameyn.

Hawlahaasi waxay aad u yareeyeen shaqa la'aantii, dawladduna waxay taageero ka heshay dadka oo aan tirinayn waxyeelooyinka kale oo ay u geysanaysay. Ulajeed-dada uu ka lahaa siyaasaddiisa dibedda waxay ahayd dhulballarsiga uu doonaayay in uu hirgeliyo oo uu qabsado Yurubta Koonfur-Bari.

Markuu Hitler taliska qabsanayay waxa socday fadhi looga hadlayay hub dhimid oo uu qabanqaabiyay Ururka Ummadaha oo lagu hayay Jeniifa. Jarmalku wuxuu waraystay in uu samaysto hub u dhigma kan Faransiiska. Markii Faransiisku arrintaa horistaagayna Jarmalkii way ka baxeen fadhigii iyo Ururka Ummadahaba.

1935kii waxa doorasho lagu qabtay gobolka Saar oo lagu dooransiinayo dadka deggan Faransa iyo dalka Jarmalka. Dadkii 99% ayaa doortay in ay raacaan Jar-malka, arrintaana waxay noqotay mid uu Hitlar aad ugu faano, kalsoonidii uu dadka ka haystana kordhisay.

Ingiriiska iyo Faransiiska ayaa 1935kii kordhiyay maaliyaddii ku baxaysay hubka, asagoo taa tixraacaya ayaa Jarmalkuna wuxuu ku dhawaaqay in uu dhisayo ciidan xoog leh.

Dagaalkii sokeeye ee Isbayn ayaa isu soo dhaweeyay xiriirka ka dhexeeya Hitlar iyo Musaliini, sidaana waxa ugu wacnaa gargaarkii ay labadooduba u fidiyeen Faranko. Oktoobar 1936kii heshiis isbahaysi ah ayaa dhexmaray labadaa dal waxa ku xigay Jarmalka oo Jabaan la saxiixday heshiis gaashaanbuuraysi oo ka soo horjeeda dadweynaha hantiwadaagga. Isla sannadkaa Jarmalku wuxuu qabsaday dhulka Rayn oo tan iyo markii ay ka baxeen ciidammadii dawladaha isbahaysiga ahaa dhul militeriga ka caaggan laga dhigay.

Hitlar,oo ku dhashay Ostariya wuxuu weligiiba laabta ku hayay in labada dal isku darsamaan. Markiise uu hoggaamiyihii dawladda Ostariya 1938 ku dhawaaqay doorasho lagu kala dooransiinayo dadka reer Ostariya in ay iskood u madaxbannaanaadan ama ay ku biiraan dalka Jarmalka, ayna caddaatay in ay dadku diidi doonaan Jarmalka, ayaa Hitlar ciidammadiisii xuduudda soo fariisiyey. Shushnig wuxuu doortay in uu doorashadii dib uga noqdo, lana dhiso dawlad ka tirsan xisbiga Naasiga ee dalka Ostariya. March 12dii ayaa ciidammada Jarmalku soo galeen dhulka Osteriya oo ay sidaa uga mid noqotay isutagga Jarmalka.

Hitlar wuxuu dadka Islaafiga ah oo dhaladkoodu Jarmal yahay kase tirsan dawladda Jogoslafaakiya ku kiciyay dawladdooda. Hitlar wuxuu waraystay in dhulka Sudeetigu deggan yihiin lagu soo daro dalka Jarmalka asagoo intaa raacinaya in uu diyaar u yahay dagaal. Ingiriiska iyo Faransiiska oon diyaar ayagu u ahayn dagaal way oggolaadeen. Fadhigii Miyuunikh ayaana lagu saxiixay heshiis loogu oggolaaday Jarmalka in uu 1 Oktoobar qabsado dhulka Sudeetiga. Hitlar ujeeddadiisu waxay ahayd dagaal iyo dhulballaarsi, sidaa darteedna intii hore kuma uusan qancin ee Maarso 1939 ayuu wuxuu qabsaday Jogoslafaakiya dhammaanteed. Sebtembar 1, 1939kiina wuxuu weerar ku qaaday Boland, waxana bilowday dagaalkii dunida ee labaad.

Markii dagaalkii dunida ee labaad dhammaaday oo Jarmal iyo dawladihii la jiray laga adkaaday dhulka Jarmalka waxa loo qaybiyey afar qaybood oy ka kala talinayeen dawladihii dagaalka ku guulaystay kuwaasoo kala ah, Ingiriiska, Faransiiska, Maraykanka iyo Midowga Soofiyeeti.

Dawladaha reer galbeedku waxay 1947kii bilaabeen in ay xagga dhaqaalaha ka mideeyaan qaybahoodii. 1948kii waxay Jarmalka Galbeed ka dhiseen dawladda Isutagga Jarmalka. 1dii Oktoobar 1949 ayaa Midowga Soofiyeetina wuxuu ku dhawaaqay in dhinacii uu ka talin jiray ay ka dhalatay dawlad madaxbannaan oo lagu magacaabo Jamhuuriyadda Jarmalka ee Dimoqraadiga. Sidaas ayaana waxa dalka Jarmalka uga dhashay laba dawladood.

Dawladda Isutagga Jarmalku waxay qaadatay habka hantigoosadka, waxayna ku xiran tahay xagga dhaqaalaha iyo gaashaandhigga wadammada reer Galbeedka.

Jamhuuriyadda Jarmalka ee Demoqraadigu waxay doortay habka hantiwadaagga waxayna ku xirantay wadammada hantiwadaagga.

## FARANSIISKA

Dad tiradoodu ku dhowdahay laba malyuun oo askar iyo shacbiba leh ayaa Faransiiska kaga dhintay dagaalkii Dunida ee Koowaad, dhulkeeda waqooyi waa la baabi'iyay dawladdana waxa ku ururay dayn fara badan. Doorashadii 1919kii muxaafidiinta ayaa waxay heleen aqlabiyad xoog leh, dadkuna waxay codkooda qolooyinkaa u siiyeen si ay u helaan nabad, xasillooni iyo in la xoojiyo xoogga ciidammada Faransiiska. Kelemansuu oo ku amar ku taaglayn jiray wuu gaboobay wuuna ka fariistay siyaasadda. Tobankii sano ee ku xigeyna waxa gacanta ku hayay Bonkaafe iyo Biriyand. Muddo laba sano ah, 1924-26 ayaa waxa hoggaanka haysay dawlad dhinaca midig ah, aad bayse u kala qaybsanayd, sidaa awgeedna maamulkeedu karti wuu yeelan waayay. Waxa marka taliska qabtay Bonkaafe 1926 isagoo hoggaaminaya dawlad ka kooban dhowr xisbi. Dawladda waxa la siiyay awood ay wax kaga qabato dhibaatooyinka xagga dhaqaalaha ka haystay waddanka. Bonkafe iyo Biriyand oo wasiirka arrimaha dibedda ahaa, aadna u filweynaa waxay shaqada ka fariisteen 1929. Saddexdii sano ee ay hoggaaminayeen dawladda waddanku wuxuu ku dhaqmayey nabadgelyo iyo barwaaqo. Waxa la waayay rag kartidoodii leh oo ayaga beddela.

Dhaqaalaha Faransiisku wuxuu ahaa mid dheellitiran sidaa darteed ayaa muddo dhan ayan saameyn busaaradii 1929. Shaqa la'aantuse waxay 1933 gaarsiisnayd in dhaafsan hal malyuun. Baarlamaanka oo ay ka tirsanaayeen Axsaab fara badani wuu ku heshiin waayay siyaasaddii lagu maamuli lahaa dalka. Waxa dhismay dawlado isdabajoog ah oo ku guulaysan waayay in ay hirgeliyaan siyaasaddooda. Faransa siyaasaddeedii oo dhan waxa ku dhacay walaac. Febraayo 1934kii xisbiga fashiistiga ayaa isku dayey in uu sameeyo afgembi, taasoo dhalisay in waddooyinka Baariis laysku laayo, inkastoo afgembigii la baabi'iyay misana qolooyinkii fashiistiga ahaa way xoogaysteen. Shuuciyiintii ayaa si ay uga hortagaan fashiistiga waxay wax la qabteen xisbiga Hantiwadaagga ah. Doorashadii 1936kii ahayd markay ku guulaysteen waxay dhiseen dawlad wadajir ah oo uu hoggaaminayo Buluun. Dawladdaasi sannad kaliya ayay socotay oo dhibaatooyinka dhaqaalaha iyo isku duubnaansho la'aanta ayaa ku riday cimri deg deg. Tan iyo 1940kii dawlado taagdaran ayaa isku beddelaayay hoggaanka taliska waddanka.

Taagdarrida Faransa haysatay muddadii u dhexaysay labada dagaal waxay lahayd sababo badan. Dhaqaalaheedu oon horumarsanayn, taasoo ay ugu wacnaayeen wax soo saaridda oo yarayd iyo beeraha oo waxtarkoodu yaraa. Siyaasaddu ma ayan xasilloonayn, ma uusan jirin nin dadka ka soo dhexbaxa oo qabta hoggaanka waddanka, baarlamaankana rag ka kala tirsan axsaab fara badan oo waxtarkooda aad loo dhaliilo ayaa ku jiray.

Wixii isbeddello la damco in la sameeyo waxa is hortaagi jiray mudanayaasha barlamaanka ku jira oo dibusocod u badnaa. Inkastoo fashiistadu dagaal ku haysay, xagga dhaqaalaha; siyaasaddana ay ka haysteen dhibaatooyin badani, Jamhuuriyaddii Seddexaad waxay soo gaartay 1940kii markii Jarmalku qabsaday.

## FISHY

Dhulka Faransiisku wuxuu u kala qaybsamay dhul madaxbannaan oo ay magaala madax u tahay Fishy. Dawladda Fishi waxa hoggaaminayay Biitayn oo aan lahayn karti weyn.

Dawladdiisu waxay u kala qaybsanayd qola doonaysa in ay dhexdhexaad noqoto iyo qolo doonaysa in ay Jarmalka wax la qabsato. Nofembar 1942, markii Maraykanku weeraray Afrikada Koonfureed ayaa Jarmalku waxay qabsadeen Faransadii Fishy oo waqtigaa wixii ka dambeeyay dawladdeedu noqotay mid Jarmalku siduu doono u maamusho.

Faransiiskii ka soo horjeeday Jarmalku waxay isugu soo hoos ururayeen Jeneral Digool oo dawladda Ingiriisku u aqoonsatay in uu wakiil ka yahay dadka Faransiiska. Markii Afrikada waqooyi laga saaray Jarmalkii 1943, Diigol wuxuu dhisay Guddiga Faransiiska ee Xoraynta waddanka. Wuxuu aad ugu xirnaa ururka Faransiiska oo kula halgamayey Jarmalka faransa gudaheda oo la oran jiray Makii. Dagaalkii markuu dhammaaday, Diigol, si farxad leh ayay ku soo dhoweeyeen dadka Faransiisku.

Digol wuxuu isku hawlay meeshii laga kacaba in uu ka dhiso maamul hagaagsan, arrintaasina waxay ugu hirgashay si dhaqso ah oo waxtar leh Diigol, oo intaan dawladdu isdhiibin u cararay Igland, Sebtembar wuxuu dhisay dawlad madaxbannaan. Digol inkastoo aan laga qayb gelin shirarkii Yalta iyo Botsdam, wuxuu waraystay in Faransa ay la simanto dawladaha kale ee waaweyn, waxaana qayb laga siiyay maamulka dalka Jarmalka.

## JAMHUURIYADDA AFRAAD

Dadka Faransiisku way diideen dastuurkii hore, waxayna galeen doorashooyin cusub. Doorashadii baarlamaanka waxay saddexdii xisbi ee ugu waaweynaa kala heleen midkiiba 150, axsaabtaasuna waxay kala ahaayeen.

Xisbiga Shuuciga, kan Hantiwadaagga iyo midka Katooligga. Digool wuxuu dhisay dawlad ay ku bahoobeen axsaabta dhinaca midigta raacsan. Jannaayo 1946dii ayuuse xilkii iska wareejiyay. Go'aankaa waxa ku kallifay asagoo siyaasiyiintii la shaqaysan kari waayey iyo asagoo baarlamaanku ku diiday in uu kordhiyo awoodda madaxweynaha. Dastuurka Jamhuuriyadda Afraad wax quman kama duwanayn kii hore oo awoodda madaxtooyadu way yarayd tan baarlamaankuna way badnayd dawladduna waxay ka dhisnayd axsaab isbahaysatay, taasoo yaraynaysay waxtarkooda kuna ridaysay cimri degdeg. Muddadii u dhexeysay iscasiliddii Digool iyo dhiciddii Jamhuuriyaddii Afraad waxa hoggaanka dowladda qabtay 14 ra'iisal wasaare. Axsaabtaas faraha badnayd oo siyasadahoodu aanay isku dhan u wada socon waxay yaraynayeen karti iyo go'aan gaaridda dawladda oo mararka qaarkood curyaansanayd.

Inkastoo ay xagga siyaasadda aad u taagdarrayd Jamhuuriyaddii afraad, xagga dhaqaalaha waxay gaartay horumar aan yarayn, waxaase israacshay dagaalkii Aljeeriya. May 1958kii ayaa Milliteriga Faransiiska ee joogay Aljeeriya iyo reer Yurubkii ku noolaa dalka ayaa ka fallaagoobay dawladda oo ku tala jirtay in ay wada hadallo la yeelato gobannimadoonka reer Aljeeriya.

Markay dawladdii ku guulaysan wayday in ay wax ka qabato fallaagowgaas ayaa madaxweynihii Koty wuxuu hoggaanka dawladda u dhiibay Digool. Dastuur cusub ayaa Digool isku soo dubbariday, markii cod loo qaadayna dadka badankiisu waa oggolaaday. Disembar 1958 ayaa wuxuu noqday madaxweynihii Jamhuuriyaddii shanaad.

## JAMHUURIYADDII SHANAAD

Dastuurka cusub ee Faransiiska waxa lagu doortay maamul dawladeed oo ku tiirsan madaxtooyada, sida kan Maraykanka. Madaxweynaha waxa dooranaya dadka. Waxa jira laba gole oo kala sarreeya, sharci an labadoodu isla soo wada oggolaanna ma gudbi karo. Wasiirka hoggaaminaya dawladdana waxa doorta Madaxweynaha. Waxa awoodda madaxweynaha intaa u wehelisay asagoo baarlamaanka kala diri kara.

Jeneral Digool mar labaad ayaa la doortay 1965kii dawladdiisuna waxay ahayd mid aad u xasilloon oo ku taagan xididdo adag. Digool wuxuu ahaa nin geesi ah oo dabci adag, oo go'aanadiisa karti uu ku fuliyo leh waana siyaasad loogu soo celinayo Faransa kaalintii ay kaga jiri jirtay siyaasadda Yurubta.

Inkasta oo ay Faransiiska Aljeeriya deggani ku rajaweynaayeen in ay Faransa sii haysato dalkaa Digool wuxuu gartay in Faransa dhibaato mooyee aanay jirin wax kale oo ka soo gaaraya dagaalka ay kula jirto gobannimadoonka reer Aljeeriya —1962kii ayaana loo aqoonsaday Aljeeriya gobannimadeedii. Muddadii u dhexeysay 1959 — 1960kii Faransa waxay garatay in aan dani ugu jirin wadidda gumeysiga, waxaaana gobannimadoodii qaatay wadammadii ay ka gumeysan jirtay Afrikada Galbeed.

Wuxuu Digool ku guulaystay siyaasaddii dibedda oo ujeeddadeedu ahayd in Faransa lagala mid dhigo dawladaha waaweyn ee ayan noqon dawlad Maraykanka dabadhilif u ah. Wuxuu aqoonsaday Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha, ayada iyo dawladda Midowga Soofiyeetina wuxuu la saxiixday heshiisyo wax wada qabsi dhaqaale ah. Wuxuu 1966 waraystay Ciidammada NATO in ay ka baxaan dalka Faransa,, wuxuuna dedejiyay horumarinta Hubka Nukliyeerka ah ee Faransiiska.

Faransa waxay ka mid ahayd dawladihii aasaasay Sayladda Dhaqaalaha ee Yurub. 1963 Digool wuxuu Fiito saaray soo gelitaanka Igland.

## IGLAND

Igland waxa dagaalkii dunida ee koowaad ka soo gaaray dhibaatooyin fara badan, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen ayadoo goobihii dagaalka ay kaga dhinteen 750,000 qof 1,500,000na ay ku gaareen dhaawacyo waxyeelleeyay kartidoodii. Maraakiibteeda ganacsatada ah oo laga dejiyay 40% iyo awooddeedii imberyaaliga ahayd oo is dhintay, kolkii wadammadii ay u talin jirtay qaarkood ay cod ku yeesheen maamulka siyaasaddooda, sida Hindiya (1917). Ingiriisku markuu arkay in ay wadammadaasi farahiisa ka baxayaan ayuu wuxuu aasaasay urur barwaaqa sooran ah si uu weli u dhuuxo khayraadkooda. Hishiiska lagu aasaasay ururkaas oo wadammadaas loogu aqoonsaday madaxbannaanidooda waxa lagu saxiixay Balfoor. Inkastoo Kanada iyo Hindiya ay qaadeen tallaabooyin ay kaga duwayeen siyaasaddooda tan Ingiriiska, haddana madaxbannaanidaasi waxay iska ahayd hadal iyo maaweelo.

Dagaalka hortii dhaqaalaha Ingiriisku wuu soo korayay, wuxuuna siiba ku dhisnaa ganacsi ay marrkiibtiisa faraha badani adduunka isaga tallaabayeen wadammada badan ee uu gumeysto ayuu intuu alaabtooda ceyriin sicir jaban kaga soo iibsado ayuu ayagoo warshadeysan adduunka u iib geyn jiray. Inkastoo nolosha dadku kor u soo kacaysay, horukaca warshadaha Ingiriisku ma uusan gaareyn kan Jarmalka, iyo Maraykanka, taasna waxa ugu wacnayd warshadahooda oo ahaa kuwo ku shaqeynaya makiinado gaboobay oo waxtarkoodu yaryahay. Ingiriiska dhaqaalihiisu markuu dagaalkii dhammaaday tan iyo 1920 wuxuu sameeyay horukac weyn oo la mooday mid waari doona. Liloydh oo hoggaaminayay dawlad wadajir uga dhisan xisbiyada Muxaafidka iyo Liberaaliga wuxuu isku dayay in uu ku guulaysto siduu waddanka ugu soo celin lahaa nabad iyo barwaaqo. sidii uu horeba ugu guulaystay dagaalkii. Taasise way u suuroobi wayday, waxaana ugu wacnaa dhowr arrimood kuwaasoo ay ka mid ahaayeen dhibaatooyinka ka haystay xagga dhaqaalaha, halganka gobannimadoonka Ayrishka iyo siyaasaddiisa dibedda oo aan loo bogin. Wadammadii ay gumeysan jirtay oo ay alaabta ceyriin ka soo qaadan jirtay oo samaystay warshado. Kuwii ay u iib geyn jirtay, sida Midowga Soofiyeeti oo ayana sameystay warshado, wadammo cusub oo dhoofiya alaabta warshadeysan oo soo baxay, sida Jabaan ayaa khasaaro u gaystay dhaqaalaha Igland oo wixii waqtigaa ka dambeeyay bilowday in ay liicdo, awooddeedii iyo kaalintii ay adduunka kaga jirtayna ay dib u soo yaraato. Gobannimadoonka Ayrishku markay mudda dheer u soo halgamayeen waxay ku kallifeen dawladda Ingiriiska in ay u aqoonsato isxukun. 1922, waxa xukunka Ingiriiska ku hoos haray Ulistar oo weli dadka deggan ay u hoggaamiyaan madaxbannaanidooda.

Xagga siyaasadda dibedda waxa Liloydh Joorj dawladdiisa waxyeelleeyay weerarkii ay ku qaadday Midowga Soofiyeeti. Liloydh waxa la dhacay xisbigii Liberaaliga oo ay halkaa ugu dambeysay in uu door weyn ka cayaaro siyaasadda dalka Ingiriiska waxana soo xoogeystay xisbiga Muxaafidka iyo kan shaqaalaha.

**XASILOONI LA'AAN SIYAASADEED**

Muddadii u dhexeysay 1922 iyo 1924kii waxa hoggaanka siyaasadda iska beddelay dhowr dawladood, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen dawladdii Bonar Law, tii Baaldwin oo labaduba ka tirsanaa xisbiga Muxaafidka iyo tii Ramsi Magdoonal oo ay wadajir u dhiseen xisbiyada shaqaalaha iyo Liberaaliga. Waxaase gacan weyn ku lahaa siyaasadda Ingiriiska muddadii u dhexaysay labada dagaal Nifayl Jaambarlayn iyo Ramsi Magdoonal.

Muddadii u dhexeysay 1924-1929 waxa taliska hayay xisbiga Muxaafidka. Sanooyinkaas noloshu kor ayay u soo kacaysay. Waxyaabo badan ayaa ka qabsoomay horumarinta nolosha dadweynaha. Mushahaarooyinku kor bay u kaceen; hawlgabka dadka gaboobay wuu laba jibbaarmay, dumarka saygu ka dhintay iyo agoontaba waxa loo aqoonsaday hawlgabka; wixii ka dambeeyay 1928 waxa la bilaabay in dadka shaqada la' la kaalmeeyo in muddo ah.

Inkastoo la moodo in siyaasadda gudaha iyo tan dibeddaba guul laga gaaray haddana shaqa la'aantu marnaba 1 malyan kama hoos marin. Tacabka la dhoofiyaana wuu yaraanaayay, kan la keenaana wuu badnaanayay. Inkastoo ay dhismayeen warshado cusub sida tan baabuurta, kuwii dhaqaalaha waddanku ku tiirsanaa,

sida warshadaha cudbiga, birta, dhuxusha iwm; hoos bay u liicayeen. Warshadahaa oo ahaa kuwo la sameeyay waqti hore waxa aad u waxyeelleeyay warshadaha shisheeyaha.

Dhibaatooyinka warshadaha haystay culayskoodu wuxuu saarnaa shaqaalaha oo warshadlayda hantigoosatada ahi marna ma ayan oggolayn in faa'iidadoodu is dhinto. Waxa ayagu arrintaa u adkaysan waayay shaqaalaha warshadaha dhuxusha oo gaarsiisnaa 1 malyan. Abriil 1926kii ayaa shaqaalaha warshadaha dhuxushu joojiyeen shaqadii, tallaabadan waxa ku garab istaagay ururrada kale iyo ururka lagu magacaabay isutagga shaqaalaha. May 3diina waxa shaqada joojiyay 2 malyuun oo shaqaale ah kana kala tirsan gaadiidka, madbacadaha, warshadaha culculus, dhismaha gaaska iyo dabka.

Dawladdii Muxaafidka ahayd aad bay ula dagaallantay shaqo joojinta oo socotay sagaal maalmood, waxayna garab istaagtay warshadlayda. Dawladdu waxay samaysay sharci lagu mamnuucayo shaqo joojin caam ah, dadka dawladda u shaqeeyana waa loo diiday in ay ku biiraan ururrada ka mid ah isutagga ururrada shaqaalaha; waxa kaloo la dhimay deeqdii ay xoogsatadu siin jirtay xisbiga shaqaalaha.

Tallaabooyinkaas baana suurtogeliyay in ururrada shaqaaluhu ay sii xoogaystaan doorashadii May 1929kiina ku guulaysto xisbiga shaqaalaha oo helay 288 kursi.

## DAWLADDII XISBIGA SHAQAALAHA

Juun 1929kii ayaa Magdonald wuxuu dhisay dawlad aan lahayn awood sidaa u weyn. Inkastoo ay sidaa ahaydse dawladdu intaan busaaraddu ridin, waxay samaysay laba sharci oo midna lagu yareeyay saacadaha shaqaalaha dhuxusha, iyo mid ku saabsan dhismaha guryaha oo loogu tala galay in lagu baabi'iyo dergedaha iyo carshaanta. Busaaraddii 1929kii waxay ka bilaabatay qarammada midoobay ee Maraykanka bishii Oktoobar. Waxay markaa yaraysay tacabkii Ingiriisku uu dhoofin jiray. Labadii sano ee busaaradda u horreysay tacabkii la dhoofin jiray wuu tarmay, sidaa darteed shaqa la'aantii aad bay u kordhay. July 1930kiina waxay gaartay 3/4 malyan, taasoo ahayd 1/5 ka dadka xoogsatada ah. Warshadihii gaboobay oo dhan way fariisteen, degmooyin idil ayaana dadkii shaqa la'aan ku dhacday. Dadkii ayagu shaqada haystay noloshoodii kor bay u kacday, waxaana ay la ahayd in sicirkii hoos u dhacay, waxay lumisay kalsooni lagu qabay Isteerliinka. Dhibaatooyinka Igland ka haystay xagga dhaqaalaha dadkii shisheeyaha ee ku kaydsan jiray lacagta bankiyada Ingiriiska waxay bilaabeen in ay qaataan.

## DAWLADDII QARANKA

Dhibaatooyinkaa sidii looga hortegi lahaa waa laysku khilaafay, intii doorasho cusub la samayn lahaa, taas oo dib u dhigi lahayd daawaynta arrimaha. Waxa la dhisay dawlad lagu magacaabay dawladdii qaranka oo ay u wada dhammaayeen saddexda xisbi oo waaweyn iyo Liberaaligu.

Dawladdu waxay qaadday tallaabooyin tira badan oo ay kaga hortegaysay busaaradda kuwaasoo ay ka mid ahaayeen ayadoo la saaray cashuur dheeraad ah alaabta ka imanaya wadammada ka baxsan barwaaqa sooranka, taasoo suuro gelisay warshadaha iyo beerahaba in ay horumaraan ayna yaraato shaqa la'aantii.

Inkastoo Muxaafidku u badnaa dawladda tan iyo 1933kii misana waxa hoggaamiyay Magdoonal ilaa iyo markuu shaqada ka fariistay.

Nofembar 1937 waxa la sameeyay doorasho cusub oo ay ku guulaysatay dawladda qaranku. Magdonald waxa ku xigay Baaldwin oo dawladdaa hoggaaminayay tan iyo 1937kii.

Markuu shaqada ka fariistay waxa madax u noqday dawladda Nifayl Jambarlayn, oo ku caan baxay siyaasaddiisii mabda'a nabad jacaylka ahayd, taasoo siisay Ingiriiska waqti uu isugu diyaarsho dagaalkii dunida ee labaad oo qarxaday Sebtembar 1939kii.

Dawladda Ingiriiska oo uu madax u noqday Jeerjil 1940kii intuu wali dagaalku socday ayay waxay bilowday in ay sii tabaabushaysato dhismaha waddanka.

## IGLAND WIXII DAGAALKII LABAAD KA DAMBEEYAY

Igland doorashooyinkii ka dhacay 1945kii waxa ku guulaystay oo dawladnimadii qabtay xisbiga shaqaalaha oo waxyaabo badan ka beddelay nolosha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda dalka.

Isbeddelkaas waxa ugu qiima weynaa dawladda oo la wareegtay, ayadoo bixinaysa magdhow, warshadaha dhuxusha, oo sidaan soo aragnay shaqaale fara badani ka shaqaynaayay dhibatooyinna ka taagnaayeen. Waxay kaloo dawladdu la wareegtay xilkii warshadaha xadiidka, sulubka, tareennada, gaadiidka waddooyinka iyo ganacsiga qaarkiis. Igland oo hore u qabtay hab caymis oo haddii loo eego wadammada kale ee Yurub ahaa hab aad loogu dhibaataysan yahay, ayaa lagu soo rogay sharciyo loogu gargaarayo si loo daryeelo danaha dadweynahya. Waxaannu u oggolaanayay dadka oo idil gargar takhtareed oo aan ku xirnayn abaalgud.

Isbeddelladaasu waxay kaloo saameeyeen waxbarashada oo sharcigii lagu maamulayey wax laga beddelay si looga dhigo Demoqraadi. Waqtigii waxbarashadii khasabka ahaydna waa la dheereeyay.

Inkastoo dadyowga hantigoosadka ahi ay ka qayliyeen isbeddelladas misana ma ayna ahayn kuwo wax u dhimay habka hantigoosadka ee waddanku ku dhaqmaayay. Waxaana taa noo muujinaysa, ayadoo waxa keliya ee dawladdii xisbiga muxaafidka ee 1951 qabatay hoggaanka waddanka ay ka beddeshay siyaasaddii uu hirgaliyay xisbiga shaqaaluhu tahay dib uga noqoshadii la wareeggi warshadaha Sulubka.

## SIYAASADDII GUMEYSIGA EE INGIRIISKA

Ingiriiska oo dawladaha wax gumeysta ugu weynaa adduunka badankiisana gumeysatay, siyaasaddiisu waxay ahayd mid ku dhisan keli danaysi iyo dhiigmiirad. Dhibaatooyinka maanta adduunka ka taagan badankoodu waa kuwa Ingiriisku ka abuuray wadammada uu gumeysan jiray.

Ingiriisku dad Yuhuud ah ayuu inta meel walba isaga keenay dejiyay Falastiin. Dadkii Carabta ahaa oo dhulka lahaa inta uu taliskii ka boobay ayuu Yuhuudda gacanta u geliyay.

Sidaas oo kale ayuu dadka reer Rodeesiya dalkoodii gacanta u geliyay dad Ingiriis ah oo ku dhaqma siyaasadda midabtakoorka. Ingiriisku wuxuu had iyo jeer ku andacoodaa in ay qolooyinkaasi taliska boobeen, hase yeeshee taasu ma aha mid qof wax garad ahi rumaysan karo.

Dhibaatooyinka ka dhextaagan Bakistaan iyo Hindiya, kuwa dhexyaal wadammada geeska Afrika ku yaal waa kuwa laga dhaxlay gumeysiga Ingiriiska, oo ujeeddadiisu ahayd in uu dadyowga reer Aasiya iyo Afrika mindiyo isugu dhiibo si uusan waligiisba uga dhex bixin. Ingiriiska oo dhaqaalihiisu aad ugu xiran yahay wadammada uu gumeysto, aad ayuu isugu hawlay sidii uu ku badbaadin lahaa gumeysigiisa. Kolkii ay wadammada reer Afrika, Aasiya iyo Ameerika ay dagaal kala soo horjeesteen, wuxuu dhisay Ururka barwaaqo sooranka ee Ingiriiska. Wadammada ku jira Ururkaa waxa lagu tilmaami jiray in ay yihiin kuwa madaxbannaan oo ku wada hoos nool boqortooyada Ingiirka. Dadka wadammadaa ku noolna waxay ahaayeen raciyadda Ingiriiska. Ururkaas waxa nolol dheeri loogu baadi goobayay gumeysiga Ingiriiska.

Dadka reer Aasiya, Afrika iyo Ameerika oo lagu maaweelinayay in ay yihiin dad xor ahi waxay la kulmeen quursi iyo midabtakoor. Dadka madowga ah ama Hindida guryaha in laga kireeyo waa loo diidaa shaqooyinkana waxa loo oggol yahay, kuwa ugu liita ee qofka Ingiriiska ahi ka faano.

Wixii ka dambeeyay 1960kii wadammadaas badankoodu wey ka baxeen gacanta Ingiriiska. Dhaqaalaha iyo awoodda siyaasiga ah ee dalka Ingiriiskuna waxay bilaabeen in ay hoos u dhacaan.

## LIICIDDII AWOODDA INGIRIISKA

Wixii dagaalkii ka horreeyay Ingiriisku wuxuu u taliyay dalal fara badan oo ka tirsan qaaradaha Afrika, Aasiya iyo Ameerika oo uu khayradkooda siduu doono ugu camal falayay. Intuu dagaalku socday gaashaanbuurtii si ay uga helaan gacan waxay ka ballan qaadeen dadka ay gumeystaan gobannimo. Markuu dagaalkii dhammaaday Imbraadooriyaddii Ingiriisku way kala burburtay oo dadyowga gobannimadoonka ee reer Afrika iyo Aasiya waxay kala soo horjeesteen dagaallo ay kaga dhacsadeen gobannimadoodii.

Dhaqaalaha waddanka Ingiriiska oo ku tiirsana dalalka la gumeysto wuu ka kabsan waayay arrintaa, waxaana bilowday liicitaankii awoodda Imbaradooriyadda Ingiriiska. Dhibaatooyinkaa ka haystay xagga dhaqaalahu waxay ku kallifeen dawladda Ingiriiska in ay dhinto saldhigyadii milateriga ee ay ku lahayd adduunka iyo in ay xagga hub samaysashada iyo siyaasaddaba ay ku xiranto dawladda Maraykanka.

## IGLAND IYO SAYLADDA DHAQAALAHA YURUB

Markii Sayladda Dhaqaalaha ee Yurub la asaasayay 1957kii Igland, waxay la ahayd in ay wadammada reer Yurub iskaashigooda ka maarmi karto oo waxa u muuqday wadammada faraha badan oo ay weli gumeysiga ku haysatay ama kula dhaqmaysay siyaasadda gumeysiga cusub. Markii ayse dantu ka hor timid ayey bilowday in ay qaaddo tallaabooyin ay ugu dhowaanayso wadammada Sayladda Yurubta.

Arjigii u horreeyay ee ay Igland ku weydiisanaysay in ay ka mid noqoto Sayladda waxay qortay 1961, waxaase horistaagay Digool. 1967, markii uu taliska qabtay xisbiga shaqaalaha, ayay haddana waxay geysatay Arji cusub waxaase mar labaad horistaagay Faransiiska.

Dawladda Shaqaaluhu aad bay isugu hawshay siday ugu dhawaan lahayd wadammada Sayladda, markii la gooyey waqtigii la bilaabi lahaa wada hadallada ayaase dawladdii dhacday. Dawladdii Muxaafidka ee taliska dalka qabatay waxay halkii ka sii wadday wada hadalladii 22kii Jannaayo 1972kii ayaa markaa la kala saxiixday heshiis ay Igland kaga mid noqoto Sayladda.

**DALKA TALYAANIGA**

Habka barlamaanka ku dhisan ee ay ku dhaqmaysay dawladda Talyaanigu, tan iyo markay dhalatay 1870kii wuxuu ahaa mid aan xididdo dhaadheer ku taagnayn. Dawladihii Liberaaliga aha ee dalka ka dhismay wixii ka dambeeyay dagaalkii koowaad ma ayan lahayn karti ay wax kaga qabtaan dhibaatooyinka waddanka soo food saaray, sidaana waxa ugu wacnaa ayadoo aan xisbigaasu baarlamaanka ku lahayn aqlabiyad weyn. Baarlamaanka waxa ku jiray axsaab fara badan oo aan isku siyaasad ahayn Talyaanigana dagaalkii wuxuu dalka u soo jiiday dhibaatooyin fara badan, dhulballaarsigii uu ku raja weynaana kuma uusan guulaysan.

Dalka Talyaaniga gudihiisana waxa ka dhacay shaqa ka fariisad, sharci dhowr la'aan iyo qas. Xisbiga hantiwadaagga oo xoog lahaana wuu yeelan waayay karti uu ku dhaliyo kacaan. Sidaas darteed waxa arrimahaa ka faa'iidaystay Mussaliini iyo fashiistadii.

Xisbiga Fashiistada waxa la aasaasay 1919kii mana ayan caddayn ujeeddooyinkiisu. Siyaasadda xisbigu waxay isku tilmaamaysay in ay tahay mid lid ku ah hantigoosadka, kaniisadda, boqortooyada, talyaaninimadana aad u qaddarinaysa oo doonaysa in ay magac weyn u yeesho waddanka Talyaaniga. Fashiistadu waxyaabahaa waxay doonayeen in ay ku gaaraan xoog iyo dagaal, sidaas darteed dadka ku jira xisbiga wuxuu Musaliini ka dhigay kuwa leh qaab militeri oo sita shaar madow.

Xisbiga Fashiistadu 1920kii wuxuu ahaa xisbi xoog leh waxana taageerayay warshadleyda dhulgoosatada, dabaqadda dhexe iyo dhallinyarada ka caraysan dawladda. Fashiistadu waxay dagaal kula jirtay shaqaalaha iyo dadka hantiwdaagga ah. Doorashadii 1921kii waxay heleen 35 kursi, xisbigana waxa ku biiray dad badan. Axsaabtii kale way kari waayeen in ay isgarabdsadaan si ay uga hortagaan fashiistada. Oktoobar 1922kii Musaliini wuxuu isku duway dad tira badan lehna Jeneraallo oo ayagoo gaardinaya isku shubay Rooma. Boqorkii intuu ka baqday xooggaa ayuu wuxuu u dhiibay madaxtinnimadii dawladda Musaliini.

Musaliini wuxuu dhisay dawlad ka kooban dhowr Xisbi. Wuxuu ballan qaaday in uu joojiyo qaska iyo dagaalka fashiistadu ay dadka ku haysay, wuxuu xoojiyay kalsoonidii uu ka haystay warshadlayda iyo dhulgoosatada, wuxuu iska dhigay nin daacad u ah boqortooyada, wuxuuna soo jiitay muxaafidiinta. Siyaasaddiisaas waxay u suuragalisay in uu awoodda oo dhan gacantiisa isugu keeno, taliskana ku xiro xisbiga fashiistada. Wargeysyadu ma ayan qori karin wax la socda siyaasadda dawladda mooyee ururrada shaqaalahana ciriir ayaa la gashay. Waxa la sameeyay Golaha Sare ee Fashiistada oo la taliya Musaliini, oo isku magacaabay Il Duce

(hoggaamiyaha). Sannadkii 1924kii waxa lagu dhawaaqay doorasho lagu maamulayo sharci cusub kaasoo u suurageliyey dawladda in ay dadka raacsani ka helaan kuraasta baarlamanka — saddex daloolkii laba.

Doorashadaasi waxay ku dhacday dil iyo handadaad, markuu Giyakomo Mateeti, oo ahaa mudane ka tirsan xisbiga Hantiwadaagga, dawladda baarlamaanka gudihiisa ka cambareeyayna, waxa dilay dad ka tirsan xisbiga Fashiistiga ah. Musaliini, intii laga filayay in uu arrinta wax ka qabto, wuxuu qaaday tallaabooyin uu ku ciribtirayo dimuqradiyada. Wuxuu baabi'iyay axsaabtii iyo ururradii shaqaalaha aan ahayn Fashiistiga.

Xagga dhaqaalaha waxa 1927kii la sameeyay ururro fashiistiya oo ay ku wada jiraan shaqaalaha iyo kuwa loo shaqeeyaba, kuwaasoo ku wadajira urur ka wada dhexeeya oo lagu magacaabo Isutagga Ururrada waddanka. Wixii ka dambeeyay 1933kii dadka isku shaqada ah waxa lo sameeyay ururro ka dhexeeya oo uu kor ka maamulo wasiirka ururrada shaqooyinka. Ujeeddooyinka ururadaasi waxay ahaayeen in ay dawladdu yeelato awood ay gacanta ugula jirto maamulka shaqaalaha.

Ujeeddada siyaasadda dibedda ee Musaliini waxay ahayd in dalka Talyaaniga magac loo yeelo lagalana mid dhigo wadammada waaweyn, wuxuuna aamminsanaa sida uu ku gaari karo in ay tahay dagaal iyo dhulballaarsi. Siyaasaddaas waxa waafaqsanaa qabsashadii Itoobiya oo loola jeedayna in looga aargoosto dagaalkii Adwa. Musaliini waxa lagu tilmaamaa in uu dalka Talyaaniga u yeelay muuqaal dawlad xoog leh, inkastoo ayan qaabkeed lahayn, dagaalkii dunida ee labaad Musaliini wuxuu la saftay Hitlar oo ay isku mabda'ahaayeen, Musaliini waxay la ahayd in uu ka faa'iideysan karo la saaxiibka Jarmalka, sanooyinkii u dambeeyayse dawladdiisii waxay noqotay mid Jarmalku siduu doono ugu tashado.

## DAGAALKII KA DIB

Dalka Talyaaniga 1943 ayaa loogu jilib dhigay si fool xun. Labadii sano ee u dambaysay ee dalka Talyaanigu dagaallamayay waxa gaaray dhibaatooyin waaweyn. Dagaalku markuu dhammaaday dhaqaalaha dalka Talyaanigu aad buu u baaba'sanaa.

1945kii Di Gasbeeri wuxuu dhisay xisbiga dimuqraadiga ee Kiristaanka oo helay aqlabiyad weyn, taasoo dhalisay xasillooni siyaasadeed, iyo horukac dhaqaale oo socday labaatankii sano oo ka dambaysay dagaalka.

Xagga siyaasadda dibedda dalka Talyaanigu wuxuu ka mid noqday Gaashaanbuurta (NATO) raggii hogaaminayay siyaasadda Talyaaniga waxay isku hawleen iskaashi, wadajir siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo dhexmara wadammada Yurubta Galbeed iyo kordhinta waxtarka ururrada ka dhexeeya. Waddanka Talyaanigu wuxuu ka mid ahaa lixda dal ee ka asaasay magaalada Rooma 1957kii Sayladda Dhaqaalaha ee Yurub.

## YURUBTA DHEXE

Yurubta Dhexe oo u kala qaybsanayd dawladaha Boland, Jekoslafakiya, Romaaniya, Hangeeriya, Ostriya iyo Yugoslaafiya siyaasaddodu may xasilloonayn oo waxa intaa ka dhacayay kacaanno iyo gadoodyo. Wadammadaa dhaqaalahoodu wuxuu wali ku dhisnaa beeraha. Nolosha beeralaydu waxay ahayd mid ciriiri ku jirta

oo awoodda dalalkaasi waxay gacanta ugu jirtay wali dabaq dhulgoosata ah oo xoog leh. Xasillooni la'aanta waxa ugu wacnaa dadweynaha beeralayda oo siyaasadda u baraarugay una firfircoonaa.

## OSTARIYA

Ostariya, markuu dagaalkii dunida ee koowaad dhammaaday waxa imbaradooriyaddii ay u talin jirtay uga soo haray dhulka ay deggan yihiin dadka asalkoodu Jarmalka yahay. Ostariya dadkeedu wuxuu ahaa 6.455.000, oo saddex dalool ku nool yahay magaala madaxda Fiyena. Dhulkaasi ma uusan ahayn mid dadka deggani ay ka soo saari karaan nafaqo ku filan. Dadka reer Ostariya, wixii Naasiga ka horreeyay ma ayan lahayn waddaninimo ee waxay isku tirin jireen dad Jarmal ah, sidaas darteed si ay dhibaatooyinka haysta xagga dhaqaalaha uga baxaan waxay ku tala jireen inay ku biiraan dalka Jarmalka.

Dawladihii Isbahaystay, oo ayagu dagaalkii koowaad ku guulaystay ayaase waxay garteen in ay u fidiyaan kaalmo xoog leh Ostariya si ayan uga mid noqon dalka Jarmalka. Ostariya waxay noqotay Jamhuuriyad madaxbannaan.

Axsaabta ka dhisan dalka waxa ugu weynaa, Fiyeena gudaheeda mooyee oo uu haystay Xisbiga Demoqraadiyada Bulshada.

Labada xisbi oo kale, kuwaasoo kala ahaa xisbiga Kiristanimada bulshada iyo xisbiga hantiwadaagga ayaa iyana dalka xoog weyn ku lahaa. Xisbiga Kirishtanimada bulshada oo dhisnaa tan iyo 1945kii wuxuu si tallaabo tallaabo ah isugu rogay xisbi Fashiisto ah oo ku tirsan baaderiyaasha kana soo horjeeda hantiwadaagga.

Xisbiga Hantiwadaagga ah oo doonayay isbeddel dastuuri ah, waxa la bilaabay in laga faafsho dacaayad xun laguna tilmaamo in uu khatar galinayo demoqraadiyada iyo nabadgelyada waddanka. Wax arrintaa la buunbuuniyaba oo dadka lagu bajiyoba 1900kii ayaa waxa dalka ka kacay, dagaal sokeeye oo lagu laayay dadkii rumaysnaa mabda'a hantiwadaagga. Wixii ka dambeeyay 1930kii waxa soo banbaxay xisbigii Naasiga ahaa.

## HANGEERIYA

Haddaan u dhabbagalno taariikhda wadammada Yurubta dhexe waxaan arkaynaa in muddadii u dhexaysay labadii dagaal uu ka socday halgan la doonayo in lagu dhiso bulsho hantiwadaagga.

Hangeeriya, oo ka mid ahayd dawladihii dagaalkii koowaad ee dunida lagaga adkaaday, way ka samri wayday dhulalkii laga qaaday.

Dawladdii Korolyi waxay isku dayday in ay talis demoqraadi ka dhisto dalka, hase yeeshee uma ayan suuragelin, taasna waxa u sabab ahaa dhibaatooyin haystay dadka beeralayda oo ay wax ka qaban waday. Dadka beeralayda noloshoodu aad bay u hoosaysay, wixii dagaalkii koowaad ka dambeeyayna way ka sii dartay. Hangeeriya waxa jirtay dabaqad dhulgoosata ah oo xoog leh waxayna horistaagtay fulinta sharciga lagu qaybinaayo dhulka. Markii askartii dagaalka ka qayb gashay ku soo noqotay ay dadka u tilmaameen guulaha waaweyn ee uu gaaray shacbiga Midowga Soofiyeeti, waxa ka dhashay dalka kacaan uu horseedayo Bela Kus. Sidiise

weligeed dhici jirtay xoogagga dibusocodka ah ayaa isu kaashaday sidii kacaanka lagu burburin lahaa Dawladdii Soofiyeetka ahayd oo ka dhalatay Juun 24dii, 1924kii dalka Hangeeriya gudaha iyo dibeddaba waa lagaga soo duulay waxaana taliskii qabtay Admayral Hoorti oo hore u ahaan jiray taliyaha ciidammada Habisbeerj, ayna taageerayeen maalqabeenku. Horti, oo ogsoonaa in aan qolooyinkii isgaashaan-buuraystay oo dagaalkii ku guulaystay ayan oggolaanayn in la soo nooleeyo taliskii boqortooyada, wuxuu isku magacaabay «Ku simaha Boqorka». Soo noolaynta boqortooyadu waxay muujinaysay in Hangeeriya u hanqal taagaysay dalka laga qaaday markii dagaalkii looga guulaystay dabadeed. Arrintaasi waxay ku dhalisay wadammada Jekoslafaakiya, Yugoslaafiya iyo Romaaniya in ay samaystaan heshiis isgaashaanbuuraysi, kaasoo loo yaqaan «Isafgarashadii yarayd» ujeeddadiisuna ahayd in aan wax iska beddelin, sidaa awgeed, dawladdii Horti waxba kama ayan beddelin maamulkii beeraha oo ahaa mid dhulgoosatada oo kaliyihi ka faa'iidaysa-nayso. Shaqaalaha reer magaalka ahna waxa lagu hayay cadaadis loomana oggo-layn in ay danahooda ka tashadaan.

Boland marna ma ayan yeelan awood dhaqaale iyo xasillooni siyaasadeed ay ku yeelato militari xoog leh. Dhulkeedu hodan ma aha hase yeeshee xoogsatadeeda oo dhan saddex meelood, markii bulshada loo qaybiyo laba meelood waxay ahaayeen beeralay. Warshadaheeduna way tira yaraayeen aadna way uga liiteen xagga tekno-loojiyada. Shaqaalaha iyo beeralaydu waxay muddo dheer ku noolaayeen cadaadis iyo dhiigmiirad, sidaa darteedna aad bay u aaminsanaayeen mabda'a hantiwadaagga.

Xisbiga Hantiwadaaggu wuxuu haystay kalsooni weyn. Xisbiga Shuuciga oo la dhisay Disembar 1918kii baana ugu firfircoonaa magaalada Warso iyo meelaha dhuxuhsa laga qodo ee Dombaroowa.

Bilsanidiskii oo 1919, noqday madaxweynaha ku meel gaarka ah ee waddanku wuxuu dhisay oo xoogeeyay dawlad Burjuwaasi ah.

Bilsanidiski wuxuu had iyo jeer ka welwel qabay in xoogagga horusocodka ee waddanku, ay la wareegaan taliska dalka, kaalmana ka helaan Midowga Soofiyeeti. Sidaas awgeed ayuu go'aan ku gaaray in uu kala qaybgalo xoogagga dibusocodka ee adduunka dagaalka ay kula jireen Midowga Soofiyeeti, hase yeeshee wax ka raacday guuldarro.

Maarso 1921kii Boland waxay yeelatay dastuur, hase yeeshee marna lama helin xasillooni siyaasadeed. Nofembar 1925kii ayaa waxa dalka ka soo foodsaaray xagga dhaqaalaha dhibaatooyin fara badan.

Waxa la dhisay dawlad ka tirsan axsaab wadajir ah oo ay ugu weynaayeen xisbiga beeraleyda iyo xisbiga hantiwadaagga.

Bilsanidiski oo hore isu casilay markii uu la shaqaysan kari waayay barlam-aanka, aya tan iyo 1922kii wuxuu abaabulayay shirqoollo lagu burburinayo das-tuurka, arrintaasina waxay u suurowday 1926kii. Bilsanidiski wuxuu bilaabay in uu baabi'iyo qolooyinkii ka soo horjeeday, taliskiisuna awoodda oo idil gacanta ku dhigo, kuna xukumo waddanka amar ku taaglayn. Bilsanidiski oo taliska hayay tan iyo 1935kii wuxuu ku tiirsanaa militariga dibusocodka ah iyo dhulgoosatada.

Jekoslafaakiya inkastoo dhibaatooyin badani ka haysteen dadka deggan ee dhalashadoodu kala duwan tahay, haddana xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba way ka xasilloonayd. Horumarka dhaqaale waxa ugu wacnaa taliska oo ay hayeen axsaab siyaasadoodu tahay horusocod. 1920kii ayaase axsaab siyaasaddoodu tahay dimoqraadiyiintu kala qaybsamay, waxaana dhashay xisbiga shuuciga, xisbiga ugu weynse wuxuu ahaa xisbiga beeralayda oo lagu magacaabo xisbiga Jamhuuriga ee Jekoslafaakiya, ummadaha kala duwan oo ku wada nool dalka Jekoslafaakiya waxay ahaayeen toddoba, hase yeeshee waxa ka daran Yugoslaafiya oo dalkeeda ay ku nool yihiin sagaal qolo oo kala dhaqan ah, kala diin ah, kalana af ah.

Boqortooyada cusub ee Yugoslafiya waxa lagu dhawaaqay 4 Disembar 1918kii waqtigaa ka hor waxa ka jiray, Boqortooyada Serbiya, Korootiga iyo Isloofaniya, kuwaasoo ah qolooyinka ugu fara badan dadyowga dalka deggan. Siyaasadda Yugoslaafiya waxa aad u saameeyay tartanka iyo cadowtinimada dhextiil Seerbiya iyo Krootiga. Boqor Aleksandarkii I wuxuu isku dayey in uu arrintaas wax ka qabto, hase yeeshee uma suuragelin.

Yugoslaafiya ma ayan lahayn warshado, waxaana waddanka jiray saboolnimo, aqoon la'aan iyo horukac la'aan — Boqorku, intuu wax ka qaban lahaa dhibaatooyinka, wuxuu waddanka ku xukumi jiray xoog iyo amar qalafsan.

Xisbiga Shuuciga, oo 1920kii noqday xisbiga saddexaad ee waddanka inkastoo muddada u dhisnaa ay yarayd waxa baabi'intiisa isu gaashaanbuuraystay axsaabta kale oo idil.

## YURUBTA BARI WIXII DAGAALKII KA DAMBEEYAY

Yurubta Bari, oo sidaan soo aragnay dadkeedu aad u cadilnaa, waxa jiray axsaab doonaysay in ay dadkooda u horseedaan hormar, isbeddel iyo kacaan, hase yeeshee waxa hortaagnaa, kalana soo horjeeday dagaal dadyowga dibusocodka ah iyo imberyaaliyadda adduunweynaha.

Yurubta Bari waxa ka xoreeyay gumeysigii Naasiga xoogga Midowga Soofiyeeti, markuu dagaalkii dhammaadayna waxa u suuragashay in ay ka dhismaan dawlado iskood u madaxbannaan oo hantiwadaag ah.

Boland waxa laga dhisay dawlad meel ku gaar ah 1945kii. Doorashooyinkii 1946kiina waxa guul weyn ka gaaray oo kuraastii 99% helay xisbiga shaqalaha Bolishka oo Shuuci ahaa iyo xisbiga hantiwadaagga Boolishka oo doorashadii meel ka soo wada jeestay.

Dalka Jekoslafaakiya doorashadii ka dhacday, waxa ku guulaystay ayana xisbiga shuuciga oo ka helay kuraastii saddexdii daloolba hal dalool.

Dalka Yugoslaafiya oo horeba qayb uga qaatay la dagaallankii Naasiga iyo fashiistada waxa hoggaaminayey Xisbiga Shuuciga ee uu madaxda ka yahay Marshal Tito, markuu dagaalkii dhammaadayna ka helay kalsooni weyn.

Sidaa si le'eg doorashooyinkii ka dhacay wadammada Hangeeriya, Rumaaniya, Bulgaariya iyo Albaaniya ay ugu guulaysteen, axsaabta shuuciga kana dhismeen dawlado hantiwadaag ihi.

Dawladahaas hantiwadaagga ah ee ka dhasahy Yurubta Bari, waxay garteen in ay iska kaashadaan xagga gaashaandhigga, dhaqaalaha iyo dhaqankaba.

## TAARIIKHDA MIDOWGA SOOFIYEETI

Imbaradooriyadda Ruushka oo dhulkeedu qaarna Yurub ku tirsanaa qaarna Aasiya, waxa u taliyay qarnigan bilowgiisii boqorro lagu magacaabo Saar, kuwaasoo ku tiirsanaa dhulgoosatada iyo kaniisadda, waxay ku hayeen dadweynaha gumeysi aan loo dulqaadan karin.

Wixii ka dambeeyay 1961kii ayaa la mamnuucay addoonsiga dadweynaha beeraha tacbada, hase yeeshee noloshoodu wax quman isma beddelin.

Warshadaha dalka Ruushka, inkastoo ayan u dhigmayn kuwa reer galbeedka, horukac weyn ayay sameeyeen, nolosha shaqaalahuse waxay ahayd mid naxdin leh. Dhibaatooyinkaa dadka haystay waxa ka dagaallamayay qolooyin fara badan oo aan ku qancayn waxaan ahayn kacaan. Waxaana ugu xoog weynaa:

Kacaanyahannada bulshada iyo Demoqraadiyiinta bulshada.

Xisbiga Demoqraadiyiinta bulshadu wuxuu ahaa xisbi hantiwadaag ah oo lagu asaasay magaalada Miniski 1898kii. Durba dawladdu waxay bilowday in ay ka hortagto dadkii abaabulayna waxay noqdeen qaar la xiray iyo wax dibadda u baxsada.

Dadka xisbigaa ka tirsan waxa ka soo dhexbaxay oo muujiyay karti iyo garaad dheeraad ah Falaadmiir Ulyanoof oo la baxay LENIN.

Lenin wuxuu dhashay 1870kii. Aabbihii iyo hooyadiiba waxay ahaayeen dad aqoon leh. Aabbihii wuxuu ahaa kormeere dugsi. Walaalkii oo ka mid ahaa dadka la halgamayay dawladda danaysatada ah, waxa la dilay markuu Lenin 17 jir ahaa. Lenin, markuu dhammeeyay laanta sharciga ee Jaamacadda Biiterisbeerj, wuxuu bilaabay in shaqaalaha warshadaha uu baro maarkismada tan iyo intii la xiray 1895. Waxa la soo daayay 1900kii. 17kii sano ee xigayna asaga iyo afadiisu waxay wareegi jireen magaalooyinka waaweyn ee Yurubta galbeed ayagoo intaa ka shaqaynaya dhismaha hantiwadaagga. 1903kii xisbiga D. Bulshadu wuxuu shir guud ku yeeshay Brusselis si ay uga baxsadaan Booliska Beljanka, waxay u carareen London. Habka iyo siyaasadda xisbiga ayaa laysku khilaafay.

Lenin wuxuu doonayay xisbiga in laga qayb geliyo kacaanyahannada waqtigooda, maalkooda iyo noloshooda u hibeeyay hirgelinta kacaanka. Balilnoof iyo Toroskina in xisbiga laga qayb galiyo dadweynaha oo idil. Waxa ku guulaystay codad aan sidaa u sii badnayn qoladii Lenin oo lagu magacaabay «Bolshefik», eraygaas oo macnahiisu yahay «badnaan», qoladii kalena waxa loo bixiyay «Menshefiki» oo ah «Yaraan».

Cadaadis iyo dhiigmiiradka lagu hayay dadka ku nool waddanka ayaa u sabab ahaa kacaankii 1905tii lagu laayay dad fara badan. Intii kacaanku socday boqorku waxyaaba fara badan ayuu ballan qaaday, markii xasiloonidii soo noqotay ayuuse ballan qaadyadii ka baxay. Tan iyo 1917dii nolosha dalka Ruushka wax weyni iskama beddelin.

Wax la baabi'iyaba kacaankii inta badan la sugaayay wuxuu bilowday 8dii Maarso 1917kii. Dadka Ruushku ayagoo shacbi iyo militeriba leh ayey ka soo horjeesteen dawladda. Maarso 15, 1917kii ayaa Saar Nokolay is casilay.

Muddadii u dhexaysay Maarso tan iyo Nofembarna waxa waddanka u talinayey dawlad meel ku gaar ah oo uu hoggaaminayey Lufof, oo ka tirsanaa qoyska reer boqor, ahaase nin wanaagsan.

## LABADII KACAAN DHEXDOODII

Muddadii u dhexeysay Maarso iyo Nofembar waxay ahayd waqti dagaaleed, kaasoo ay ku halgamayeen gacan ku dhigidda awoodda dalka dawladdii meel ku gaarka ahayd iyo Soofiyeetiyada. Dawladdii meel ku gaarka ahayd waxay aqoonsan weyday baahida dadku u qabo nabadgelyo iyo dhul, taasina waxay dhalisay in kalsoonidii dadku ku qabay ay yaraato. Dawladdii Lufof dib ayay u dhigtay qaybinta dhulkii ay haysteen dhulgoosatadu. Intay dawladdaasi laba qalbiga iyo dib u dhigashada ku jirtay ayaa dadkii kalsoonidooda siiyeen golayaal ay ayagu doorteen danahoodana ka shaqaynayey, kuwaas oo afka Ruushka lagu yiraahdo Soofiyeeti. Soofiyeetiyadu waxay dhasheen kacaankii 1905kii, kolkay shaqaaluhu doorteen golayaal isku dubbarida, maamulana danahooda. Soofiyeetiyada waxa guusha siiyey ayagoo ka dhashay kuna xirnaa dadweynaha. Soofiyeetidu waxay ka dhismeen tuulooyinka, magaalooyinka, militeriga gudihiisa, waxana ku badnaa Menshefikiyiinta iyo dadka ku jira xisbiga kacaanyahannada. Bolshefikiyiintu way ku yaraayeen.

Arrintaasu waxay isbeddeshay markuu soo noqday Lenin, soo noqoshadas waxa suurageliyay Jarmalka oo ku tala jiray arrintaas in uu ka faa'iideysto. Jarmalku wuxuu ku rajaweynaa in isbeddel siyaasi ah oo waddanka ka dhaca uu keeni karo Ruushka oo dagaalka ka baxa.

Lenin 16kii Abriil ayuu tegey Bitaroogaraad waxana halkaa ku soo dhaweeyay dadweyne fara badan, hase yeeshee waqtigaas baaqiisii waa loo dhug yeelan waayay. Lenin wuxuu ku baaqay in awoodda laga qaado dawladda meel ku gaarka ah, laguna wareejiyo Soofiyeetiyada iyo in la ciribtiro hantigoosadka, lana dhiso dawlad hantiwadaag ah. Waxaase dhacday in markuu dagaalkii dhawr bilood oo hor leh sii socday dhibaatooyinkiina sii kordheen in loo soo jeestay oo la garawsaday baaqii Lenin.

## KACAANKII OKTOOBAR

Dawladdii meel ku gaarka ahayd intaa talo wey ku rafanaysay. Si lagu raaligeliyo dadweynaha ka soo horjeeda dawladda, waxa shaqada laga fariisiyay wasiirkii arrimaha dibedda, oo doonayay in dagaalka la sii wado. Lenin iyo dad raacsan oo intaa kordhayay waxay ku dhawaaqeen in nabadgelyo la baadi goobo. Lenin wuxuu rumeysnaa in dagaalkaasi daryeelayay danaha imberyaaliyadda oo ayan habboonayn in shaqaaluhu ka qayb galo. Dawladdii ku meel gaarka ahayd oo sii taagdaraynaysay, waxa madaxtinnimadeeda wadajir u qabtay Lufoof iyo Kirinski oo ahaa nimanka ugu codkarsan. Waxa isku dayay in uu taliska boobo taliyihii ciidammada Kornilof, waxase horistaagay kalsoonidii lagu qabay Bolshefikiyinta oo sii korodhay. Waxa halkaa ka caddaatay in jiritaanka dawladdu ku xirnaa, Soofiyeetiyada, oo markaa ay u horseedayeen bolshefikiyiintu.

Lenin bishii Oktoobar gudaheeda wuxuu ka dhaadhiciyay Guddiga Dhexe ee Bolshefikiyiinta in lagu dhaqaaqo kacaan, waxana qorsheyntii isku soo duway Trotsky oo hore uga mid ahaa menshifikiyiinta kuna soo biiray Bolshefikiyiinta.

Nofembar waxa meelihii ugu qiima weynaa magaalada Bitaroogarad qabtay shaqaale hubaysan iyo militari kacaansan, waxana ka dhisantay Raashiya dawlad hantiwadaag ah oo uu madax u yahay Lenin.

Dadka cadawga ku ah hantiwadaaggu waxay moodeen in laga leexday waddadii suubanayd, halkaana uu ku baaba'ay kacaankii hantiwadaagga ee Oktoobar. Lenin wuxu asagu ku tilmaamay arrintaa in ay tahay tillaabo dib loo qaaday halkii laba tallaabo hore loogu qaadi lahaa, sidaas ayayna noqotay. Dhaqaalaha waddanku si tillaabo tilaabo ah ayuu kor ugu soo kacay, 1926diina wuxuu gaaray heerkii uu joogay dagaalkii hortii.

Siyaasadda dibedda ee waddanku waxay ahayd mid la xiriirta badbaadada kacaanka iyo dhismaha dhaqalaha. Dawladda, Soofuyeetiga ah, markay dagaalladii kaga guulaysatay imberyaalismaha, ayay waxay la saxiixatay heshiis iskaashi dhaqaale ah Jarmalka, oo 1922dii aqoonsaday dawladda hantiwadaagga ah ee ka dhalatay Raashiya.

## DHIMASHADII LENIN

1924kii waxa dhaqan galay dastuur cusub oo uu isku soo dubba riday Istaalin. Raashiya waxay noqotay isutugga la magac baxay Midowga Sofiyeetiga ee hantiwadaagga ah.

Jamhuuriyad waliba waxay lahayd Soofiyeeti ay soo doortaan Soofiyeetiyo ka hooseeya oo ayaga doorashadooda qof walba oo qaangaar ahi uu ka qayb geli karo. Jamhuuriyad walba Soofiyeetigeedu wuxu soo doortaa dadka xubinta uga noqonaya shirka guud ee xisbiga oo lagu magacaabo Soofiyeetiga Sare. Shirka Soofiyeetiga Sare oo socda toddobaad waxa lagu doortaa Guddiga Dhexe ee fulinta oo maamula waddanka ayna dhisanto Dawladdu. Dastuurka qodobbo ayaa laga beddelay 1936dii.

21kii Jannaayo ee isla sannadkaa oo ay dhalanaysay Jamhuuriyadda Midowga Soofiyeeti, ayaa waxaa geeriyooday Lenin, oo tan iyo 1922kii xanuunsanayey. Haddii dhan laga eego xoogga mabda'a hantiwadaagga ah, horumarinta shaqaalaha hantawadaagga ah, horumarinta shaqaalaha adduunka iyo dhalashadii Jamhuuriyadda hantiwadaagga ee Midowga Soofiyeeti, waxa aan muran ku jirin Lenin in uu ahaa nin khibrad weyn ku leh xagga siyaasada, fikradihii Marx ayuuna u habeeyay si ay uga dhaqan gali karaan Ruushka.

Markuu dhintay waxa bilowday tartan loogu loollamayo hoggaanka waddanka, waxaana ku guulaystay Istaalin, oo bilaabay in uu hirgeliyo siyaasad dhaqaale oo qorshaysan. Istalin waxa ka soo horjeeday Torostki oo kula loollamayey madaxtinnimada waddanka. Labadoodu waxay isku khilaafsanaayeen xagga siyaasadda. Istalin wuxuu doonayay in xoogga la saaro dhismo bulsho shuyuuci ah oo laga hirgeliyo waddanka gudihiisa. Torostki wuxuu doonayey in xoogga la saaro dhismaha hantiwaddagga caalamiga ah. Istalin, oo ahaa kaligitashade, si aan naxariis lahayn ayuu u ciribtiray wixii siyaasaddiisa ka soo horjeeday, wuxuuna ka dhigay qaar uu waddanka ka eryo, wax uu dilo iyo wax uu xabsi ku guro.

## SIYAASADDII DHAQAALAHA QORSHAYSAN

Istalin, oo loo aqoonsan yahay in uu ahaa nin karti weyn leh aadna ugu wanaagsanaa abaabulidda iyo iskudubbarididda shaqooyinka, wuxuu hirgaliyay qorshayn shan sano ah oo la doonayay in si deg deg ah loogu kordhiyo tacabka warshadaha, toban sano gudahoodana lagu gaarsiiyo heerka warshadaha wadammada reer galbeedka.

Isku duwidda qorshaynta waxa loo xilsaaray guddi lagu magacaabay Gos-Balaan.

Inkastoo dhibaatooyin waaweyn lagala kulmay, tacabka warshaduhu aad buu u kordhay, Midowga Soofiyeetina waxay noqotay dawlad Warshadley ah. Guulahaas waxa lagu gaaray xoog, sandullayn, amar ku taaglayn iyo dadka ka soo horjeeda oo loo laayo si aan naxariis lahayn.

Midowga Soofiyeeti wuxuu la saxiixday Faraans heshiis isbahaysi 1935kii. Markayse Jarmalka iyo Jabaanku kala saxiixdeen heshiis lid ku ah adduunweynaha hantiwadaagga ah, caddaatayna in ujeeddoodu tahay in Midowga Soofiyeeti labada dhinac laga weeraro, ayaa Istalin heshiis saaxiibtinimo la saxiixday Jarmalka. Istalin wuxuu uga dan lahaa in uu helo waqti uu ugu tabaabushaysto dagaal u muuqday in uu yahay lama huraan.

Muddadii uu dagaalku socday dalka Midowga Soofiyeeti waxa gaaray dhibaatooyin badan. Shacbiga waxa ka dhintay 15 malyuun, militerigana 10 malyuun. Inkastoo dadku dhibaatooyin badan la kulmeen misana ma ayan ku kicin dawladdooda sidii Jarmalku malaysanayay ee waxay ka qaadeen qiiro iyo waddaninimo dheeraad ah. Beeraha, warshadaha, dhismooyinka waxa gaaray waxyeellooyin aan la qiimayn karin.

Inkastoo dhibaatooyinkaas oo dhamiba ay jireen, misana guul weyn ayaa laga gaaray qoshayntii afaraad, waxana ugu wacnaa isku duubnaanshaha shacbiga Midowga Soofiyeeti iyo iskaashiga dhexyiil iyaga iyo wadammada Hantiwadaagga ah ee Yurubta bari.

Istalin wuxuu geeriyooday Maarso 1953kii, waxaana laysku raacsan yahay inkastoo uu ahaa manaxariiste keligii tashade ah, in uu gaarsiiyay shacbiga Midowga Soofiyeeti, muddadii uu horkacaayey, guula waaweyn.

## TOBANKII SANO EE KHURUSHOOF

Markii uu Istaalin dhintay waxa madaxtooyada dawladda iyo xisbiga kala qabtay Maalinkoof iyo Khrushoof. Wixii ka dambeeyay 1958kiina labada jagaba waxa isku qabtay Khurushoof.

Khurushoof wuxuu isku hawlay in uu xarkaha u furfuro siyaasaddii Istaalin. Waxa la baabi'iyay taliskii ku dhisnaa cadaadiska iyo cabsida. Si go'aankaa lagu fuliyana waxa la qaaday tallaabooyin fara badan kuwaasoo ay ka mid ahaayeen:

a) Awoodda Maleeshiyada oo la yareeyay.
b) Xerooyinkii cadaadiska oo la baabi'iyo.
t) Ilaalinta indheergaratada oo la dabciyo.

1956kii wixii ka dambeeyayna waxa la bilaabay in la cambaaerryo siyaasaddii Istalin.

## SIYAASADDII DHAQAALAHA

Warshadaha siyaasadda lagu maamulaa waxay ahayd mid dhexroorsan oo ka timaadda kor. Tan iyo 1957kii wixii ka dambeeyay ayaa laga debciyay kor ka talintii. Khurushoof, oo aaminsanaa wanaagga maamulka dhex furan, wuxuu Midowga Soofiyeeti u qaybiyay gobollo badan oo mid waliba isagu isku hawla hagaajinta iyo qorshaynta warshadihiisa, waxana xoog la saaray kor u dhigidda nolosha dadka.

Khurushoof wuxuu aad isugu hawlay siyaasadda beeraha oo ayagu ahaa meesha ugu liidata dhaqaalaha Midowga Soofiyeeti. Waxa la kordhiyay awooddii iskaashatooyinka beeraha, makiinadihii iyo waxyaabaha lagu nafaqeeyo dhulka. Siyaasaddaas waxay kor u soo qaadday beerihii.

## SIYAASADDA DIBEDDA

Dagaalkii labaad ee dunida wixii ka dambeeyay wajiga adduunku wuu isbeddelay oo dawladihii waaweynaa waxay noqdeen wax awooddoodii la liicday baabi'iddii gumeysiga sida Farans iyo Igland iyo wax dagaalkii looga guulaystay sida Jarmalka iyo Jabaan. Waxa soo haray laba dawladood oo waaweyn Qarammada Midoobay ee Maraykanka iyo Midowga Soofiyeeti oo ay dabadeed ku biirtay Shiine.

Adduunku wuxuu u kala qaybsamay laba qaybood oo iska soo horjeeda kuwaasoo kala ah Midowga Soofiyeeti oo intii kacaanku dhashay samaysay horukac weyn iyo wadammada kale ee ku dhaqma mabda'a hantiwadaagga iyo dawladda Maraykanka oo u horseedaysa wadammada hantigoosadka.

Siyaasadda dawladda Midowga Soofiyeeti wixii ka dambeeyay dagaalkii waxay xooggeeda saartay ciribtiridda gumeysiga iyo faafinta mabda'a hantiwadaagga — siyaasaddaasi waxay suuragelisay axsaabtii hantiwadaagga ahayd ee fashiistadu waligoodba hoos u dhigaysay in ay ku guulaystaan doorashooyinkii ka dhacay wadammada Yurubta Bari.

Halganka joogtada ah ee ay iskala soo horjeedaan wadammada horusocodka ah ee hantiwadaagga iyo kuwa hantigoosadka ahi waxa ka dhashay dagaalladii Kuuriya iyo Fiyetnaam oo dawladda Midowga Soofiyeeti door weyn ka cayaartay. Dawladda Midowga Soofiyeeti waxay caddaysay 1949kii in ay leedahay hub atoomig ah taasoo kordhisay kaalinta ay kaga jirto siyaasadda adduunka. Horukaca Midowga Soofiyeeti wuxuu muuqday 1957kii markii ay cirka u direen Isbutnigii kowaad, taasoo ku noqotay wadammada reer galbeedka filanwaa.

## TAARIIKHDA SHIINAHA

Adduunka badanaaba wax waliba heer ayay ku dhammaadaan. Waxyaabo ayaanse dhammaan ee weligood jira oo jooga waxa ka mid ah waxyaabaha soo jireenka ah dhaqanka Shiinaha. Waalid ka dambaynta, qoys jacaylka, dulqaadka, hawl karnimada, aqoon jacaylka, adaabta guud ahaaneed iyo garsoornimadu waa arrimaha habeeya dhaqanka Shiinaha ee soo jiraaga ah. Dhaqanku ha cusbaado ama ha gaboobo ee Shiine waa Shiine. Harold B. Ratanbeer ayaa sidaa yiri. Dadweynaha adduunka inta isku wada jinsi ah waxa ugu badan ummadda lagu magacaabo Shiinaha. Ilbaxnimadooduna wey ugu qoto dheer tahay inta ilbaxnimo adduunka ka barbaartay.

Waxaynu tusaale u qaadan karnaa laba qarni horteed intaanu Nebi Ciise dhalan dadka reer Yurubna ay ahaayeen qabaa'il duur gal ah. Dadka Shiinuhu markaa waxay dhiseen dawlad uu Boqor xukumo, maamulka dawladdana waxa hirgelin jiray niman shaqaale ah, oo imtixaan qallafsan soo maray.

Taariikhda Shiinaha waxa saldhig u ahaa aragtidii Konfiyuushas. Konfuushas wuxuu ahaa nin Filasuuf ah oo rumaysnaa in qofku wanaagsan yahay. Hase yeeshee degaanku uu dabciga qofka xumayn karo. sidaa darteed wuxuu yiri: Carruurta waa in lagu barbaariyo ka dambeynta waalidka iyo ixtiraamka dhaqanka. Xaaskuna waa asaaska aadamiga, waana unugga dawladnimada. Asluubta hadalkana waa in la hagaajiyo, dabbaaldegyaduna waa in ay ahaadaan kuwo bilicsan». Taw oo isna caalin ahaa wuu jeclaa nabadgelyada, laakiin wuxuu ka soo horjeeday dawladda weyn; wuxuu rabay tuulooyin yar yar oo mid waliba madaxbannaan tahay. Konfiyuushas wuxuu aqoonsana in ninka caalinka ihi ugu sarreeyo dadka uguna aadmi bilan yahay. Dagaalkana wuu ka soo horjeeday waxaannuu ku tilmaami jiray ninka dagaalka abaabula in uu yahay nin dadnimada dhagar ka galay.

Dadnimo bilankaa uu Konfiyuushas taaba galiyey may is hortaagin dagaalladii dhulka Shiinaha ka soconayey. Nimankii Boqorrada ahaa ee xukumayey Shiine waxay ka dhalan jireen reer dhaqanka u leh askarnimo, xoog bayna ku qabsan jireen dhulka. Waxa kaloo jirtay in debadda uu duulaan kaga yimid dalka Shiinaha oo ay ku soo duuleen reer Mangooliya. 1644-1921kii, waxa xukumi jirtay Shiinaha boqortooyo ka farcantay dagaalyahannadii ka yimid dhulka Manshuuriya. Waxaase mar walba dhici jirtay in dadka duulimaadka ku yimid Shiine uu dhaqan gedis ku dhici jiray oo cadooyinka iyo dhaqanka Shiinaha ay qaadan jireen. Nimanka boqorrada ihina ama dhalad ha ahaadeen ama duulaan iyo doolaalo ha ku yimaadeene waxay isu arki jireen kuwo Konfuyushas falsafaddiisa hirgelinaya, una hannuunsan dhaqan sare iyo maamul habaysan. Fikraddaa waxa ku lifaaqan shisheeye naceybka ay dadka Shiinuhu u lahaayeen dibedda iyo wixii ka dhaqan duwan iyaga, ayna aqoonsanaayeen in ay dadka adduunka ugu ilbaxsan yihiin. Sidaa darteed waxay dhisteen gidaarka weyn ee ku waageersan dhulkooda si ay isaga celiyaan dadka badowda ah. Gidaarkaasu muu is hortaagin cadowgii Shiinaha, dhinaca militerigana waxtar weyn uma uu yeelan, laakiin wuxuu ahaa astaan niyaddooda iyo Saykoolajiyadooda muujisay.

## REER GALBEEDKA IYO SHIINAHA

Qarnigii 19aad Yurubta Galbeed way kaga horraysay dhinaca Militeriga iyo sancadaba adduunka kaloo dhan. Shiinuhu wuxuu lahaa dhaqaale iyo ganacsi tafatiran oo habaysan. Ganacsatada Shiinuhu dhul badan ayey ka gooshi jireen. Culamadoodu waxay sameeyeen xaanshiyaha, daabacaadda farta iyo qalabka lagu hoggaamiyo maraakiibta ee la yiraahdo Kambaska ama jiheeyaha. Xariirta iyo qalabka haweenku isku qurxiyaan farshaxannadii Shiinuhu gees bay uga dhaceen.

Waxase nasiibdarro ah in aanay Shiinuhu samaynin injiin wax taxaaba, qalabkoodana may warshadayn. Dhinaca Makiinadaha alaabta soo saarana hore ugu may marin.

Ganacsatadii reer Yurub waxay doontay inay Shiinaha xoog wax kaga ganacsadaan. Markii Shiinuhu iska soo taageen arrintaa, sidii Jabaan oo kale ayey dagaal ugu qabqabteen. Ugu horreyntii Ingiriiska ayaa ku sanduleeyey Shiinuhu in ay marsooyinka u furaan dhulna u oggolaadaan in ay degaan. Reer Yurub waxay dhiseen wadooyin Tareen waxaanay jidaysteen in loo aqoonsado xuquuq dheeraad ah oo u oggolaanaysa in aan xeerka iyo qawaaniinta Shiinaha lagu qaadin haday dembi galaan. Magaalooyinka «Shanghay, Kaantoon iyo Ningboona» waxay ganacsatadii reer Yurub ka dhigeen magaalooyin la dhaqan wareejiyay, waxaanay iska dhigeen niman dagaal ku guulaystay oo kale, Shiinaha dhaqankoodana way yasi jireen.

Dhulalkii Shiinuhu ay xukumi jireen ama ay canshuurta ka qaadan jireen waxa la wareegay dawladihii reer Yurub. Indo-Shiine waxa gacanta ku dhigay Faransiiska, Sinkongona waxa qabsaday Ruushka, marsada «Kiyojafna» waxa xoogay Jarmalka 1895kii, Jabaanna waxay dagaal kula wareegtay Kuuriya. Shiinuhu waxay aad uga calool xumaadeen dhulkoodii oo shisheeye qormaqormaystay. 1860kii markii taariikhdu ahayd waxa jirtay in niman askar ah oo reer Yurub ahi ay weerareen guriga boqorka ee Bekiin ku yaal, sababta oo ahayd boqorka oo diiday in uu la kulmo danjirayaal reer Yurub ah. Boqortooyada Shiinaha markii ay gidaarka weyn isku dayrtay abbaara laba boqol oo sano ka hor waxay rabtay in aanay dadka shisheeyaha waxba ku darsan. Taas oo ay yidhaahdeen boqortooyada Shiinuhu waxay leedahay ilbaxnimo sare, hiddo dhalad ah iyo dhaqan wanagsan oo aan cidi la tartami karin. Sidaa daraaddeed boqor Shiina ahi lama kulmi jirin danjire shisheeye ah ilaa iyadoo danjirayaashu uu sooryo keen yahay, ama dawladduu wakiilka ka yahay ay canshuur qaadista Shiinaha u hoggaansan tahay. Reer Yurubna sidaa lamay dhacsanayn. 1900kii waxa Shiinaha xukumi jiray talis dhaxaltooyo ah oo lagu magacaabi jiray Manshuu. Taariikhda aynnu soo sheegnay xukunka Manshuugu wuxuu ahaa mid khaayisay oo dheeliyay, caleentiisuna caddaatay. Taariikhdaa iyada ah waxa urur samaystay dhallinyaro Shiine ah, ururkaasna waxy ku baadidoonayeen sidii ay isaga celin lahaayeen dadka dhulkooda ku soo duulay. Astaanta ururku waxay ahayd calaamada feedhka, waxayna isku magacaabeen feedhyahannadii. Feedhyahannadu waxay weerar ku qaadeen shisheeyihii degganaa magaalada Bekiin ee reer Yurub. Hase yeeshee dawladihii reer Yurub ciidan xoog leh ayey Bekiin u soo direen iyagoo ku marmarsooday iskana dhigaya in ay dadkooda badbadinayaan. Si naxariis daran ayey uga aar guteen dadkii Shiinaha, magaalada Bekiinna way burburiyeen,

dhacii iyo boobkii ay weligoodba caanka ku ahaayeenna way cusboonaysiiyeen. Boqortooyadii Manshuugana waxay ku sandulleeyeen in ay dhiibto 67 Malyuun oo ah khasaarihii iyo dhibaatooyinkii gaadhay dadka reer Yurub ee dalka Shiinaha degganaa iyo xoolahoodii.

Arrinta kale ee iyana Shiinaha welwel iyo walaac ku beertay waxy ahayd dagaalkii Jabaanka iyo Ruushka ka dhex dhacay ee ku saabsanaa gobolka Manshuuriya iyo cidda jid u leh. Dadka iyo dawladda Shiinaha toona afti lagama qaadin hoodhna laguma qoysan. Dadka Shiinaha arrintaasi waxay la noqotay in la yasayo, awooddooda siyaasiga ah iyo dawladduna ay been been iyo dhalanteed ku dhisan tahay. Dagaalkaas dad badan oo Shiine ah ayaa ku qudh baxay, dhulkoodiina gebagebo iyo qalalaase ayuu dagaalkaasu u keenay.

Dadkii Shiinuhu waxay arkeen inkastoo taariikh dheer iyo dhaqan fiican ay lahaayeen in aanay ka maarmi karin in ay kaalmaystaan tacliin cusub iyo aqoon laga barto reer galbeedka. Awooddii siyaasiga ahayd markay hoos u dhacaysay waxa muuqatay in ilbaxnimadii ku dhinayd Koonfiyuushmada ay noqotay mid gabowday, dib u dhacna keenaysa. Reer Galbeedka sida qudh ah ee lagula tartami karaana waxay noqotay cilmigooda iyo aqoontooda Sayniska iyo maamul siyaasaded oo cusub. Xeer iyo aqoon cusub iyo tababarro la dhigma kuwa reer galbeedka. Buugaag badan ayaa la tarjumay oo laga beddelay afka Ingiriisiga; warshado ayaa la dhisay loona habeeyay sida kuwa ka hirgalay Yurub. Waddooyinka tareennada ayaa meelo badan laga dhisay. Waqtigaa dadka Shiinuhu waxay isu diyaariyeen dagaal aqooneed.

## TOBANKII LAMMAANAA

Boqortooyadii Shiinaha ee reer Manjuuriya waxay dhimatay 1908kii wiilka marka boqornimada ka dhaxlay waxay da'diisu ahayd 3 sano. Sidaa awgeed waxa xukunka sii hayey yarkaa aabbihii. Sun-Yat-Sin iyo niman ka mid ah kuwii u halgamayey kacaanka arrintaa way ka xumaayeen. Sun iyo nimanka la aragti siyaasi ah wax loo caydhiyay dalka dibeddiisa. Hase yeeshee fikradahoodu waxay ahaayeen kuwo caan ah, dadkii Shiinahana baraarujiyey.

Dhallinyarada Shiinaha ee indheergaratada ahi aad ayey ugu hannunsanaayeen fikradihii Sun ee siyaasiga ahaa oo ay saldhig u ahaayeen in la dhiso Jamhuuriyad hantiwadaag ah. 1911kii, markay taariikhdu ahayd ayaa niman Janaraallo ahi meel kasta oo dhulka Shiinaha ahba ay qulqulado ka kiciyeen. Inkastoo Janaraalladii la xiray ama la dilay, waxa qaar ka mid ahi guulaysteen Oktoobar 10, 1911kii. Taasu waxay dhalisay dagaal sokeeye. Hase yeeshee Disembar, 1911 ayaa Sun ciidammadiisii iyo kuwii boqortooyadu kala saxeexdeen heshiis xabbad joojin ah. Laba bilood ka dib ayaa boqorkii yaraa ka degay Kursiga boqortooyada, dalka Shiinahana ay ka bilaabantay Jamhuuriyadi. Maalintaa waxa lagu magcaabay tobankii lamaanaha waayo waxay dhalatay Jamhuuriyadda Shiinuhu bisha tobnaad maalinteedii tobnaad. Waxa qulubaagedis ku dhacay, dhidibadana loo saaray boqortooyadii Shiinaha ee da'deedu ahayd 2,300 oo sano taasoo ku taami jirtay in ay ku dhisan tahay ilbaxnimadii Konfuyuushas uu habeeyay, xagga samadana laga soo dijeyay.

Jamhuuriyaddaa cusubi waxay la kulantay dhibaatooyin. Sun-Yat-Sin wuxuu noqday madaxweyne waxaannu abaabulay xisbi lagu magacaabay «Komitaang», oo waddani ah. Xisbigii Sun-Yat-Sin waxa markiiba dagaal kala hortegay nin la oran jiray Ayuwan - Shish - Kaar. Ninkaasu wuxuu rabay in uu boqortooyo abuuro oo isaga laftiisu uu boqorka noqdo. 1916 ayuu Kaar dhintay, kuwii isaga raacsanaana ay kala biiqbiiqeen, kuwaasoo xasiloonidii ay lahaayeen iyo ummadnimada Shiinaha lid ku ahaa. Ameerika way ka soo horjeedday arrintaa, iyadoo aan rabin Jabaan oo xoog ka noqota bariga fog. Waxay Ameerika aad u cadaadisay Jabaan waxaanay ku doodday in siyaasadda Shiinaha laga dhigo mid iriduhu u furan yihiin, dawlad walibana ay la baayacmushtarayso. Markay taariikhdu ahayd 1918kii dalka Shiinaha xasiloonidii way yaraatay, gobollo badanina waxay rabeen in xukunka dhexroorsan aanay u hoggaansamin.

Markay taariikhdu ahayd 1920kii dadka Shiinuhu waxay ka soo horjeesteen reer galbeedka inkastoo ay rabeen in ay aqoon cusub oo xagga sancada iyo xagga teknoloojiyadaba ka kororsadaan. Waxyaabaha dhibta lagala kulmay waxa ka mid ahaa afka. Dadka Shiinuhu waxay leeyihiin lahjooyin badan. Hase yeeshee waxay Hindiya oo kale kaga nasiib roon yihiin iyada oo afka qoran la wada yaqaanbo. Afka qoran ee midka qudha ihina wuxuu u suurageliyey in dhulka Shiinaha oo dhami isku xidhmo. Waayadii hore afka qoran waxa aqoon u lahaa dadka ka dhashay dabaqadda sare, maantase dadka badankooda waxa la gaarsiiyay heer ay waxna ku qoraan, waxna ku akhriyaan. Habka afka Shiinuhu u qormaa wuu ka duwan yahay afafka reer galbeedka. Kumaankun sano ka hor ayaa Shiinuhu ay u habeeyeen afkooda sida uu maanta u qoran yahay. Haddii aad fiiriso qaamuus aan la kala dhimin, wuxuu ka koobmayaa 40,000 oo sawir, hase yeeshee 3000 oo sawir ayaa ku filan in aad aqoon fiican u yeelatid afka. Labada qaybood ee ugu weyn qaybaha afka Shiinuhu uu u kala baxo waxa la yiraahdaa Mandariiniyan iyo Kantaniis.


Arday badan oo Shiine ah ayaa waxbarasho dibadda u aaday. Isdhexgalkii dheddiga iyo laboodkuna wuu batay. Niman garabka bidixda siyaasaddooda raacsanayd oo uu madax u ahaa Maw Tse Tung waxay qaateen mabda'a hantiwadaagga lagu magacaabo. Maw wuxuu ku dhashay kuna koray bariga Shiinaha. Magaalooyinka xeebta iyo dhaldhalaalkooduna carruurnimadiisii wax ka fog ayay ahaayeen. Wuxuu ahaa nin dhibaatooyinka dadweynaha aad ula socda aadna uga warqabay, beeralayda Shiinuhu silica iyo saxariirka ay ku jirto. markiiba xisbi ayuu abaabulay, waxaanuu noqday qore fiican oo dhegaha iyo indhuhuba wuxuu qoro ay jeclaystaan. Indheergaratadii Shiinahu waxay dalka ka abaabuleen shaqa ka fariisi. Dadka Shiinaha waxay ku guubaabiyeen in aanay iibsan qalabka iyo waxyaabaha dumarku isku qurxiyaan ee reer Yurub soo waaridaan.

1925kii markay taariikhdu ahayd ayuu Sun-Yat-Sin geeriyooday; sawirradiisa ayaa meel walba la suray, dardaarankiisiina dugsiyada ayaa ardayda aroor walba loogu akhriyi jiray. Sun wuxuu ahaa aabbihii Jamhuuriyadda cusub ee Shiinaha. Ninkaasu waxa uu intuu yaraa oo dhan ku noolaa dalka Ameerika, midabtakoor badanna wuu la soo kulmay. Sidaa darteed gobannimada Shiinaha aad ayuu daacad ugu ahaa. sun wuxuu ahaa nin ka gubtay fikradda reer Yurub ay Shiine ka haysteen qarnigii 19aad iyo 20aad horraantiisii. Fikraddaas oo ahayd in Shiine ay yihiin dad had iyo jeer ofyuunka ku marqaansan dumarkooduna xeebta uun ku sugayaan

badmaaxyada reer galbeedka. Sun waxa lagu aasay buur ku taal magaalada Bekiin. Xabaashiina si aad ah ayaa loo qurxiyay. Nimanka taariikhda qeexaa waxay Sun ku tilmaameen in uu ahaa nin Hindisa badan falkiisuna gaabnaa. Dadka wuu baraarujin karayey muuse hoggaamin kareen. Sun waxa xukunka uga dambeeyay nin la yiraahdo Jaan Kay-Shek waxa dhalay oday beeralayda waaweyn ah, markuu yaraana waxa loo tababaray askarnimo. Tababarkaas wuxuu ku qaatay dalka Jabaan saaxiibadiina waxay ahaayeen hantigoosatada waaweyn ee Maraykan, Jaan Kay-Shek wuxuu aqoonsanaa in la helo xasillooni, siyaasaddana uu dadweynuhu ka baxo. Xagga dhaqanka wuxuu u hoggaansanaa Konfuyuushas. 1924kii markay taariikhdu ahayd ayaa dalkii Shiinaha oo dhan uu gacanta ku dhigay. 1927 ayey nimanka hantiwadaagga u hoggaansanaa ay halgan bilaabeen. 1931 Maw iyo xisbigii hantiwadaagga ahaa ayaa laga adkaaday. Hunaan bay ka durkeen nimankii hantiwadaagga ahaa waxayna u gudbeen Shensi gobolka la yiraahdo ee ku taal Webiga Hurdiga ah. Markay taariikhdu ahayd Oktoobar 1934kii ayaa 100,000 oo rag iyo dumarba leh oo ah Shuuciyiin ay u ambabaxeen socdaalkii dheeraa ee ahaa 6000 Mayl. Sannad dabadeed waxa soo hadhay 20,000 oo qof. Socdaalkaasu qiime weyn ayuu leeyahay. Haddaanay dadka u halgamayey hantiwadaaggu aanay guurin waa la madhin lahaa, dawlad hantiwadaag ahina kamay dhalateen dalka Shiinaha. Nimankaa qaxootiga ihi waxay ka gudbeen 25 webi; waxay soo jibaaxeen 18 buurood; waxay intaa dagaal kula jireen ciidammadii Jaan- Kay-Shek oo aad uga hub fiicnaa, ayse nimanka hantiwadagga ihi hab dagaalka ka badiyeen. Socdaalkaasu wuxuu ahaa mid saykaloojiyada qofka curyaaminaya sababtoo ah waxay dadka hantiwadaagga u halgamayey u soo taagnaayeen jaallayaashood oo u dhintay gaajo, daal, dhaxan iyo cudur. Socdaalkaa qofkii soo maray ee maanta nool waxa adduunka oo dhan looga aqoonsan yahay geesi aan lays hortaagi karin, taariikhda Shiinahana wuxuu ka mudan yahay sharaf iyo milgo qiima leh. Nimankaasu haddaanay jirin oo joogin oo halgamin oo noolaan, jamhuuriyadda hantiwadaagga ihi may hirgasheen manay dhalateen, manay korteen, manay kaalingasheen.

Saddex sannadood ka dib Jaan Kay-Shek ciidammadiisii waxay dib ugu gurteen xagga gudaha. Waayadii hore dalka Shiinaha waxa laga soo weerari jiray xagga waqooyiga, sidaa darteed ayey u dhiseen gidaarka weyn. 1940kii markay taariikhdu ahayd waxa laga soo weeraray dalka Shiinaha xagga xeebta. Jabaan waxay qabsatay waddooyinkii Tareenka iyo marsooyinkii waaweynaa oo dhan. Jabaan markaa waxay heshiis nabadgeliyo la dhigatay ninkii la oran jiray Wang Jing Weri oo dabadhilif u noqday dawladdii Jabbaan. Dalka Shiinaha markaa waxa ka dhismay saddex dawladood. Hase yeeshee markay Ameerika dagaalka soo gashay waxa hubaal noqotay in Jabbaan la jebinayo. Taasu umay hirgelin Jaan Kay-Shek waayo nimankii Shuuciyiinta ahaa maalinba maalinta ka dambeysa ayaa lexaadkoodu soo kordhayey. Siyaasadda ay ku soconayeen nimanka hantiwadaagga ihi waxay ahayd mid qorshayn wacan iyo hab fiican lagu dhisay. Dagaalkana waxay qayb ka qaadan jireen markay u habboon tahay. Lexaadkii Komintang wuu liciifay. 1946 Maw ciidammadiisii waxay u gudbeen dhanka Koonfurta. Si lama filaan ah ayaa Jaykaan iyo ciidammadiisii ay u jabeen. Hubkii Ameerika ay ku taageeraysayna waxa ka furtay ciidammadii hantiwadaagga ahaa. Oktoobar 1, 1949kii ayaa Maw Tse Tung u noqday guddoomiyihii Jamhuuriyadda dadka ee Shiinaha. Aydiyolajiyadii Konfiyuushasna waxa beddelay aragtida markisimada ee caalamiga ah.

# SOCODKII DHEERAA




"SOCODKII DHEERAA

## QULQULADII KUURIYA

Sidaynu hore u soo sheegnay ciidammada Maw waxay ahaayeen kuwo naftooda huray, halganka iyo dhibaatada dagaalkana u soo jabsamay. Taa waxa u raacday inay caynaanka u hayeen dawladaha adduunka tii ugu degganaan badnayd. Sannad markay xukunka gacanta ku hayeen waxay dagaal iskaga horyimaadeen dawladda Ameerika oo markaa sheeganaysay awood iyo lexaadba.

Qalalaase iyo qulquladina waxay ka dhacday Kuuriya. Kuuriya waxay qarniyo badan ahayd dal Shiinaha hoos yimaada, canshuurna siiya. Markii dambese Kuuriya waxa gacanta ku haysay Jabbaan ilaa 1910. Hase yeeshee 1945kii ayaa Jabbaan dagaalkii lagaga guulaystay oo ciidammadii Ameerikana xagga Koonfureed kaga yimaadeen, kuwa Ruushkuna xagga waqooyiga ay ka soo galeen. Waxa Kuuriya qaybteeda lagu saameelay loolka 38aad wixii ka koreeya in uu Ruushku gacanta ku dhigo, Ameerikana qabsato wixii ka hooseeya. Xariiqdaasi waxay Kuuriya u kala qaybisay Koonfur iyo waqooyi. Dhulka Kuuriya, waqooyigu wuxuu ku horreeya xagga warshadeynta Koonfurtuna waxay ku horraysay xagga beeraha.

Kontanaadkii waxa adduunka xiisa weyn ka kiciyay arrinta lagu magacaabo dagaalka qabow ee had iyo jeer ka dhex taagnaa bariga iyo galbeedka. Xagga Koonfurta waxa ka madax ahaa nin la oran jiray Sygman Rii oo taageerana ka heli jiray Maraykanka. Xagga waqooyigana waxa maamuli jiray nin la yiraahdo Kim Il Sung oo ahaa nin aqoon dheer iyo yiqiin adag u leh mabaadi'da hantiwadaagga. Bishii Juun 25, 1950 ayaa labada Kuuriya xabbaddii u horraysay ka dhex qarxaday.

Ameerika waxay taa u foodsaartay in Ruushku garab siinayaan Kuuriyada waqooyi. Markaa iyana waxay af iyo adinba ku taageertay tan Koonfureed. Maraykanka madaxweynaheedii Turuman wuxuu ku guubaabiyay qarammada midoobay golaheeda amaanka iyo Kuuriyada Koonfureed ciidammo loo diro. Taasoo Kuuriyada waqooyi ka dhigaysay mid duulimaad iyo gardarro ku gelaysa dhulka Kuuriyada Koonfureed. Arrintaa Maraykan waa lagu raacay, sababtuna waxay ahayd iyada oo ay ku yaraayeen wadammada adduunka saddexaad. Wakiilka Midowga Soofiyeetiga u fadhiyayna wuu ka maqnaa shirkaa sababta uu uga maqnaadayna waxay ahayd iyada oo fadhigii ka horreeyay lagu falanqeeyay kursiga Shiinaha cidda xaqa u leh. Markay Maraykan iyo dabadhilifyadoodii ku adkaysteen in Farmoosa kursiga la siiyo ayuu wakiilkii Ruushku ka baxay shirkii. Kuuriya maalintii la gooyey in ciidammada Maraykanka loo diro ayaa waxay isku sheegeen inay yihiin ciidammadii ururka oo himiladoodu tahay in ay ilaaliyaan xasilloonida. Ruushka wakiilkiisii goluhuna muu joogin. Haddii Ruushku isticmaali lahaa awooddiisa fiitowga ah, maanta taariikhda Kuuriya si kale ayeynu u eegi lahayn. Ciidammadii Maraykan ee Jabbaan yiil ayaa ka dagaal galay Kuuriya iyaga oo weliba taageero ka helay ciidammada Ingiriiska. Ururkii loo asaasay in uu adduunka nabad iyo xasillooni ka rido shan sannadood gudahood ayaa magaciisii dagaal been iyo xaqdarro ku dhisan lagu galay. Dagaalkaasu wuxuu soconayey 90 maalmood. Ciidammadii waqooyiga aad ayey isu daafaceen.

Hase yeeshee sarreeye Mak Artur oo ciidammada Maraykanka hoggaaminayay xagga dambe ayuu wuxuu ka soo weeraray Inkoon. Goobtaasi mid qaraar ayay ahayd. Si dhib leh ayay markaa ciidammadii Maraykanku ku soo galeen Seyloon.

## DAGAALKII KUURIYA IYO KU BIIRIDDII SHIINAHA

Ciidammada Kuuriyada waqooyi oo dagaalyahaniin adduunku u wada yiqiinsan yahay ah, laba cidhif ayaa lagala dagaallamayey, dhaqaalahooduna muu fiicnayn. Ciidammadii Ameerika iyo Ingiriisku waxay isku dayeen inay ka gudbaan loolka 38aad. Maw Tse Tung wuxuu fiiro gaar ah u lahaa in haddii ciidammada Maraykan ah ay ka gudbaan xariiqdaas ay soo dhaafi doonaan webiga Yeel, halkaasna ay Manshuuriya ka soo gelidoonaan. Nimanka ku caan baxay taariikhda dagaallada markay sarreeye Mak Artar weydiiyeen in Shiinuhu dagaalka Kuuriya ay qayb ka qaadan doonaan wuxuu ku jawaabay; «IN YAR». Maalintuu sidaa yiri maalintii ku xigtay ayaa 300,000 oo askari oo Shiina ihi ka soo gudbeen webiga Yeel oo Kuuriya soo galeen.

Ciidammada Shinuhu waxay ahaayeen niman dagaal aad loogu carbiyey, isirsanayana abbaanduulayaasha socdaalka dheer. Waxay kari karayeen inay maalmo badan ku noolaadaan bariis yar oo aan in yar oo iidaan ah lahayn. Waxay aaminsanaayeen in ay u dagaallamayaan yiqiin iyo mabda' waxayna rumaysnaayeen inay guushu iyaga raaci doonto. Waxa kaloo gargaaraysay meelaynta Juqraafiyada. Ninkii ciidammada hoggaaminayey wuxuu ahaa Lin Biyaw oo gorfaynta tallada iyo qorshaynta u lahaa waayo aragnimo dheer. Lin wuxuu tusay Maraykanka iyo adduunkaba in dagaalku aanu ahayn tookh iyo khariidad lagu soo sameeyay 1000 Mayl xafiis u jira goobta dagaalka, askariga la afduubayna in aanu gaashaandhigga iyo weerartoona mid u babac dhigi kara ahayn kan runtu u muuqato.

Ciidammadii Maraykanka waxa lama filaan ku noqotay u jilib-dhigga duulaankii ay Shiinaha kula kulmeen, ciidammadii Shiinuhu waxay soo gaareen loolka 38aad. Ciidammada Maraykanka markaa badda maahee meel kasta waa lagu jabshay Mak Artar wuxuu markaa u soo jeediyey Turuuman in dagaal Shiinaha ay kaga furaan dhulka Shiinaha. Turuuman wuu diiday arrintaas waayo, taasu waxay dhalin lahayd dagaal saddexaad oo adduunweynaha saameeya. Khilaaf ayaa Maraykanka hoggaankoodii ciidammada iyo kii siyaasiga ka dhex dhacay, Mak Artarna wuu ka fariistay shaqadii. Maraykankii waxay isku qoomameeyeen gudubkii ay markii hore ka gudbeen loolka 38aad. Iminkana ididiilada qura ee ay haystaan waxay noqotay inay ku mintidaan xariiqda oo aanay ciidammada gobannimadoonka ihi soo dhaafin. Julay 1951 ayaa shir laysugu yimid si xabbad joojin loo gaadho. Hase yeeshee heshiis waxa la kala saxeexday laba sannadood ka dib. 1953 ayaa la gaaray in loolka 38aad lagu kala joogo.

Dagaalkii Kuuriya wuxuu isbeddel weyn ku riday fikraddii iyo siyaasaddii reer galbeedka. Waxay ogaadeen in yasiddii heshiisyadii aan dheellitiraynin iyo marsooyinka Shiinaha ee lagaga haagay xariirta iyo guryaha lagu tunto waqtigeedii uu dhammaaday. Waxay ogaadeen in dhulka Shiinaha laga abuuraayo dad cusub oo cuskanaya mabda'a hantiwadaagga oo himiladoodu tahay innaga ee anay ahayn aniga. Taasu argagixiso ayey gelisay dhulalka hantigoosadka. Jamhuuriyadda Shiinaha ee dadka wuxuu baaqeedu ahaa «Muruqa iyo maskaxda waa in aynu midaynaa».

## QULQULADDII KUURIYA

Dagaalkii labaad ee adduunku intii uu socday iyo ka horba dhaqdhaqaaq siyaasi ah ayaa ka socday Kuuriya gudaheeda. Madaxda siyaasadda ee reer Kuuriya qaarkood waxa ay abuurteen dawlad ku meel gaar ah oo dibedda ka dhisan, waxaanay ahaayeen niman aragtida siyaasaddoodu ujeeddo dhinaca midigta. Hase ahaatee, dhaqdhaqaaqa Kuuriya gudaheeda ka socday waxa oogayey niman horusocod ah. Bishii Agosto 10dii, 1945kii sidii uu dhigayey heshiiskii Botsdam (Potsdam) ciidammada Ruushka ayaa qabsaday loolka 38aad ee waqooyi dhulka ka korreeyey, ciidammada Maraykankuna inta ka hoosaysa.

Dhinaca waqooyi waxa maamulayey guddi ku meel gaar ah oo uu hoggaaminayo Kim Il Sung. Sannadkii 1946kii 750,000 oo qoys ayaa loo qaybshay laba malyuun iyo bar waxaana la toleeyay hantidii ay lahaayeen Jabbaanka iyo hantigoosatada reer Kuuriya. Waxa Kuuriya markaasi ka dhashay xisbi haniwadaag ah oo la magac baxay Jabhadda Ummadda Kuuriya ee Dimuqraadiga ah. Bishii Nofembar 1946kii doorasho la qabtay xisbiga KNDF ayaa boqolkiiba 97 cod helay, bishii Febraayo 1947kiina gole guud ayaa la abuuray. Kim Il Sung ayaa dabadeedna dawladda uu dhisay madax ma noqday, Kuuriyada waqooyina waxay noqotay Jamhuuriyadda Dadka ee Kuuriyada Dimuqraadiga ah.

Dhinaca Koonfureed waxa kor ka maamulayey madaxda ciidammada Maraykanka. Shaqaalihii Jabbaanka oo 70,000 tiro le'ekaa waa la dareershay, kuwii Maraykanka ahaana dad reer Kuuriya ah ayaa lagu beddelay.

Markii 1946kii la gaaray 3,000 oo Maraykan ah ayaa maamulka dawladda hayey.

Labada dhinacba waxay ku doodayeen israac iyo wadajirka Kuuriya. Hase ahaatee, dhinac waliba shuruudda uu la yimaado in la raaco ayuun buu rabay. Bishii Disembar 1945kii, Ruushka iyo Maraykanka aya isla gartay in maamul ku meel gaar ah loo dhiso Kuuriya lagana shaqeeyo sidii nabadgelyo loogu samayn lahaa oo ku ekaata muddo shan sano ah. Madaxda siyaasadda ee Koonfurta Kuuriya waxa ugu caansanaa Singman Rii oo dhinaca midigta ka tirsanaa. Waxaana guddoomiye looga dhigay gole loo abuuray in uu la taliyo guddiga nabadgelyada. Isla markaas madaxda siyaasadda Koonfurta Kuuriya waxay abuureen Jamhuuriyadda Dalka ee Kuuriya.

Guddidii nabadgelyada ee ka koobnayd Maraykanka iyo Ruushka iyo madaxdii siyaasadda Koonfurta Kuuriya isafgaranwaa ayaa dhexmaray. Maxa yeelay, Koonfurta Kuuriya waxa ay rabtay madaxbannaani buuxda. Bishii Juun 1947kii guddida dhexe ee Maraykanka iyo Ruushka ayaa madax ka tirsan labada dhinac isugu yeeray si israac iyo wadajir looga wada hadlo. Hase ahaatee waxba kama ay suuragelin. 1948kii ayaa doorasho ka dhacday Koonfurta Kuuriya. Inkasta oo ay axsaabtii bidixdu qaaddacday, haddana go'aankii mid hirgalay ayuu noqday. Xisbigii Singman Rii ayaa 55 kursi ka helay 190kii kursi ee golaha. Isaga ayaana madaxweyne u noqday Jamhuuriyadda cusub oo Koonfurta Kuuriya ka dhalatay bishii Agoosto 15dii.

## BILOWGII DAGAALKA

Bishii Juun 25dii, 1950kii ayaa xabbaddii ugu horraysay Kuuriya ka qaraxday. Hortiiba ciidammadii Kuuriyada waqooyi ayaa gacanta sare yeeshay qayb fidsan baanay qabsadeen. Tallaabadaasi Maraykanka ayey argagax gelisay, waxaanu ku

andacooday in Ruushku Kuuriyada waqooyi taageerayo, hub lexaad lehna uu siiyey dagaal gardarro ahna ay ku kacday. Sidaa awgeed ayaa Maraykanku isugu yeeray Golaha Ammaanka ee Ummadaha Midoobay. Bishii Juun 25diina waxa goluhu guddoonsaday in Jamhuuriyadda Kuuriya xubnaha golaha ku jiraa ay taageero gaashaaman siiyaan. Isla waqtigaas Madaxweynaha Maraykanka Turuuman waxa uu ciidammada Maraykanka amar ku siiyay in ay diyaaradaha iyo maraakiibtoodu u gurmadaan Jamhuuriyadda Kuuriya. Bishii Agosto markii la gaaray ciidammada Maraykanka ee ka dagaal galay Kuuriya tiradoodu waxay kor u dhaaftay 65,000 ka dib waxa ku soo biiray ciidammada Ingiriiska, dagaalku waxa u socday 90 cisho, hase ahaatee, ciidammada waqooyiga Kuuriya waa la muquuniyey, ka dib markii sarreeye Mak Artar oo hoggaaminaya ciidammada Maraykanku uu dhabar jabiyey ciidammadii waqooyiga Kuuriya, isaga oo ka soo weeraray Inkon. Dagaal qaraar ayaa halkaas ku dhexmaray labada dhinac, kaddibna ciidammada Maraykanku magaalada Siyool ayey si dhib leh ku galeen. Bishii Oktoobar 1dii ayaa ciidammada Koonfurta Kuuriya xadkoodii ka gudbeen ciidammadii Maraykanka iyana waa ka daba tageen, waxaanay gaareen wabiga Yalu. Isla bishaasi dhammaadkeedii ayaa ciidammada Shiinuhu ayana dagaalka soo galeen, ka dib markii ciidammada Maraykanku ka gudbeen wabiga Yalu. Ciidammada Shiinaha oo 150,000 tiro le'eg, ayaa dib u soo riixay ciidammadii Koonfurta Kuuriya iyo kuwii Maraykankaba. Si ba'an ayaa ciidammada Shiinuhu u galeen askartii Maraykanka, Kuuriya iyo Ingiriiskaba.

Abbaanduulaha ciidammada Maraykanka, sarreeye Makaartar, waxay la ahayd in Shiinuhu aanay dagaalka soo gelaynin, hase ayaatee, dawladda Shiinuhu waxay aad ugu fiiro lahayd, haddii ay ciidammada reer galbeedku ka gudbaan webiga Yalu, in taas micnaheedu tahay weerar gardarro oo Manshuuriya lagu gelayo. Sidaa darteed ayaana Shiinuhu dagaalka u galeen. Askarta Shiinuhu waxay ahaayeen dad carbisan oo aad ugu niyadsan kartidooda. Waxay u dagaallamayeen yiqiin ay ogsoonaayeen in ay xaq tahay, meelaynta juqraafiyaduna gargaar bay u noqotay guul u soo hoyata. Lin Biyaw waxa uu Makaartar iyo ciidammadiisii tusay in dagaalku uusan ahayn qorshe iyo khariidad lagu soo sameeyo xafiis 1000 mayl goobta dagaalka u jira; askari dagaal in uu galo lagu soo qasbayna gaashaandhig iyo weerar toona uma babac dhigi karaynin. Shiinuhu ciidammadoodii 1951kii ayey soo gaareen loolka 38aad ee waqooyi, ka dib markay ciidammadii Maraykanka goobtii ay isku haleelaanba wey ku jebsheen. Sarreeye Makaartar waxa uu soo jeedshay in dalka Shiinaha la weeraro, Turuumanse, arrintaasi waa uu diiday, maxaa yeelay, dagaalweyne saddexaad oo adduunka ku fida uma uusan diyaar ahayn. Makaartar, shaqadii ayuu markaasi ka fariistay. Bishii Julay 1951kii ayaa shir la isugu yimi lagu raadinayo in xabbadda la joojiyo. Hase ahaatee, wax heshiis ah lama gaarin. 1953kii ayaase lagu heshiiyey in loolka 38aad ee waqooyi lagu kala joogo.

Ururka Ummadaha Midoobay oo dagaalkii labaad ee adduunku markii uu dhammaaday curtay, waxa uu u muuqday xarun meeleysa looltanka iyo xafiiltanka ka dhexeeya dawladaha waaweyn, gaar ahaan Ruushka iyo Maraykanka oo aan u fiigganayn nabaddii iyo xasilloonidii loo abuuray in uu adduunka ka dhaliyo. Markii ugu horraysay ayaa magaca Ummadaha Midoobay ciidammada Maraykanku ku galeen dalka Kuuriya, halkii xasilloonida iyo nabadgelyada qarankaas laga sugi lahaa.

Haddii maalintaasi golaha ammaanku gooyay in gargaar gaashaan loo diro Kuuriyada Koonfureed, uu joogi lahaa wakiilka Ruushku uuna dhiibo codka fiitooga, maanta taariikhda Kuuriya indho kale ayeynu ku eegi lahayn.

Nasiib darrose wakiilka Ruushku waqtigaa arrinta Kuuriya laga hadlayey wuu maqnaa. Taasina waxay dhalisay dagaal ay ku nafwaayeen ugu yaraan laba kalyuun oo qof.

## FIYETNAAM

Dadyowga deggan Koonfurta Bariga Eeshiya colaadda ay u qabeen gumeystayaasha waxa sii xoogeeyey Jabbaanka oo dalalkaasi qabsaday. Nimankii waayadii hore diiddanaa xukunka boqorrada iyo imbraadoorrada ee si qarsoodi ah dagaallada u oogi jiray, markanna gumaystayaasha waxay kala hortageen dagaallo qarsoodi ah iyo kuwo ay oogta ka caddeeyeenba. Reer Indoneesiya marnaba in uu Dhajku ku soo noqdo may rabin, sidoo kale ayaanay reer Fiyetnaam u oggolayn Faransiiska oo dalkooda mar labaad talis gumaysi ka sugta. Waji kastaba ha lahadee dadyowga Koonfurta Bariga Eeshiya dagaal ayey ku qaadeen gumeysiga u guntaday in uu muruqooda ku dul noolaado, naftana ku diiqo. Lafahooda ayey hureen, dalkooda ay jecel yihiinna way u dhinteen. Shisheeyaha nacabka ahna dagaal ayey kala hortageen.

Intii aanu Jabaanku soo weerarin 1941kii Fiyetnaam, Kamboodiya iyo Lagoos waxa ka talin jiray Faransiiska oo ula baxay dalalkaasi Indo-Jayna Faransiiska. Dagaalkii labaad ee adduunku markii uu dhammaaday ayaa Faransiiska ay u caddaatay inaan fiyetnaam laga doonahayn. Dadka Fiyetnaamta waqooyinna iyaku madaxbannaani ayaabay sugteen. Waxaana hoggaamiye u ahaa Ho Jii Minh, oo bartilmaameed u ahaa halganka xornimodoonka reer Fiyetnaam. Ho Jii Minh waxa uu yaraantiisii soo arkay hoos u dhigga iyo darxumada uu nidaamka hantigoosigu ku rido qofka aadamiga ah, waxa uu noqday adeege weelka u xala huteel magaalada London ku yaal. Waxa uu wax ku bartay Moosko, halkaas oo uu kula kulmay Lenin, Torotski iyo Istaaliin. Markii uu ku laabtay Fiyetnaam waxa uu abuuray Jabhad xornimo doon ah isaga oo kaashaday jaallihiis Fo Naguuyen Giyaab Guyaa. Habka dagaalkooda oo ahaa in maalintii ay dhuuntaan, habeenkiina cadawga miraan waxa u suura gashay kuna gargaaray degaanka oo kayn badan leh, buuro, kanaalo iyo meelo banaanba. Maw oo ka hadlay dagaalka qarsoodiga ah, waxa uu yiri «waxa jira dad aan garan karayn sida jabhad qarsoodi ahi in door ah wax uga tooggan karto iyada oo daba socota cadowga. Maxaa yeelay, waxa aanay garan karayn xiriirka ka dhexeeya ciidanka iyo dadka. Dadku waa sida biyaha oo kale, ciidankuna waa kalluun oo kale, . . . Sidee baanu markaasi kalluun biyo ugu noolaan karin?». Sidaa darteed Ho Jii Minh haddii uu dhaqan geliyey in dhulka uu siiyo beeralayda wax lala yaabo ay noqon karto in Fiyetnaam biyuhu ay kalluunka soo dhoweeyaan. 1945kii dagaalyahannadii Fiyetnaam oo maanta loo yaqaan «Fiyatkong» ayaa Jabaanka ka guulaystay, una fiigganaa inay Koonfur u soo gudbaan. Ho Jii Minh himiladiisii ahayd in la helo fiyetnaam wadajirta oo madaxbanaan in ay rumowdo ayaabay u ekayd.

Ciidammada Faransiiska hoobashadii ku dhacday 1940kii ayay aad uga xumaayeen, awoodda iyo xoogga dawladda Faransiiskana inay mid darban u muuqato ayey rabeen. Sidaa awgeed dawladda Faransiisku diyaar umay ahayn in faraha ay ka qaaddo dhul gumaysiyadeedii hore. Hortii Faransiisku wuu aqoonsaday

waqooyiga Fiyetnaam in ay qayb gaar ah tahay. Hase ahaatee, markii ay hubisay degaankiisa ay caga dhigtay, ayaa dawladda Faransiisku ku dhaqaaqday sidii ay u qabsan lahayd Fiyetnaamta waqooyi. In kasta oo gargaar, hub iyo lacagba leh uu Maraykanku siinayey Faransiiska misana taag iyo tamar uu ku muquuniyo Jabhadda Fiyetnaam, Faransiisku wuu waayay. Magaaladii ay maalin qabsadaanba habeenkii ayaa ciidammada Jabhadda Fiyetnaam qabsataa. Waxa qasab ku noqotay in ay habeen iyo maalinba ay ilaashaan magaalooyinka, tuulooyinka iyo waddooyinka. Faransiiskana waxa u kala caddaan waayey in ninka reer Fiyetnaam ee beeralayda ah ama kan u shaqaynaya iyaga uu col ama nabad la yahay. In kasta oo ay daaro, waddooyin, buundooyin iyo kanaalo dhiseen, waxa intaba ku xeernaa dagaalyahannada Jabhadda Fiyetnaam. Faransiisku waxay u taagnaayeen sidii nin biyo soo jabay mafiiq is leh ku celi. Siddeed sano markii la gaaray oo intaaba dagaal gawrac ihi socday, Faransiisku waxa uu u haliil qabay dagaalweyne ay ciidanka jabhadda iskaga horyimaadeen. 1945kii ciidammadii Faransiisku waxay saldhig gaashaandhig ah ka samaysteen Diyaan- Biyaan-Fuu, iyaga oo hiyiga ku haya in ciidammada Jabhaddu ay halkaasi ku soo weerari doonto. Tallaabadaasi waxay if-sanaysay laba qodob. Tan hore oo ah, in marka Giyaab askartiisa kala filiqsani ay isu soo ururto aanay heli doonin cunto iyo qalab ku filan. Ta labaadna, waxay ahayd Faransiiska oo qabay in jabhaddu aanay haysan hubka culus ee madaafiicda. Labadaa arrimoodba sidii uu Faransiisku filayey umay dhicin. Markii askartii Giyaab isu timi waxay noqdeen ciidan 80,000 ah oo keensaday cunto, hub iyo rasaas ay ku soo qaadeen baaskiilado ama ay kaymaha soo dhexmarsheen. Sidoo kale ayaa madaafiicda hubka culus rida ay askartii u soo walwaaleen, meelo gaashaandhig ku habboonaa u qotonsheen. Maalinba maalintii ka dambaysay Diyaan Biyaan Fuu ciidammada jabhadda ayaa isku xeerayay. Ciidanka jabhadda oo aad u tiro badan ayaa weerar ku qaaday Diyaan Biyaan Fuu, halkaasna, rasaastii iyo hubkii madaafiicda ahaa ayaa burburshay gaashaandhiggii Faransiiska. Sidaa awgeed Faransiisku dalalka Indo-Jayna waa uu ka googoostay.

Mar labaad ayaa Ho Jii Men u hanqal taagay in ay rumowdo ididiiladiisii ahayd in Fiyetnaam midowdo. Hase ahaatee, markanna gumeystaha saddexaad ayaa u cudud sheegtay. Shir lagu qabtay Jeniifa ayaa guddoonshay in waqooyi iyo koonfur fiyetnaam laba qaybood u kala joogaan inta la qabanayo doorasho ay dadku cod ku dhiibayaan si ay u dhisanto dawlad ay dadkoo dhammi oggol yihiin. Arrintaasi qolonaba may raalli gelin gaar ahaan dawladda Maraykanku waxay ka xumayd hubkii iyo lacagtii ay bixisay oo ka khasaaray iyo isla markaas siyaasaddii gumaysiga ahayd oo hirgeli wayday. Waxa u muuqatay in doorashada la qabtaa ay awood siinayso madaxda horusocodka ah ee Fiyetnaamta waqooyi. Sidaa awgeedna dawladda Maraykanku way diidday in ay saxeexdo heshiiskaasi Jeniifa. Dalka Fiyetnaam markaasi waxa uu u kala baxay qaybta waqooyi oo Ho Jii Minh u madax yahay iyo qaybta koonfureed oo Nego din Diyon uu xukumo.

Diyon muu rabin in uu doorasho qabto, maxaa yeelay waxa u ka cabsi qabay in dadka reer Fiyetnaam ay codkooda siiyaan madaxda siyaasadda ee Hantiwadaagga ah. Waxaanuu hubay in dadweynuhu ay kollayba Ho Jii Minh dooranayaan oo aanay isaga codkooda siinaynin. Waxa uu markaasi marmarsiiyo uu uga dhigay, doorashadana uu u qaban waayey, iyada oo uu ku andacooday askarta ka tirsan jabhadda Fiyetnaam, oo loo yaqaan Fiyat-Kong in ay weli joogaan koonfurta Fiyetnaam.

Taasina ay lid ku tahay heshiiskii Jeniifa. Arrintaas Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Maraykanka, ayaa ku raacay oo isku dayey in uu hirgasho aragtida Maraykanka ee ahayd in shiyuuciyaddu soohdinta ay Eeshiya ku leedahay aanay soo dhaafin. Waxaanuu isla waqtigaana asaasay isbahaysi ka koobma reer galbeedka iyo dawlado ka tirsan Bariga iyo Koonfurta Eeshiya. Maraykanku, dabadeed waxa uu Koonfurta Fiyetnaam u soo diray kaalmo iyo rag madaxda siyaasadda ee koonfurta Fiyetnaam kala taliya maamulka iyo sida dagaalka ay jabhaddu waddo loo jooin lahaa.

## DAGAAL MARAYKAN


Gargaarkii uu Maraykanku siinayey Koonfurta Fiyetnaam waxa uu dawladda Maraykanka ku noqday goob dagaal hor lihi kaga oogmo. Koonfurta Fiyetnaam waxay had iyo jeer ahayd qaran aad u taag daran oon gooni isu taagi karin. Maxaa yeelay, madaxda siyaasadda maahee, dadweynuhu badankiisu waxay la jireen jabhadda xoraynta, isla markaasna waqooyiga Fiyetnaam waxay rabtay wadajirka Fiyetnaam. Ciidammadeeduna niyo sifahaa leh ayey koonfurta u gelayeen. Madaxweynihii Fiyetnaam ee ugu horreeyay waxa uu ahaa nin katoolig ah, sidaa darteed dadweynaha badan ee Buudisamka aamminsana kumay caloolsamayan. Ninka reer Fiyetnaam waxa uu la soo saftay jabhadda xoraynta iyo madaxda hantiwadaagga ah, sidaa awgeed baana Maraykanku isugu howlay Koonfurta Fiyetnaam in uu ka abuuro dawlad jujuub ah. La-taliyayaashii ay hortii Fiyetnaam u direen waxa ay ku xigsiiyeen ciidammo. Ciidammadaasu waxay durba ku dhaqaaqeen weerar. Mar ay maraakiibta Maraykanku ilaalis ku maaxayeen gacanka Toonkin ayaa ciidammada badda ee waqooyiga Fiyetnaam xabbadeeyeen. Taasi ayey dawladda Maraykanku ugu marmarsootay duulaanno cirka ah oo ay ku qaadday waqooyiga Fiyetnaam. Maraykanku ka dib waa uu caddaystay, waxaannuu weerar ku qaaday Fiyetnaam. 1963kii ayaa la dilay madaxweynihii Koonfurta, diyon, arrintaasna waxa ka dhashay arrimihii siyaasadda ee Koonfurta Fiyetnaam oo sii liciifay. Niman ka tirsan ciidammada ayaa si isdaba joog ah u noqday kalitashadayaal milliteri ah. Dawladda Maraykankuna waxay ku gargaartay koonfurta Fiyetnaam askar tiro badan oo ay u dirtay. 1965kii waxa ciidammada Maraykanku ay dhammaayeen 125,000, laba sano ka dib 400,000 intii ka dambeysayna siddeed boqol oo kun ayey kor u dhaafeen.

Dad fara badan oo Maraykan iyo adduunka kaleba ku dhaqnaa ayaa aad uga horjeestay dagaalka gardarrada ah ee Maraykanku ku fara gelinayo ammuuraha Fiyetnaam. Dagaalka Fiyetnaam ka socday waxa ay u arkayeen kacaan xornimodoon ah oo Ho Jii Minh uu hoggaanka u hayo, hase ahaatee aan ahayn duullaan dawlad shiyuuci ihi mid kale ay ku weerarayso. Guuldarradii Maraykanka ka qabsatay iyo ayaandarradu kaalintooda ayey tilmaan u noqotay.

In cadowga ay la dagaallamayaan ay tilmaan ku helaan waxay u dhigan tahay sida qof is yidhi biyo baaldi ku jira iyo dhibic ku da'day kala sooc. In kasta oo Maraykanku Koonfurta Fiyetnaam ka dhisay, dugsiyo, waddooyin, guryo, cusbitaallo iwm. Misana dadweynuhu waxay rabeen lana safteen jabhadda xoraynta. Rag iyo dumar badan oo dadyowga adduunka ka tirsan waxay gadoodyo iyo bannaanbaxyaba ka holciyeen oo ay ku muujinayaan carada ay Maraykanka u qabaan, iyo taageerada ay u gudbin doonaan jabhadda xoraynta Fiyetnaam, Dadyowga geyig-

eenna ku nool arrin caynkaas u qaraar oo kaga yaabisay waa tan labaysay dagaalkii sokeeye ee dalka Isbaanishka. 1967kii waxa dagaalku u muuqday in aan dhinacna ku guuleysan doonin. Ciidammada Maraykanku tab iyo xeel toona ulama ay harin sidii dagaalka ay ugu libaysan lahaayeen. Gantaallada faantomka, madaafiicda, dawooyinka, beeraha iyo dhirta guba intaba ciidammada jabhadda iyo Fiyetnaamta waqooyi way u jilib dhigeen. Madaxweyne Nikson oo Joonsan xukunka kala wareegay 1968kii waxa uu ku dadaalay in nabad uu ka dhaliyo Bariga Fog. Intii uu xukunka hayey ayaa ciidammadii Maraykanka laga soo daadgureeyay Fiyetnaam. Hase ahaatee, ciidammadii Fiyetnaamta koonfureed waxa uu Maraykanku uga tegay hub iyo saanad lexaad leh, gargaar joogta ahna waa loogu ballanqaaday. In kasta oo heshiis nabadeed lagu kala saxeexday Jeniifa, misana dagaalkii halkii ayuu ka sii socday. Ciidammada Jabhadda iyo kuwa waqooyiga Fiyetnaam waxay u heegan yihiin israaca iyo midowga Fiyetnaam. Sannadkii 1975kii waxaa ka muuqday in yididiiladii adeer Ho Jii Minh ay rumowday ka dib markii ciidammadii Koonfurta laga qabsaday gobol ka mid ah kow iyo tobanka gobol ee uu dalku ka kooban yahay.

Hase ahaatee, aayaha Fiyetnaam sida uu ku dhammaado la arki doonee.




DALKA FIYATNAAM

## GOBANNIMODOONKII AFRIKA

Halganka gobannimodoonku waxa uu Afrika si dhakhsa leh uga oogmay dagaalkii labaad ee adduunku markii uu dhammaaday. Qaskii uu dagaalku dhaliyey ayaa dadka reer Afrika dhibaatooyin u keenay, nacaybkay gumaysiga u hayeenna sii shiday. Faransiisku ka dib markii uu ku hoobtay dagaalkii Indo-Jayna waxa khasab ku noqotay in uu siyaasaddiisa gumaysiga wax ka beddelo. Tunisiiya waxa uu bishii Julay siiyey isxukun hoose lix bilood ka dibna waxa uu Faransiisku sii daayay Maxamed Bin Yuusuf oo noqday boqorka Marooko. 1956kii, Tuniisiya iyo Marooko way madaxbannaanaadeen. Aljeeriyase, Faransiiska dhibaato hor leh ayaa kaga timi. Waxa halkaas degganaa dad Faransiis ah oo badan oo sadbursi siyaasi ah meelaystay. Cadaadintii muslinka lagu hayey waxa ka dhashay halgan. 1954kii koox yar oo ay hoggaaminayaan niman dhallin ihi ayaa abuuray Jabhadda Xoraynta ee Ummadda, waxaanay bishii Nofembar bilaabeen dhaqdhaqaaqii ugu horreeyay. markay jabhaddu laba sano jirtay ciidankeedu waxa uu gaaray 20,000 oo runtii qiir-qiire gashay ciidankii Faransiiska oo dhammaa 400,000. Faransiisku waxa uu isku dayey in uu go'doomiyo jabhadda, dabadeedna waxa uu soohdinta Aljeeriya iyo Tuniisiya dhigay waayiro danabsan oo la magac baxday «Xariiqda Mooris» Ciidammadii Faransiisku iyaga oon tab iyo xeel midna la hadhin ayay dadkii reer Aljeeriya cunaqabateeyeen. Hase ahaatee, jabhadda FNL waxa ay argagixis ku ridday ciidammadii iyo caddaankii Aljeeriya degganaa. Dadka Faransiiska ah waxa u caddayd ku dulnoolaanshada ay Aljeeriya ku qabeen. Sidaa darteedna jabhadda FNL waa ay ka horjeedee, dadweynaha waxa ay si been been ah ugu qasbayeen in ay fiirada ah: ku hoos jirka dawladda Faransiisku uga door roon tahay dhaqdhaqaaqa FNL. Hase ahaatee Jabhaddu dagaal iyo weerar ayay si isdabajoog leh Faransiiska ugu qaadday.

Ka dib markii uu «Digool» xukunka qabtay, ayaa 1959kii uu dadka reer Aljeeriya u jeedshay caddayn dhigaysay in muddo 4 sannadood oo nabadgelyo leh ku kala doortaan gobannimo buuxda iyo Faransiiska oo ay isutag la wadaagaan. Afti uu Faransiisku qaaday 1961kii waxa ay reer Aljeeriya goosteen in ay iyagu aayahooda ka taliyaan. Ka dib waxay ciidammadii Faransiiska ee Aljeeriya joogay isku dayeen in ay Aljeeriya la go'aan. ayaga oo uu hoggaaminayo Sarreeye Salan waxay ciidammadii isku dayeen in Digool la shirqoolo, dadkii reer Aljeeriyana si naxariis darro leh ayay u laayeen. 1962kii ayaa la qabtay Salan oo madax u ahaa ururkaasi ka falaagoobay Faransiiska oo la magac baxay OAS (Organisation de l'Armè Secrete). 1962kii ayaa qaskii iyo dagaalkii is-taagay, in ku dhow 600,000 oo reer Yurub ihina Aljeeriya ay ka guureen.

Horumarinta gobannimodoonku waxa ay Afrikada Faransiisku gumaysto ka iftay intii uu dhexeysay 1956-58 oo uu Faransiisku u soo bandhigay dalalka uu gumaysto in ay aayahooda ka tashadaan. Gini oo keliya ayaa 1958kii iyadu dooratay in ay gobannimo buuxda ay hesho. Ka dibna Faransiisku wax walba waa uu ka rartay Gini. Dalalkii kale waxa ay ka mid noqdeen beesha Faransiiska. 1960kiina madaxbannaani ayay heleen.

1956kii ayaa Ingiriiska ciidammadiisii oo dhan 15,000 dabkii Maw-Maw ay ka dansheen Kiinya. Taasina waxa ay dhalisay in Ingiriisku garwaaqsado dadka reer Afrika in ay gobannimo helaan. 1956kii doorashadii lagu qabtay Xeebta Dahabka

waxa ku guulaystay xisbigii CPP ee Nakruuma madaxa ka ahaa. Bishii Maajo 1957 ayaa xeebta dahabku gobannimo buuxda heshay, Gaanana la magac baxday. 1960kii dalalka Faransiisku gumeysato oo idil oo aanay ku jirin dalka Xeebta Soomaaliyeed madaxbannaani buuxda ayay heleen. Sidaas si le'eg ayaa Ingiriisku dalalkii uu gumeysanayey ugu wareejiyay madaxbannaani. Nayjeeriya 1960kii, Soomaaliya 1960, Siiralyoon 1961, Kiinya, Yugaanda iyo Tanganiikana intii waqtigaas iyo 1963 u dhexeysay.

1951kii Bortuqiisku waxa uu ku magacaabay dalalka uu gumaystaa in ay gobollo ka mid ah Bortuqaal ay yihiin. Waxbarashada iyo shaqooyinka farsamada labadaba waa uu ka horjoogay ummadaha Afrikaanka ah. 1957kii ayaa waxa abuurmay dhaqdhaqaaq waddani ah. Kumanaan qof oo ka tirsanaa dhaqdhaqaaqaasi ayaa ku gadooday gumeysatadii Bortuqiiska ee gobolka waqooyi ee Angoola. Taasi ka dib Bortuqiisku waxa uu u oggolaaday reer Angoola in ay noqdaan mawaadiniin, waxaana si aan joogta ahayn looga dhaafay shaqo-ku-qasabkii. Bortuqiisku isaga oo ka cabsi qabay in halgan xornimodoon ihi ka oogmo dalalka uu gumeysto, waxa uu kordhiyay ciidammadii dalalkaasi ka joogay. Dabadeedna waxay weerarro ku qaadeen hadba meesha gadooda ama dhaqdhaqaaq ka ifo. Dalalka Bortuqiisku gumaysto oo dhan ururro gaashaaman oo u fiigtay in ay madaxbanaani ku helaan bunduqa caaraddiisa ayaa ka hanaqaaday. Gini, Mosambiik iyo Angoola, Borrtuqiisku ciidammo laxaad leh ayuu keenay. 40,000 Angoola, 160,000 Mosambiik, 7,500na Gini. Ururka xoraynta ee Gini Bisaw waxa uu gacanta ku dhigay dhulka intiisii badnayd, Bortaqiiska ciidammadiisiina qiir-qiire ayey gasheen. 1974kii Bortaqiisku waxa uu oggolaaday in Gini ay dal madaxbannaan tahay. Shirkii UMA ee Muqdisho lagu qabtayna, Gini Bisaw waxa ay noqotay dalkii 42aad ee soo gala UMA sidoo kale ayaa Ururrada u dagaallama xoraynta dalalka Mosambiik iyo Angoola ay Bortaqiiska xoog iyo laxaad ku oggolaysiiyeen in madaxbannaani lagu wareejiyo. Heshiisyo dhigaya in Mosambiik gobannimo hesho bishii Juun 25dii 1975kii, Angoolana bisha Nofambar 11dii 1975kii ayaa la kala saxiixday. Haddiiba sannadkii 1960kii uu ahaa sannadkii gobannimada Afrika 1975kii waxa uu noqday sannadkii ururrada gaashaaman ee xoraynta dalalka weli gumeysiga ku jira.

Ingiriisku waxa uu rabay in uu Koonfur Afrika ka abuuro xiriirka Roodiisiya iyo Nayaasaland. Hase ahaatee dadkii Afrikaanka ahaa way diideen dhismaha xiriirkaas oo ay u arkayeen in caddaanka tirada yar ee midabtakoorka ah u meelaynayo. Xiriirkii waxa uu kala jabay 1963kii. Waqooyiga Roodiisiya 1964kii ayuu madaxbannaani helay, oo Saambiya la baxday, Nayaasaland waxay la magac baxday Malaawi. Koonfurta Roodiisiya caddaankii tirada yaraa ayaa doorashadii la qabtay 1962kii ku guuleystay iyaga oo adeegsanayey tab iyo xeel sadbursi siinaysay ninka cad. 1965kii ayaa Ian Smith oo doorasho ku sheeg la qabtay ku guuleystay, dabadeedna waxa uu ku dhawaaqay in Koonfur Roodiisiya dal madaxbannaan yahay.

## TAN IYO INTII AFRIKA MADAXBANNAANAATAY

Toddoba iyo tobankii sano ee u dambaysay dalalka Afrika badidood gumaysigii ay ka madaxbannaanaadeen wuxuu noqday arrin qaayo u leh Afrika iyo adduunkaba. Sifihii deg degga lahaa ee Afrika lagu kala qoqobtay qarnigii 19aad dhammaadkiisii, ayaa Ingiriiska, Faransiiska iyo Biljinku, sidiiyoo kale madaxbannaani ugu wareejiyeen dadkii reer Afrika oo ay gumaysanayeen..1957 ilaa iyo 1969kii in aan

ka yarayn 42 dal oo Afrikaan ah ayaa gobannimo qaatay, noqdayna saddex daloolow dalool qarammada ku jira Ummadaha Midoobay. 1974kii, Gini Bisaw ayaa Bortuqiiska bunduq caaraddiis gobannimo buuxda kaga qaadatay, sidoo kale ayaa FRELIMO ku dirqiday Bortuqiiska madaxbannaani in ay siiso Mosambiik, heshiis dhigaya in 25ka Juun, 1975 madaxbannaani lagu wareejiyo ummadaha Mosambiikna dawladda Bortuqiiska kala saxeexdeen. Angoola sidaas oo kale ayaa ururrada xoraynta Angoola cududdooda ku oggolaysiiyeen Bortuqiisku in uu madaxbannaani ku wareejiyo bisha Nofembar 11da 1975ka.

## RAADKII GUMAYSTAHA

Inkasta oo muddadii gumaysigu Afrika ku amar ku taaglaynayey aanay guud ahaan ka badnayn 70 sano, misna laba raad oon tirmi karin ayuu reebay. Kan hore oo ah in ummadaha qaranka ah ee hadda laga aqoonsan yahay adduunka, gumeystayaashu ahaayeen kuwii qorshaynta iyo jeexidda soohdimaha dalalkaas lahaa. Inta badan sidii ay reer Yurub u kala qoqobeen Afrika 1885 iyaga oo dad aan islahayanna isu geeyay qaar isku mid ahaana kala daadshay, ayey misna sifahaas ku taabbogaleen. Midka muhiimka ahi maaha qaska dagaallada iyo qalaanqalka ka abuurmay xuduudkii uu jeexay gumaysigu ee wuxuu yahay, in dalalka reer Afrika ee hadda madaxbannaani badankoodu ay raalli ku yihiin, kuna niyo san yihiin diyaarna u yihiin in ay daafacaan soohdimaha qarankooda. Gumaysigu muu abuurin ummado Afrikaan ah, ee se waxa uu taabbo geliyey qarammada maanta. Raadka labaad wuxuu yahay, mid ka yimi farsamada teknolojiyada ah ee dal wal oo madaxbannaaniba rabo inuu ku adeegsado horumarinta ugu itaalsado. Siyaabo kala duwan ayay gumaystayaashu u muujiyeen gacanta sare ee Yurub ku mutaysatay adeegsiga farsamada; ha noqoto waddooyin, isgaarsiin, hub ama macdan ay qotaan iwm. Gumaystayaashu waxay dejiyeen xeerar iyo sharciyo ay u fulinayeen ciidammada qalabka sita iyo booliska, maxkamadaha, habab maamul iyo waxbarid toos ah ama dadban; intaasuna ay saldhig u noqdeen fiirada ummad-qaran ahi sifa cusboon u raad-raaci lahayd. Fiirooyinka la xiriira cusboonaynta dalalka Afrika si horumar loo gaaro waa mid suuragelinteedu ku muuqatay hanti abuuradkii gumeystayaasha.

Farsamada Teknolojiyada reer Yurub raadka ay ku reebtay Afrika aad bay u qoto dheer tahay. Baabuurta iyo cagaf-cafagtu waxay suuragasheen ban iyo kaynta in la beero lana dego. Reediyowga, telefoonka, taarka iyo waddooyinku waxay si hor leh u beddeleen isgaarsiinta iyo warfaafinta. Alaabta warshadeysan ee reer Yurub sida daadka ayey miyi iyo magaalaba u gashay. Dugsiyada iyo cusbitaallada waddooyinka iyo tareennada, gawaarida iyo baabuurta, jaraa'idka iyo reedyowga, fooqaqa iyo daaraha. Ganacsiga adduunka iyo habayn dawladnimo waa aragti lagala haray gumaysiga, hase ahaatee u baahan in bulsho Afrikaan ah danaheeda loogu fusho. Alaabta warshadeysan ee reer Yurub ee Afrika maanshaysay, waxaan ka garan karnaa isku fillaansha li'ida farsamada iyo dhaqaalaha Afriki ay gumeystaha ka dhaxashay. Cusboonaysiinta Afrikaanku gaaray si umay wad taaban reer magaalka iyo reer miyiga ama beeralayda. Si kastaba Afrikaanku ha u jeclaadeen, taabista aqoonta farsamada ah, dadka badankiisu waxay wali haystaan kuna dheggan yihiin dhaqankoodii iyo hiddahoodii. In yar oo ah waxbarasho xul leh oo siyaabo badan u ah reer Yurub ayaa jecel dhaqanka shisheeyaha ah, ha ahaato afkooda, dharkooda, diintooda, maanifkooda, habka noloshooda, qaddariskooda, aragtidooda siyaasiga

ah iyo hiyigoodaba. Si lexaad leh ayaa badanka Afrikaanku u haystaa diinahooda iyo tan islaamka una tixgashaan, qadariska la xiriirana ugu dhaqmaan. Waxay ku nool yihiin tuulooyin beerahoodana hab hiddo ayay ku fashaan, noloshooduna kama duwana sifihii awoowayashood ku dhaqmi jireen. Caaqil iyo ugaas, wadaad iyo geed gooye, yiqiinta arwaaxda iyo sixirka intuba waxay ku unkan yihiin nolosha dadweynaha Afrikaanka.

Hase ahaatee, kaalinta dadka yar ee waxbartay ee xulka ah ayaa si lexaaddoon uga lexaad weyn tiradooda iyaga ayaa ah madaxda dawladda, qorsheeyeyaasha siyaasadaha, cusboonaynta, gar-hayeennada ra'yiga dadweynaha, wasaaradaha iyo wakaaladaha, afhayeenno qarannadooda uga ah adduunka. Dadka waxbartay ee xulka ihi waa koox beddeshay caddaankii reer Yurub, qarammadana ku maamula danaysigooda. Horumarka Afriki gaartaa ama dib-u-dhaca ku yimaadaana cidda loo aaneeyaa waa kooxaha waxbartay.




AFRIKA 1945




AFRIKA 1979

## BAAN - AFRIKAANISM

Dhalashadii UMA waxay noqotay arrin aad u qaaya leh ka dib markii uu hor u maray dareenka Baan-Afrikaanism. Baan Afrikanism maaha fikrad cusub oo gaar u ah qarnigan 20aad. Waxaad mooddaa in loo haystay fiirada Baan-Afrikanism inay ku biqishay dunida cusub oo nimankii madoobaa ee West-indies iyo Maraykanku unigeeda lahaayeen. Dadkii Afrikaanka ahaa ee waxbartayna ay ku ababeen fiiradaas ka dib markay la kulmeen Marcus-Garrey iyo WEB Du Bois oo Maraykanka madow ahaa. Hase ahaatee, Baan-Afrikanism Afrika gooni ahaan bay ugu rintay qarnigii 19aad iyadoo la dhalatay dhaqdhaqaaqii Itoobiya. dhaqdhaqaaq Itoobiya wuxuu ahaa dhaqdhaqaaq isaga oo adeegsanaya kaniisadda iyo diinta masiixiga, taabi rabay waddaninimo iyo midnimada Afrikaanka.

Dhaqdhaqaaqu wax xidhiidh ah lama wadaago dalka Abasiiniya ee loo yaqaan Itoobiya, dhaqdhaqaaqu waxa uu qaatay eraygaa Itoobiya (Ethiopia) micnihiisii waayadii hore oo u dhigma Afrikaan, amase dadka madow ee Afrika (Ethiopian-Africans). Taasina waxay salka ku haysaa yaqiinta diinta kiristaanka ee Psalm 68:31. «and Ethiopia shall soon stretch forth her hands into God». Qarnigii 19aad bartamihiisii ayaa Itoobiyanka galbeed Afrika u qaateen waqtigaas baybalku sheegay ee Afrika iyo Afrikaanku kor u kacayaan in uu yimid. Sida iyaga ay la ahayd Afriki may ku joogayn gobannimo ay hesho oo qudha, ee waxay hoggaanka u qabanaysay qaaradaha kale, iyada oo horumarinaysa cilmiga, sayniska iyo farsamada iyo aaminidda Ummad kiristaan ah.

Qofka ugu horreeyay ee fiirada midowga Afrika u giirtay wuxuu ahaa nin Afrikaan dhalad ah. Wakhtiga uu abaabulayay kasidda Midowga Afrika fiiradaasi Niyuuyork laguma hadal hayn. Ninkaasi wuxuu ahaa Jaymis Joonsan oo ku dhashay Siralyon 1835kii Shirkii ugu horreeyay ee 1900kii lagu maamuusay, kaalinta uu ka ciyaaray Midowga Afrikaanka laga bilaabo 1863kii ilaa 1917kii kolkaasoo uu dhintay Jaymis wuxuu si aada ugu baaqay isutagga Afrikaanka; diinta iyo siyaasadda wuxuu u qabay laba shay oon la kala qaadi karin. Wuxuu qabay diinta Masiixiyadu inay kaalin weyn ka ciyaari karto midaynta Afrikaanka. Sidaa awgeedna wuxuu ku dhadhabayey Afrika oo ku dhaqanta diintaas. Fiiradaas diin-siyaasad maamulka ku dhisani waxay la ahayd inay ciribtirayso qayb-qaybta iyo qabiilnimada. Afrika oo dhan oo wadaagta diin qura mid ayay noqon lahayd. Jaymis lid ayuu ku ahaa waanuu canbaareeyay qayb-qaybta kaniisadda Kiristanka, waxaanu isagu hiyiga ku hayey in ay kaniisad Afrikaan ahi soo baxdo oo maamulkeeda darsiga diinta, iyo habka Illaahay loo caabudayo intuba ay Afrikaani noqdaan. Diinta Kiristaanka ah iyo kaniisaddaba wuxuu rabay inuu ka miiro dhaqanka reer Yurub ee ay in badan ka biyo-cabtay. Xagga siyaasadda waxa uu qabay Afrika oo noqota qaran keliya. Isaga oo aad u necbaa kala qaybinta iyo qabyaaladdaba wuxuu si dhab ah ugu hanqal taagayay Afrika oo wadaagta xukun keliya qaran keliyana noqota.

Fiirooyinka iyo aragtida Jaymis Joonsan waxaan u soo hormarinay si aynu u ogaanno in Du Bios iyo Marcus Garrey hortood ay fiirada midowga Afrika ka dhalatay carro edegta Afrika. Taasna aanu micnaheedu ahayn in Jaymis oo keliya ay fiiradaasi maankiisa ka iftay ee ay weheliyeen rag kale oy ka mid ahaayeen, E. W. Balaydin iyo Joon Kilimbuu, oo labaduba si door roon ugu doodi jiray Midowga Afrika.

## SHIRARKII MIDOWGA AFRIKA

Dhaqdhaqaaqa midaynta Afrika muu ahayn mid ay tiirarka u dhigeen nimanka madow ee Ameerika ama West Indiiska degganaa. Nimankaasi waxa mahad loogu hayaa in ay ahaayeen abaabulayaashii shan shir oo ka mid ahaa lix shir oo loogu kulmay midowga Afrika intii 1900kii iyo 1945kii u dhexeysay. Raggaasi waxa ugu mudnaa Dr. W.E.B. Du Bios oo 1963 Gaana ku dhintay isaga oo shan iyo sagaashan sano jiray. Waxa uu ku dhashay dalka Maraykanka 1868kii. Intii uu noolaa waxa uu arkay iyada oo fiiradii uu ku taami jiray ay ka hirgashay Afrika. Ninka labaad oo la odhan jiray H. Silfistar Wilyamis waxa uu u dhashay dalka Tirinidad. Isagaanu ahaa ninka shirkii ugu horreeyay 1900kii ku qabtay London. Shirkii labaad ee Baan Afrikaan Kongress waxa lagu qabtay Baariis 1919kii, markaasi oo reer Yurub isla meel dhigi rabeen dhibaatooyinkii dagaalkii koowaad ee adduunka . Shirku waxa uu ku guubaabiyay reer Yurub in dadka reer Afrika isxukun loo meeleeyo lagana qayb gesho talada dalka. Shirkii saddexaad ee Golaha Midowga Afrika waxa uu ku kulmay 1921kii saddexda magaalo ee London, Baariis iyo Brusalis, kii afaraadna waxa uu 1923kii ku kulmay London iyo Lisbon, kii shanaadna 1927kii ayuu ku shiray Niyuu York. Shirarkaasi oo idil waxa ay ku baaqeen kuna dhawaaqeen baahida loo qabo in dadka reer Afrika laga qayb gasho taliska iyo maamulka dalalka ay u dhasheen.

Kii ugu mudnaa uguna dambeeyay shirarka noocaas ah waxa lagu qabtay Manjestar, 1945kii. Shirkani waa uu ka duwanaa kuwii hore, waxaana baaqiisu ahaa aayatashiga ummadaha. Dhaqdhaqaaq gobannimodoon ah ayaa markan ka ifayay Afrika, rag ka tirsan xisbiga Shaqaalaha ee Ingiriiskuna waxa ay guubaabinayeen dalalka la gumeysto in madaxbannaani la siiyo. Dar badan ayaa aqoonsaday gobannimada dalalka la gumeystaa in ay geed ka go'an tahay. Loodh Hayli waxa uu caddeeyey in gobannimada dalalka la gumeystaa aanay hadda noqon karayn wax laga doodo. Gobannimadu waa in ay noqotaa mid ka soo maaxda kana barbaarta fiiro demoqraadi ah. Nimankii shirkaasi isugu tegey waxay markii ugu horraysay shirkoodu guddoomay in baaqa warqadda Atlantika laga hirgasho Afrika. Nimankii shirkaasi ka qayb galay waxa ka mid ahaa rag badan oo markii dambe kaalin weyn ka ciyaaray halgankii gobannimadoonka iyo xoraynta dalalka Afrika. Ninkii ugu mudnaase waxa uu ahaa Kuwaame Nakruume, oo nin wal oo meesha joogayba kaga tooganaa xoraynta iyo midowga Afrika. Waxa kale oo ka mid ahaa H.O. Dhayfis, S. L. Akintoolo, Wallas Joonsan, oo ururka shaqaalaha ee Siralyon ka tirsanaa, Magnas Wilyamis, garyaqaano ka tirsan Nayjeeriya, Jooma Kenyaata iyo Bitar Abrahaamis oo Koonfur Afrika ka tirasanaa. Shirkani kuwii hore oo dhan waa uu ka horusocodsanaa. Waxa lagu guddoomay in Afrika gobannimo hesho, haddiiba, si nabad gelyo leh lagu waayana in xoog iyo cudud lagu doono ilaa la taabo. Go'aannadii uu shirku gaaray qayb ka mid ahi waxay caddaysay «In shirku uu ku niyo san yahay in muudo yar ka dib ay ummadaha Afrika iyo Eeshiya ay goynayaan dabarkii gumeystaha ee sanooyin tiro badan ku xirnaa markaas ay iyaga oo madaxbannaan isugu tagaan ay midoobaan, si ay uga gaashaantaan, weerarka reer galbeedka Imbiryaalistaha ah iyo kan shiyuuciyadda.

## SHIRKII GUUD EE AFRIKA

In kasta oo shirarkaasi hore ee aan soo sheegnay ay mudan ahaayeen, misana waa inaan xusuus u yeelanaa in fiirada Baan Afrikanism aanay noqon mid hana-qaaday oo laga aqoonsan yahay qaaradda Afrika intii ka horraysay 1957kii, kolkaas oo Gaana madaxbannaani heshay oo dabaysha isbeddelku Afrika ka oogtay gobannimada reer Afrika, gumeysigiina xiriirkiisii u goysay. Qaana waxa madax u ahaa nin ay si aad ah ugu dheer tahay midaynta Afrika. Isaga oo fadhigiisu yahay Akra Kuwama Nakrumah baaqiisii waxa uu u maan ifshay madax reer Afrika ah oo bari, galbeed iyo Koonfurba leh, taasoo gumeystayaashii jahawareer ku riday. Bishii Abriil, 1958kii dalalkii Afrika ee markaas gobannimo haystay oo ahaa Itoobiya, Laybeeriya, Liibiya, Masar, Marooko, Tuniisiya iyo Gaana; waxay yeesheen fadhi la magac baxay shirkii guud ee dadka Afrika. Waxa la guddoomiyay in Bisha Jannaayo 60kii ay ku kulmaan Tuunis. Shirkaasi laba sababood ayuu mid muhiim ah ku ahaa. Marka hore waxa ka qayb galay rag ka tirsan dalalkii aan wali gumeysiga ka hoos bixin, oo halkaasi waayo arag hor leh ka kororsaday, markay dib u laabteenna ku mintiday xoraynta dalalkooda. Tan labaad go'aannadii shirkaasi ka soo baxay waxay hordhac u noqdeen go'aannadii lagu abuuray UMA shan sano kaddib. Qarammadii halkaa ku kulmay waxay ku heshiiyeen in ay raacaan siyaasadda dhexdhexaadka ah, in ay tixgeshaan siyaasadda iyo sharafta dal walba oo iyaga la mid ah wixii is af garan waa ahna ay ku dhammeeyaan siyaasadda dhexdhexaadka ah. Waxaana uu shirku abuuray Xoghayn Guud oo Akra fadhigeedu yahay.

## URURKA MIDOWGA AFRIKA

Bishii Maajo 1963kii markii uu dhashay Ururka Midowga Afrika waxa caddatay niyadda ay Qarammada Afrika ee madaxbannaani u hayeen in ay isutagaan. Fiirada Baan-Afrikanism, oo isku duubi rabta, qarammada iyo dadka reer Afrika ayaa dhidbantay. Waxyaabaha saldhigga u ahaa isutagga waxa ka mid ahaa midabkooda, dadka cad ee iyaguna sheegta in ay reer Afrika yihiin laguma darin. Sida Koonfur Afrika iyo Roodiisiya. Iyaga oo ahaa dalal gumeysiga ku hoos jiray waxay ka cabsi qabeen in gumeystayaasha oo wali dhaqaalahoodu ku xidhnaa ay tab iyo xeelado hoosaaso ah ula yimaadaan.

Sida ku cad UMA, iyo sida ay qorayaasha reer Afrika ay muujiyeen, Baan -Afrikanism waxay u taagan tahay sharafta Afrika iyo dadyowga Afrika heerka ay ka gelayaan adduunka. Waxa ay ka horjeeddaa in dadka Afrikaanku ka hooseeyaan dadka caddaanka ah oo habeennimo dabiici ahi u gaar tahay sidaas awgeedna waxa ay u fiigan tahay in ay barbaariso Kasmo-midab, midab, madow; waxa ay ku guubaabinaysaa dadyowga reer Afrika in ay is aqoonsadaaan kuna kalsoonaadaan dadnimadooda. Midowga Afrika waxa uu ka horjeedaa is hoos dhigga gumeystayaashii hore, waxaanu hirgelin rabaa siyaasad dhexdhexaad hufan ah, oon Afrika ka dhigin goob ay ku looltamaan Bari iyo Galbeed. Baaqa midowga Afrika waxa ka mid ah «Afrika in ay reer Afrika yeeshaan» iyo in ay unkanto «qofnimo Afrikan ahi».

UMA waa urur ay ku jiraan qarammada reer Afrika ee madaxbannaani. Markii uu ururku dhashay ulajeeddooyinka loo abuuray ururku waxay tahay in kor loo qaado isutagga iyo ururku Afrika, in la isu duwo, lana dedejiyo iskaashiga si dadyowga Afrila loogu tebiyo nolol horumarsan, isla markaasna qaaradda Afrika laga tiro gumeysiga. Waaxda ugu sarraysa, waa golaha guud ee madaxda qarammada iyo dawladaha oo sannadkii mar kulma. Waxa ku xiga golaha Xoghayayaasha oo ka koobma Xoghayaha Arrimaha Dibedda. Hase ahaatee, shaqada inta badan waxa qabta Xoghaynta guud uu fadhigeedu yahay Addis Ababa.

Ulajeeddooyinka odayaashii abuuray Ururka Midowga Afrika waa qaar aad u bilan. Si cusboonaynta Afrika oo deg deg ah loo gaaro, waxa la abuuray guddiyo kala duwan oo wax ka qabta dhibaatooyinka bulshada Afrikaanka ah haysta ee la xiriira bulshada, dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iyo nafaqaynta. Waxa kale oo jirta guddida gaashaandhigga oo aan ulajeeddooyin si cad u qeexan lahayn. Hase ahaatee waxa jirta guddida xoraynta oo xarunteedu tahay Tansaaniya oo kaalmo iyo hubba siiya dagaalyahanka xoraynta ee dalalka Bortuqiisku gumeysto Simbaabwe iyo Koonfur Afrika, ulajeeddada ugu weynina ay tahay in dal Afrikaan ah oo gumeysi ku hoos jiraa uusan jirin.

Intii UMA uu jiray dhibaatooyin adag ayaa ka hor yimid. Dadka falanqeeyaana waxay badanaaba farta ku fiiqaan xafiiltanka iyo kala jabka qarammada Afrika. Hase ahaatee, guulaha uu ururku gaaray indhaha lagama dul lalin karo. Dalalka Afrikaanka dhawr arrimood ayey iyaga oo isku duuban cod keliya ka dhiibteen, gaar ahaan sida loo go'doomin rabo midabtakoorka dawladda Roodiisiya, Bortuqiiska iyo Koonfur Afrika.

Waxa kale oo aan la ilaabi karin kaalinta guddida xoraynta ay ka ciyaartay gargaarka ururrada xoraynta ee ka dagaallama dalalka Bortuqiisku gumaysto iyo kuwa caddaanka tirada yari ka taliyaan. Qulquladaha ka dhasha soohdimaha qaarkood ayuu ururku isku dayay in uu wax ka qabto, hase ahaatee, guushii ugu weynayd waxa ay ahayd, guddidii gaarka ahayd ee loo saaray arrintii Nayjeeriya, oo soo hunguri galisay gumeysatada. Hase ahaatee dawladaha xoogga ah way ku adkaatay in ay soo dhexgalaan arrintaas. Ka dib markii ururku isu dhigay in uu arrintaas ku dhammayn karo hab niyo Afrikaannimo leh.

Taas micnaheedu ma aha in aan UMA u aragno in uu yahay mid isku duuban oo ummuuraha meel uga soo wada jeeda. Fikradaha xubnaha ururka ku jiraa ay ka qabaan dhaqan gelinta himilooyinka UMA iyo tabaha loo adeegsan rabo wey ku kala geddisan yihiin. Kala qaybsanaanta Qarammada Afrika waxa ay ku aroortaa aragtida ay kula dhaqmaan gumaystayaashii hore ee ka tirsanaa reer Galbeedka. Xubnihii horusocodka ahaa ee Gaana, Gini, Maali, Aljeeriya, Masar iyo Marooko oo la magac baxay kooxda Kaasaabalanka waxay soo hormarsheen mashaariic ay gumeysigii hore iyo kan cusubba dhirbaaxooyin halis ah ugu gaysteen, waxaana la xisaabinayey in ay lid ku yihiin reer Galbeedka. Waxa isla markaa jiray koox kale oo lagu tilmaamo in ay raacsan yihiin reer galbeedka oo ku magacownaa Kooxda Manroofiya kana koobnaa Siralyon, Laybeeriya, Toogo, Itoobiya, Liibiya iyo kuwo kaleba. In kasta oo labada dhinac midna aanu raacin siyaaso habaysan, misana qaybtaa ku dhacday Qarammada Afrika waxay noqotay mid dhaawacday isku duubnaantii iyo midowgii UMA.

Aragtida ugu weyn ee lagu kala saftay waxay ahayd ta la xiriirta Afrika in ay yeelato dawlad keliya iyo madax keliya Nakruuma sida ay isaga la ahayd, Imbaryaalistaha iyo gumeysiga cusub tabta keliya ee lagu curyaamin karaa waxay ahayd in qaran waliba madaxbannanidiisa qayb ka mid ah u huro isutagga Qarammada Afrika oo dawlad keliya oo dhexe yeesha. Hase ahaatee, qaran waliba waxa uu ku gacma adaygi rabay madaxbannaanida dhowaan helka ah; waxayna qarammada badankoodu rabeen iskaashi dhaqan gal ah ee isku dar may u jeedin. Sidaa awgeed baaqii Nakruumah uu ururka u jeediyay 1969kii wuxuu ahaa mid si qabow dhegaha Qarammada Afrika ugu dhacay. Runtii isutagga Qarammada Qaaradda Afrika wax muddo yar ku hirgeli kara maaha waxaa baad mooddaa in midowga iyo isutagga gobolladu uu hadda isurogay odhaah halkii uu ka hanaqaadi lahaa. Haddaan soo qaadano Qarammadii Galbeed Afrika ee isku biiray si ay u midoobaan waxay 1958kii Gaana iyo Gini abuureen siyaasad geedka go'an ah oo la filayey inay sal u noqoto midowga Qarammada Afrika. Hase ahaatee jaangooyadii waa ay ka hoobatay markii la isku dayey in la dhaqan gesho. Sidaa si le'eg ayuu u wiiqmay midowgii Maali iyo Senigaal 1959kii oo u muuqday in uu abuuri rabay isutagga Dakaar ka fida ilaa Baraasiil. Sidaa si le'eg ayaa iyaga oon ku kala tagganayn deggaan iyo dhaqanba ay qarammada maqrib madaxdooda midowgu hadal kaga ekaaday. Suudaan iyo Masar hawl yari in kasta oy isu raaci lahaayeen misana waa la waayay. Bariga Afrika, in kasta oo Kiiniya, Tansaaniya, iyo Ugaandha ay wadaagayeen adeeg guud, misana markii qaran waliba gobannimo helay, waxa uu dejistay farsugyo gaar ah. Jaamicaddii Afrikada Bari waxay u kala baxday Kulliyadda Nayroobi, Makariiri iyo Daarasalaam oo midba iskeed Jaamicad u noqotay.

Waxa kale oo iyana ah mid loo fiiro yeesho, hiyiga iyo tiigaalka madaxda Afrikaanka oo ay adag tahay sida loo dhexdhexaadin karaa. 11 Bishii Febraabo 1966kii oo ahayd markii Kuwami Nakruumah la afgembiyay waxa ay dalal badani u haysteen nin aad u damac badan oo raba in uu afgembiyo dawladaha qarammadooda. Isafgaranwaa waxa kale uu ka dhexdhashay madaxda Maali, Tansaaniya iyo Saambiya oo ku kala tegey xiriirka qaran la yeelan karo Koonfur Afrika.

In kasta oo Afrika lagu kala geddisan yahay afafka Ingiriisi, Faransiis iyo Carabi misana qarammada qaarkood ayaa ku jira ururro kale oo ka baxsan ahaanshaha Afrikaanka, ulajeeddooyinkooduna aanay la xiriirin kuwa UMA. Haddaan tusaale u soo qaadanno Qarammada Afrikada Waqooyi iyo Soomaaliya waxa ay ka tirsan yihiin ururka Carabta, oo u fiiggan in ay Yuhuudda dhulkooda ka soo dhacsadaan. Waxa iyana jira dalalka Ingiriisku gumeysan jiray oo xubno ka ah barwaaqo sooranka Ingiriiska, iyo kuwii Faransiisku gumeysan jiray oo iyana ku jira beesha dhaqaalaha Yurub. Waxaabad moodaysay in qaybtaasi soo shaac baxday shirkii guud ee UMA ee Muqdisho lagu qabtay, markii la isku mari waayay doorashadii Xoghayaha Guud.

Waxa iyana jiray dhibaatooyin dhaliyay dagaallo ka oogmay soohdimaha Marooko iyo Aljeeriya, Soomaaliya Kiinya iyo Itoobiya. Arrinta Soomaliya iyo Itoobiya, in kasta oo lagaga wada hadlay shirarkii UMA ee 73kii iyo 74kii misana wax go'aan ah lagama gaarin. Waxa dhirbaaxadii ugu weynayd ku dhacday UMA, markii dagaal tolkii Nayjeeriya socday oo afar qaran oo Afrikaan ahi aqoonsadeen Biyaafara: xeebta Foolka, Tansaaniya, Saambiya iyo Gaboon. Hase ahaatee dalalka Afrika intoodii kale waxay isku dayeen in qaska ka oogmay Nayjeeriya lagu dhammayn karo dhexdhexaadin Nayjeeriyana aanay ku kala go'in.

In kasta oo ay dhibaatooyin hor lihi ku yimaadeen ururka, haddana guulaha uu taabay ma aha dar la iska dhaafi karo. Innaga oo ogsoon reer Yurubka isku tilmaama in ay xagga siyaasadda ku hormareen dhibaatada ka haysta midowga Yurub, waxaan garan karnaa in UMA uu wax jira yahay, una taagan yahay midowga iyo isutagga Afrika.

## XASILLOONI LI'I SIYAASADEED

Inkasta oo waxbaradkii xulka ahaa ay guulo u meeleeyeen UMA, misana hababkii siyaasadda ee gumeysatada laga dhaxlay waxay u muuqdeen dar aan danaha Afrika koobi karaynin. Se qabkeedu iyo dhakhsahoodu adduunka uu jahawareer ku riday taasoo dawladihii qarammada Afrika intii 1963kii iyo 69kii u dhexeysay midiba mar ay dhacday. Koox waxbaradka ah oo garabsata ciidammada ayaa koox kale afgembiyay iyagoon dadweynaha waxba weydiin. Dahuumi oo keliya shan afgembiya oo kulul ayaa ka dhacay intii 63kii iyo 69kii u dhexaysay. Qarammada wax afgembiya qaarkood sida: Gini, Saambiya, Malaawi, Tuniisiya oon wax afgembi ahi ka dhicin oo ay weli xukumaan madaxdii markii ugu horreysay talada qabatay, xasilloonida dawladahooda waxa halis gashay shirqoollo iyo kala go'a gobollada. Bishii Disembar 1962kii Xabiib Burqiiba waxa uu in yar kaga baxsaday shirqool qudha lagaga jari rabay. Bishii Jannaayo 1963 Silraanis Olombiyo oo ahaa madaxweynihii Toogo ayaa la dilay; Bishii Agoosto 63kii Fulbeert oo madaxweynihii Koongo ahaa ayaa la afgembiyay, 1964kii Nayjeeriya ayaa gariiray ka dib markii gadood ka dhashay dalka; 1965kii dalka Nayjar waxa lagu deldelay afar madax ah oo

xubin k ahaa Xisbigii Mucaaridka ahaa. 1965kii waxa isna shirqool lagu dilay Ra'iisal Wasaar iii Burundi, bishii Juunna Bin Beela ayaa afgembi lagu riday. Laba bilood ka dib Naa ir waxa uu ka war helay shirqool lagu afgembiyi rabay. Bishii Jannaayo 1966 Nayjeer: ya afgembi ka dhacay madaxdii dalka ayaa si qaab daran loogu laayay. Febraay o 1966kii Nakruumah ayaa isna afgembi lagu riday, isaga oon filanaynin. Bishii Sebtembar 1969kii ayaa ciidammadu boqor Idiriis xukunka kala wareegeen, bishii Oktoobar 21 1969 ciidammada ayaa xukunkii dalka Soomaaliya la wareegay. Bishii F. braayo 1971kii ayaa ciidammada afgembi ku rideen Milton Obote oo Yugaandha madax u ahaa.

## SABABAHA XASILLOONI LI'IDA

Isweydiin waxa leh sababaha salka u ah siyaasadda Qarammada Afrika waxa ay xasillooni u weyday. Waxa iyana isweydiin leh sababaha keenay in ka dib markii Qarammada Afrika ay madaxbannaani heleen uu muddo ku eg toban sano qas taran ugu ougmay? Dhawr siyaabood ayaa la isugu dayey in loo sharxo, hase ahaatee laba ka mid ah bal aan fiiro u yeelano. Tan hore waxa ay inaga dhaadhacsiinaysaa in gumeystayaashii si deg deg leh u guureen, iyaga oo dadyowga reer Afrika aan u carbin isxukun iyo dawladnimo midna. Kan labaad isna waxa uu ina barayaa in habab a siyaasadda iyo farsugyada dawladda ee gumeystuhu ka tegay aanay ahayn dar Afrika ka dhaqan geli kara ama lagaga adeegsan karo. Tan hore maaha jawaab qiimo leh; maxaa yeelay waxa ay u dhigaysaa gumeystaha mid Afrika u yimid una joogay in u dadyowga reer Afrika waxbaro, hawlahoodana u maamula. Fiiradaasi waa mid aan asaas lahayn.

Waxa hubaal ah in Faransiisku ka filayey dalalka u gumeystaa codkooda inay ku dhiibaan in Faransiiska ay isku beel noqdaan, Ingiriiskuna waxa uu dadka waxbartay ka qayb gelyay talada iyo maamulka siyaasadda intii dagaalkii IIaad ee adduunka ka dambaysay ka dibna waa uu xamili waayey gadoodkii ummadaha Afrika ee gumeysiga dabarka u jaray. Waxaaba ka jirtay dalalka qaarkood ee uu Ingiriisku gumaysn jiray Nayjeeriya, Gaana, Siralyon in uu la hayey xukunka muddo toban sano ah, oo sidii Koongo ku dhacday aan si kedis ah madaxbannani loogu wareejin. Hase ahaatee taa qodobeedu mid micna kordhinaysa maaha. Maxaa yeelay in kasta oo dalalka gaana, Nayjeeriya iyo Siralyoon Ingiriisku Afrikaanka muddo dheer ka qayb geliyay maamulka, misana intoodaba badi afgembi ayaa ka dhacay, dhinac kale haddii aan eegno dalka Gini oo madaxbannaani ku helay si kadis ah, Faransiiskuna si foolxun uga qalab gurtay, waxa ay ilaa hadda u muuqataa dal haysta xasillooni siyaasi ah.

Tan labaad ayaa runtii la garawsan karaa, waxaana hubaal ah in waxa ay Afrika xasillooni siyaasadeed u heli wayday ay ugu wacan tahay hababka siyaasadda ay gumeystayaashu Afrika uga tageen oon noqon karayn dar Afrika ka dhaqan geli kara. Habka maamulka hoose iyo adeegga shacbiga (civil service) ee Afrikaanka waxbartay ay farsamo ku garwadaani waa uu hirgalay. Hase ahaatee, markan u nimaadno agaasinka siyaasadda ayaa laba loo kala baxayaa. Dalalka Ingiriisku gumaysan jiray waxa uu uga tegey dimoqraadiyadda baarlamaanka oo ah jaadka reer Galbeedka ee ka hanaqaadi karta meesha ay ka jiraan laba xisbi in ka badani oo leh siyaasad ku dhisan mabda'a dadweynaha waxna qora waxna akhriyaa ay shantii sanoba mar aayahooda kaga taliyaan codkooda oy dhiibtaan.

Sidaas oo kale ayaa dalalka Faransiisku gumeysan jiray ay iyana midaa fartaas oo kale leh u raacan. Afrikase dadweynaha badankiisa oo keliyihi ma aha uun dar aan waxba qorin waxna akhriyin, eese waa bulshooyin uu nidaamkaasi doorashadu shisheeye ku yahay. Sidaa darteed haddii aan eegno Masar intii u dhexeysay 1923kii iyo 1952kii ama Soodaan kaddib intay gobannimada heshay ama Nayjeeriya intii ka dambaysay 1964kii, nidaamka baarlamaaniga ahi ugama hirgelin dalalkaasi sidii guusha lahayd ee uu dalka Biritayn uga fulay. Yaalaaba axsaabta siyaasadda ee Afrika markay taliska gacanta ku dhigaan ayey u fiigteen in xukunka aanay siidayn, markaas ayey u hawlgalaan siday uu tiri lahaayeen axsaabta ama dadka ka soo horjeesta.

Kaalinta Xisbiga Mucaaradka ahi weli mid taabba gal ah may noqon. Dalal fara badan oo Afrikaan ah ayaa madaxdoodu u dooddaa in fiirada xisbiga mucaaradku ay shisheeye ku tahay Afrika; xubnaha ka tirsan mucaaradkuna ay u taagan yihiin qas halkii ay la iman lahaayeen faalo iyo falanqayn wax dhisi karta, waxayna u guntadan sidii ay u afgembiyi lahaayeen xisbiga taliska haya. Waxa loo baahan yahay in dadka mucaaridka ah iyo dadka maanifsan, waxgaradka iyo waayo aragga ahi ay isku biiraan, kana wada shaqeeyaan xisbi kaliya si danaha qaranka loo hormarsho.

Madaxda Nakruumah intii uu noolaa Homphovet-Boigny, Keita intii uu noolaa, Sekou Toure, Nayreere, waxa ka taliya qaramo xisbi keliya leh. Dalka Masar xisbiga keliya ee jiraalkiisa la oggolaa ayaa taliska hayey tan iyo intuu abuurmay 1956kii. Dalka Laybeeriya in kasta oo aan axsaabta mucaaridka la mamnuucin, misana xisbiga «White Party» oo taliska hayey in ka badan qarni ayaa maamulka siyaasaddu gooni ugu sugan yahay.

Axsaabta siyaasadda ee mucaaradka ahi ma garawsan karaan dooddaa iyada ah, ee u jeeda in looga dayriyo xukunka madaxdoodana lagu surmeeyo. Waxa ay qabaan xukunka taliska haysaa ay ku dhaqmaan, siyaasado aanay iyagu oggolayn madaxda dawladuhuna ay noqdeen kalitashadayaal. Iyada oo ay caddahay in faraq u dhexeeyo siyaasadaha madaxa talada haysa iyo kuwa dibadda ka jooga ayaa misana waxa kale oo jira faraqa ka soo maxaa damac iyo tiigaal shakhsi ah, oo badanaaba ka muuqda sifaha ay madaxda dawladuhu u tiraan mucaaridka. Runtii waa arrin murugo leh in ay iska horyimaadaan taxa hoggaaminta siyaasadda madaxda u ah, oo waagii gobannimada loo halgamayey isku duubnaa. Badanaaba madaxda siyaasadda ee taliska qabataa madaxda dadka mucaaradka ah ee ka hortimaadda waa tirtiraan, sidii ka dhacday Gaana, Nayjer, Koongo iwm.

Hase ahaatee, xasillooni li'ida siyaasadda ee Qarammada Afrika looma aaneyn karo hoobashada habka dawladnimada Baarlamaanka ku dhisan oo keliya, ee waxa soo raaca qabyaalad, iyo askarta oo dalalka qaarkood madaxdii siyaasadda oo dadweynaha indhahoodii hoos uga dhacay cagta marisay. Sidaas darteed bal aan ka faaloono labadaas arrimood ee kale, iyada oon xusuus u yeelanayno afgembiga dalka ka dhacaa in ay sal u yihiin sababo iyo xaalado dal walba gaar u ah.

## QABYAALADDA:

Qarammo aad u tiro yar oo Afrikaan ah ayaa ka badbaada halista qabyaaladda. Waxyaalaha uu gumeystuhu abuuray bay ka mid tahay, in maanta ay jiraan ummad qaran ka koobma dadyow isir kala duwan leh. Haddaan tusaale soo qaadanno, Gaboon oo dadkeedu tiro le'eg yihiin malyuun barkiis waxa lagaga hadlaa afartan af Itoobiyana toddobaatan, Nayjeeriyana 250, Tansaaniyana 120, Saambiyana toddobaatan iyo saddex, Toogo afar iyo toban, Laybeeriya labaatan. Dawladihii gumeysiga marnaba iskumay deyin in ay darsaan sababaha iska horkeena qabiilooyinka, isku manay deyin in ay wax ka qabtaan, sidaa awgeedna dareenka qabiilnimadu waxa uu noqday dhuxul dambas huwan oo kale gumeystayaashu waxa ay madaxbannaani ku wareejiyeen ummad qarano ee se qarano dhisan gobannimo may siin. Sidaa darteed, markii gumeystayaashu dalalka Afrika ka baxeen ayaa qabyaaladdii soo shaac baxday oo ummad qaranku halis gashay. Dalal dhawr ah ayaa lagu tilmaami karaa inaysan qabyaaladdu dhaawac u geysan.

Dalka Soodaan qaskii ka oogmay in kasta uu ahaa mid la xiriira diinta, misana waxa uu ahaa mid saameeya faraqa u dhexeeya bulshada waqooyiga iyo koonfur kala degta. Dalka Yugaandha waxa khatar ku hayey Boqortooyada Bugaanda, Kiinya iyadana qabyaaladdu halis ayey ku haysaa, madaxtooyada cidda qaban doontana in ay khatar dhaliso ayaa laga yaabaa. Galbeedka Afrika xurgufta qabiilooyinka ka dhexeysaa waxa intaa u dheer; dadka xeebta deggan oo u badan kuwo waxbartay oo Kiristaan ah, iyo dadka miyiga oo aha Muslin si hidde ah ugu dhaqma. Dadka loo yaqaan Kiriyootas ee reer Siralyoon waxay ka soo farcameen qabiilooyinka Afrikada galbeed oo dhan, maxaa yeelay waxa la dejiyay qarnigii 19aad. Sidaas awgeed ayaanay wax isir ah la wadaagin bulshada reer Siralyon inteeda kale. Sidoo kale ayaa Laybeeriya sifahaasoo kale ugu sugan tahay. Qabyaaladdu waxa ay Qarammada Afrika ku tahay gacan giraangirisa xasillooni li'i siyaasadeed, oo dar halis ayey gelisay, dar kalana dagaal tol ayey ka dhex oogtay. Dalka Koongo ayuu ahaa kii, qarnigii ugu horreeyay qabyaalad ku kala go'ay markii uu madaxbannaanida helay. Moise Tashombe ayaa qabiilooyinka Kataanga ee Baluber, Lunda iyo Bayala 1960kii goostay. 1967kii qabiilka Ibo ee Bariga Nayjeeriya ayaa gobolkaasi goostay, dabeedna dhaliyey dagaal-tolkii socday ilaa iyo 1970kii. Dalalka Afrika intooda kale ciidammada oo u hoggaansan qarannimada ummadaha, hubna haysta aya is hortaagay in arrimahaasoo kale ay suuragal noqdaan. Halkaa waxa ka caddaaday in kaalin weyn ciidammda militarigu ka ciyaaran midnimada iyo sharafta dalalka qarammada Afrika.

## KAALINTA CIIDAMMADA MILATERIGA

Aan xusuus u yeelano in Bishii Juulay 1952kii ciidammadu Boqor Faaruuq xukunnka kala wareegeen, ilaa iyo maalintaasna ay maamul midaysan Masar ku xukumayeen. 1958kii ayaa ciidammadu Soodaan taliska u qabteen misana mar labaad ayey 1969kii xukunka la wareegeen. 1965kii ayaa ciidammada oo uu hoggaaminayo Gaashaanle Sare Hawaari Buumadyan Ban Bella afgembi ku riday, Buumidyan laftiisuna noqdy madaxweyne. Bishii Nofembar 25, 1965kii ayaa Sarreeye Mabuutu isna taliska la wareegay oo madaxweyne noqday. Bishii Oktoobar 21, 1969kii ayaa ciidammadu taliskii SYL kala wareegeen, Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre na uu Madaxweyne u noqday Golihii Sare ee dalka xukumayey. 1971 Miltan Obote ayaa Sarreeye Amiin uu afgembiyay,, dabadeedna uu madaxweyne dalka ka noqday. Iyada oo sababaha iyo xaaladaha dhaliyay afgembiga ciidammadu

ay dal walba u gaar yihiin, misana Taliyayaasna militeriga ahi waxay u muuqdeen kuwo goor walba Qarammada ka badbaadiya qas iyo kala go' isla markaana suga sharafta iyo midnimada qarammada. Ciidammadu waxay talada ka fadhiisiyeen madaxdii siyaasadda iyaga oo taageero ka haysta dadweyne aan sharaf iyo xurmo u hayn madaxda siyaasadda. Taliska ciidammadu waxa uu dalalka qaarkood ku sugmay kelitashi ka qaab daran xukunkii madaxda siyaasadda, ka dibna looltan ka dhex dhashay madaxda ciidammada afgembi iyo dagaalanna oogay. Si kastaba ha ahaatee ciidammada talada qabtay ma ay noqon gacan xasilisa siyaasadda qarammada Afrika.

## HANTIWADAAG IYO HANTIGOOSI

In kasta oo xasillooni li'i siyaasadeed ay ku dhacday, Qarammada Afrika ee madaxbannaan, misana siyaasadda dibedda, horumarinta dhaqaalaha iyo waxbarashada guulo ayey ka soo hooyeen. Isla markii ay gobannimada qaateen waxa qarammada Afrika la gudboonaaday in ay laba arrimood wax ka qabtaan. Sida ay uga dhex bixi lahaayeen xafiiltanka ka dhexeeya dawladaha hantigoosiga iyo kuwa hantiwadaagga ah. Gumeysiga cusubna waxaan ka arki karnaa himilada gumeystayaashii hore oo raba in ay gacanta ku dhigaan siyaasadda dibedda iyo tan gudahaba gaar ahaana ay rabaan sargooyadii dhaqaalihii gumeysiga oo ay sii dhidbaan. Siyaabo badan ayey qarammada Afrika ku muujiyeen madaxbannaanidooda, iyo xiriirka ay la leeyihiin dawladaha iyo xoogagga aan Afrikaanka ahayn, oo runtii gumeystayaashii hore niyo jab ku riday. Ururka Ummadaha Midoobay ee Qarammada Afrikaanku waxay codkoodii ku dhiibeen in Jamhuuriyadda dadka ee Shiinaha ururka loo oggolaado in kasta oo dawladaha xoogga ah ee reer galbeedku ay is hortaageen. Arrinta Galbeed Koonfur Afrika, Roodiisiya iyo dalalka Bortaqiisku gumeysto, waxa ay qarammada Afrikaanku iyaga oo wadajira codsadeen in dalalkaasi gobannimo buuxda la siiyo, dawladda midabtakoorka ee Koonfurta Afrikana ururka Ummadaha Midoobay laga saaro. Dhinaca xiriirka caalamiga ah, waxa dawladaha hantigoosiga ah iyo kuwa hantiwadaagga ahi isku dayeen in ay kala qaybsi labaad ugu looltamaan qarammada Afrika oo ay xubno ka mid ah beeshoodii noqdaan. Si markaasi ay raad ugu yeeshaan danahoodana uga fuliyaan, dhinac walba waxa uu u fidshay kaalmo ay ku filanayan soo dhoweyn gaar ah dawladaha kaalmada baxshaa. Sidaa awgeed ayaa dalalka Laybeeriya, Siralyon, Nayjeeriya, Malaawi, Kiiniya iwm loogu tilmaamaa in ay reer galbeedka u xagliyaan, Gini, Masar, Aljeeriya, Soomaaliya, Tansaaniya iyo Koongo Baraasafiilna in ay dawladaha shiyuuciga ah garab saaraan. Tilmaanta sifahaas lihi aad ayey runta uga fog tahay. Maxaa yeelay Qarammada Afrika maaha shax gacanta ugu jirta dawladaha xoogga ah oo ay hadba sida ay ula noqoto in dalalkooda dani ugu jirto. Xafiiltanka ka dhasha dagaalka qabow ee ay bari iyo galbeed isku hayaan wax dan ah oo Afrikaanka ugu jirta maa muuqato, sidaas awgeedna waxa ay raacaan siyaasad dhexdhexaad ah. Iyaga oo raacaya siyaasaddaasi ayey la dhaqmaan dawladaha adduunka, iyaga oo aanay xiraynin falsafadaha ay haystaan dawladahaasi. Waxaanay dawladahaasi la dhaqmaan iyaga oo danahooda soo hormarinaya. haddaan tusaale soo qaadano, markii ay dawladda Maraykanku diiday in Masar ay ka kaalmayso mashruuca Aswaan, Naasir Ruushka ayuu kaalmo weydiistay, ilaa iyo haddana Ruushku siyaabo badan

ayuu Masar u gargaaraa, iyada oo aanay Masar marnaba noqon mid farta hantiwadaagga Ruushka ka sargoostay. Qarammada Afrikaanku waxay xiriir siyaasadeed la leeyihiin labada dhinac, kaalmada labadaba way ka guddoomaan. Madaxbannaanida ay u leeyihiin aragtidooda siyaasiga ahi waxay ka muuqataa sifaha ay u fasiraan hantiwadaagga ee Karal Maarkis u qaateen, misana iyadoo caynkeeda ah may hirgelin. Waxayse qabaan in geyiga, degaanka iyo hantiwadaagga Afrikaanku ka duwan yahay kan reer Yurub, sidaa awgeedna uu hantiwadagga Afrika laga dhaqan gasha noqdaa mid ka duwan kan Ruushka ama Shiinaha. Tansaaniya iyo Soomaaliya waxa uu hantiwadaaggu u noqday tiigaalo lagu dhiso caddaalad ijtimaaci ah, hantida ummadaha loo sinmo. Tansaaniya iyo Soomaaliya hantiwadaaggu waxa uu nowqdaq falsafad abuuri rabta isku kalsoonida ummadda iyo wax wada qabsi. Isla markaasi dalalka muslinka ah ee Soomaaliya, Aljeeriya, Masar iyo Suudaan hantiwadaaggu waxa uu noqday mid aan lid ku noqon diintooda Islaanka ah.

**HORUMARINTA DHAQAALAHA**

Dadka ku nool qaaradda labaad ee adduunka ugu weyni waxa soo foodsaartay dhibaato ku aadda sidii loo hormarin lahaa dhaqaalaha iyo sida ummadaha Afrikaanka kor loogu qaadi lahaa noloshooda u samaysan gaajada, saboolnimada, cudurka iyo aqoondarida. Guusha Afrikaanku ka gaaro horumarinta dhaqaalaha ma aha oo keliya mid laftooda uun qiimo u keenta, ee se waa mid kaalmo u gaysan karta Ummadaha dalalka kale ee soo koraya, dalalka hore u marayna la tartansiin karta.

Qaaradda Afrika waxa ay si fidsan ugu kala geddisan tahay dhaqan duleedka, dhaqaalaha iyo farta siyaasadda. Sidaa awgeed in arrimaha Afrika la isku qaadaa way adag tahay, hase ahaatee kuwo ay ka siman yihiin ayaa jira inkasta oo arrimahaas aan soo sheegnay kala gooyaan. Dalalka Afrika waxay ku jiraan kala guurka habka gawsmadhaafka iyo dhaqaalaha gediska. Dadyowga iyo degaanka Afrika badankooda waxa taabtay xoogagga dhaqaalaha cusboon, hase ahaatee degaanka yaalaaba si cilmi ah looma darsin. In kasta oo hadda loo hawlan yahay, misana aqoonta loo leeyahay, salka tobograafiga, kharidadaha, barashada dhulka indha indhaynta carada iyo ciidda, raacdaynta mitaroolojiga, tirada dadka iyo tiro koobta intuba aad bay u yar tahay. Habab haddeysile ayaa beeraha lagu falaa xoolahana lagu dhaqaa, sidaa awgeedna soo saaridda qofka iyo qoodiguba aad ayuu u hooseysaa. Korsocodka aqoondarrida, cudurka dhalashada carruurta iyo dhimashadeeduba aad bay u sarreeyaan. Boqolkiiba dadka gala dugsiyada sare iyo jaamicadduba waa hooseeyaan. Degelka guryaha iyo caafimaadku waa mid aad u qaabdaran. Nafaqada cunnada loo baahan yahay si lixaad leh ayey u hoosaysaa inkasta oo qaaradda Afrika xoolo tiro badan lagu dhaqo.

Qofka Afrikaanka dakhliga sannadkii soo gala waxa lagu qaddaraa $100-115. Waxaase jira dalal qofka dakhligiisu intaas aan soo sheegnay ka yar yahay. 1964kii soo saaridda guud ee taranka waxyaabaha dalalka Afrika lagu sameeyaa waxa lagu qaddaray in qofku soo saaro.

Malaawi 138, Nayjer 48, Saambiya 198
Nayjeeriya 58, Toogo 84, Roodiisiya 234
Zayri 71, Kiiniya 86, Xeebta caaga 253.
Tansaaniya 73, Suudaan 104, Gaana 265
Ugaandha 77, Senigaal 198, Laybeeriya 269

Dalalka aan kor ku magacaabnayna waxay galayaan heer ka hooseeya kan kor ku qoran.

Dhulka inta la beero marka la isku daro shantii meeloodba saddex ayaa ku sugan habka gawsmadhaafka oo ay ka shaqeeyaan kala bar tirada dadka qaangaarka ahi. Xagga farsamo tunka Afrika waxay isku howlisay samaynta alaabta qaydhiin ee ka soo baxa beeraha, keynta iyo macdanta. Badanaaba warshaduhu waxa ay soo saaraan dhar, cunto iyo waxyaabaha la cabo, buuri, kabo, feernijar, abaabta dhismaha, iyo waxyaabo birta laga sameeyo. Waxa aad u muuqda dalalka Afrika horumar deg deg ah oo ku yimid degaanka magaalooyinka. Taasna waxa sababay dawladdu adeeggii bulshada ay u fidinaysay ganacsigii, dhismaha warshadaha oo intuba aan dhaafin soohdinta magaalo madaxda dal wal oo Afrikaan ah. Waxa lagu dhaliilaa horumarka dalalka Afrikaanku in aanu kor u dhaafin mashaariicda horumarinta ah iyo kuwa istuska ah ee had iyo jeer magaalo madaxda laga dhiso. Dadka intiisa kalena uu maggan u yahay mugdi, biyo la'aan, cudur, gaajo, duufaan ama abaar.

Isweydiinta Afrika soo foodsaartaa waxa ay tahay fiiradee ayaa Afrika d qi karta si bulshada Afrikaanku u taabo xaqa ay u leedahay in ay nolol farxad leh o hormarsan ugu noolaato. Culimo fara badan oo bari iyo galbeedba ka tirsan waxa ay aqoonsan yihiin in dal wal oo soo korayaa ay qasab ku tahay in u k dhaqmo Hantiwadaag u suura gelin kara horumar deg deg ah oo si qiima leh uga bixin kara dhibaatooyinka dhaqalaha, bulshada iyo siyaasaddaba ka haysta. Hase a aatee ilaa maanta dalalka u guntaday in ay itaalsadaan aragtida iyo fiirada dhisan e hantiwadaagga waxa ay yihiin: Gini, Koongo, Saambiya, Soomaaliya, Tansaaniya Aljeeriya, Masar iyo Suudaan. Dalalka intooda kale waxa ay ku dhaqmaan hant goosi aan waliba si doorran u fulin oo Afriki ugu hoobatay sidii hababka siyaasadd ee «Baarlamaanka ku dhisani» uga hanaqaadi waayeen qaaradda Afrika. Sargo yada dhaqaalaha ee gumeysiga Afrika kaga tegay waxa ay ahayd mid ku dhis alaabta qaydin oo dibedda loo dhoofsho, hase ahaatee, aan la isku hawlin dhis ha warshado soo saara alaabta xaddiga badan leh ee dibadda laga keeno. Waxa baal ah in horumarka iyo hodonnimada ay Yurub taabtay ay ku timi alaabta jaban i o shaqada jaban ee ninka Afrikaanka, kan Carabka iyo kan Eeshiyanka ahi u f isheen ku dulnoolaanshada gumeystada, mar labaadna ay macaash dheeraad ah gacanta u gesheen marka ay ka qaateen alaabta farsamatuman ee qaaliga ah. Afrika ilaa maanta horumar dhaqaale may taabin, taasna waxa ugu wacan iyada o maanta habka dhaqaalaha iyo ganacsiga adduunku ku dhaqmaa uu gacanta sa awood u siiyo dawladaha horumaray. Sidii go'aankii ka soo baxay shirkii dawladah dhexdhexaadka ah, waxa loo baahan yahay in jaangooyo cusub loo dhigo gan csiga iyo dhaqaalaha adduunka. Tallaabada ay dawladaha Carabtu ka qaad en iibka batroolka qaydhiin waa cashar ay wax ku qaadan karaan dawladaha so korayaa. Waxa iyana hubaal ah dalalka Afrikaanku haddii ay doortaan in ay ku haqmaan hantigoosi, ay micnaheedu tahay: Wakhti dheer oo horumar gaabis ah ke na, waqti

dheer oo ku luma in dad yari hantiyeeshaan, dadka intiisa kalena ay sugaan intii khayraadku soo gaari lahaa; iyo muddo intaas le'eg oo dalalka Afrikaanku ku hoos jiraan dalalka hodanka ah oo ah kuwii iyaku qas taranka dhaqaalaha Afrika ku riday. Sidaa darteed Afrika waxa ku qasab ah in ay qaadato habka hantiwadaagga ah oo unki kara ambabax horumar deg deg ah gaarsiiya.

WAXBARASHADA.

Iyada oon garansanahay in horumarka isbeddelka bulshada siyaasadda iyo dhaqaaluhu uu yahay waxbarashad, qarammada Afrikaanku aad bay isugu hawleen horumarinta waxbarashada, aqoonta laga helo waxbarashada waxa ay tahay awood ka dhigaysa dhalashada mid aan iska hortaagi karin qofka tiigaalladiisa siyaasiga ah. Waxbarashada Absani waa kabaal u noqotay turmarka sare ee bulshada, waxaanay muftaax u tahay hoggaaminta siyaaasadda, baayacmushtarka iyo shaqooyinkaba. Intii dagaalkii labaad ee adduunka ka horraysay, dugsiyada sare tiradoodu aad bay u yarayd, waxaanay gacanta ugu jireen baadariyada. Dalalka muslinka ahaa waxa ka jiray medarsado iyo malcamado. Runtii halkan ugama jeedo inaan kaga hadlo sooyaalkii waxbarashada, hase ahaatee, waxaan ku koobi karaa haraadka loo qabo waxbarashada heer kasta ha ahaatee in aan la tirin karin. Tuulo waliba waxa ay rabtaa in ay dugsiyada yeelato, degmo kastaana dugsigeeda sare, dal walibana in uu Jaamacad dhisto. Markii dagaalkii adduunka ee labaad dhammaaday waxa Afrika ka jiray shan Jaamacadood. 1964kii iyo 1965kii intii u dhexeysayna waxa ay tirada Jaamacaduhu tiigaaladooda la xiriirta in ay la talaabsadaan adduunka intiise kale wax ay ka muuqataa sifaha ay waxbarashada ugu fiigteen si ay tayada iyo tiigaalka nolosha dadyowga Afrika kor ugu qaadaan.